Ibeeso dhul u eki bay kugu dishaa wadaadna dad u eki.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa abeesadu waxa ay u egtahay dhulka sidaa ayey qofka isugu qarisaa oo u qaniintaa, wadaadkuna qof caadi ah inta and moodo ayuu ku habaaraa.

14. Abkay dooli dilow dad nool maas u daahaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa qofku hadduba uu wax dilow bilaabo jiirka yarba allaha ka dhigee, marka dambe qofiia wuu dilayaa.

15. Abti waa hooyo aan naas lahayn.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa ninka hooyadaa la dhashay oo abti kuu ah waxa uu la qiimo yahay duco iyo habaarba hooyadii ku dhashay oo kale,

16. Adeege ma baqee ninkiisa baqa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa qofka farriin qof loogusoo faray haba xumaatee ma cabsado ee waxa baqa qofkii soo direy<M..................................................... ......................................

17. Adigoo nabad la balawaara[4] belooy kaalay lama yidhaahdo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa qofka oo nabad iyo ladnaan ku j ira ma wanaagsana in uu llaahey ku mahdin waayo oo uu belo iyo baas sheegto.................................. ................................

18. Adoo harsan waayey ma laguu soo harsaday.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa qofka oo wax la'aan la dhibaateysau ayaa waxa muraad u soo yeelan kara qof kale oo waxtar ka doonaya.

Telegram Somali Books @som_Books

19. Aduun deris aakhiro deris baa la yidhi.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa adduunyadana deriskaaga xaq dhawr, si aad aakhiro deris wanaagsan u yeelato.

20. Aduun waa harka labadiisa gelin.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa wax haynta aduunyada waa sida hooska isubedela subaxa iyo galabta oo maanta haddii aad wax haysato, beri ayaad wax la*aan noqon kartaa.

21. Aduunyo in lawada joogo shiidaad[5] baa diiday aakhiro in la wada joogana carnal baa diiday.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa dadka walaalahaah iyo kuwa saaxiibada isjecel ah ama qoyska isdhalay inay weligood meel wada joogaan waxa anti u saamaxeyn dhibaatada aduunyada. Aakhiro inay mccl wada tagaana waxa aan u saamaxeyn camalkooda.

22. Aduunyo orad laguma gaaro.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa waxaa wanaagsan in qofku aanu oradka iyo ha wada iska badin ee si degen uu noloshiisa u mareeyo..........................................................................

23. Aduunyo waxaa laga wareystaa nin kaa weyn aakhirana nin kaa cilmi badan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa si aad nabad iyo horumar ugu noolaato adduunyada la tasho qofka waayo aragga ah, aakhiro si aad janno u gashana la tasho qof cilmi diineed . leh■

Telegram Somali Books @som_Books

24. Af aamusan ma xujoobo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa qofkuhantidadhabta ah e:e uu ku faano waxa weeye midda isaga uutabcado ee uu ku dhidido. ,

25. Af aamusan Marti ma sooro.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa qofku hantida dhabta ah ee uu ku faano waxa weeye midda isaga uu tabcado ee uu ku dhidido. ................................ ................... ....... .........……..

26. Af buuxa erey ma karo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa qofka isaga oocunto afka ku haya, haddii la salaamo ma celinkaro jawaab manahadli karo haddii uu damco inuuhadlo, .

Telegram Somali Books @som_Books

27. Af caytamay ninkiisaa ku yaal.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa in uu qofku ogaado in aanay cayda iyo aflagaadado wanaagsaneyn. Waxa ay dadka kale ama qofkii la caayey laga rabaa dulqaad iyo dab eecad wanaagsan.

28. Af daboolan waa dahab.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa qofka marka uu aamusan yahay wax xumaan iyo xan ah ma sheegayo markaa dembina ma gelayo dadkuna way ka nabad gclayaan.

29. Af joogo looma adeego, adimo lo'aadna looma arooro[(6)]'

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa qofka golahajooga isaga ayaadantiisa ka hadlaya ee maaha in aad u hadasho isaga oo aan ku wakiilan. Lo' duna looma tilmaamo inay biyo doonato. Waayo iyada ayaa kaa biyo jeceh

30. Af macaan gacan macaan baa dhaanta.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka baahan ma doonayo salaan iyo sheeko macaan ee waxa uu u baahan yahay wax sim.

31. Af wax cunay xishoo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; qofka laaluush qaata ee hawl fududeyn la siiyo garta iyo cadaalada sida ay tahay ee xaqa ah uma soo oogi karo ee waxa uu wax ku xaliyaa xeer jajabamaeex,.........................................................................

32. Af xumo nabadna waa kaa gaysaa[7] colaadna wax kaagama tarto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; hadalada xun iyo caayda naceyb iyo colaad ayey kuu abuuraan, marka la

Telegram Somali Books @som_Books

33. Afeef[8] hore lahaw ama adkaysi dambe lahaw

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; qofka marka uu doonayo in uu wax dad ka dhexeeya sameeyo waxa uu ka cudur daartaa haddii uu qalad sameeyo in aan loo qabsan. Haddii uu sidaa sameyn waayo dhaliisha la dhaliilo ha u adkeysto.

34. Afow yeelkaa uurow allaa ku og.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka dulqaadka badan ayaa waxa uu yiraahdaa marka uu arko qof afxun oo aan dhaqan wanaagsaneyn xumaanta uu afka ka sheego dan ka geli maayo, xumaanta uti caloosha ku haystana llaahey baa arkay.

35. Afkiiba'ay yidhi tubti[9] waakaraa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku haddii uu dembaaho ama uu xumaan samceyo wuu ka soo noqon karaa dembigii iyo xumaantii oo waa la caiin karaa.

36. Alif kuu hagaagaa albaqruu ku gaarsiiyaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: arrin kasta niarka ay bilowgaama aasaaska laga too siyo ayaa ay meel wanaagsan qofka gaysaa ama ku dhamaataa.

37. Alla Aamin ma iisho[10]

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka Ilaaheytaladiisa saarta, ma dhibaatoodo oo waqtiyada adag wuu ka gudbaa.

38. Allaa watoo wehel uma baahna

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka uu Ilaahey ilaalinayo difaac iyo gaashaan uma baahna.

39. Allana la kala baryi og ereyna la kala odhan og.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dadku way kala cabsi badan yihiin oo kala duco badan yihiin. Haddana way kala aftahansan yihiin oo hadalka kala heli ogyihiin.

40. Aliena intaada jilicsan baa la tusaa, aadanahana intaada adag

DuJuc: Maahmaahdan macnaheedu waa: waxa wanaagsan inaad isnugleyso oo 11 aahey aad baahidaada tusto. Dadkuna isu-adkeyso oo aad iskufdnaantaada u muujiso.

Telegram Somali Books @som_Books

41. Allow nimaan wax ogeyn ha cadaabin.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in ay jiraan waxyaabo badan oo ku talo gal la'aan u dhaca. Qofka aan kas wax u sameyna waxa uu mudan yahay in loo cudur daaro»

42. Ammaano kugu raagtay inaad leedahay ayaad moodaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka haddii wadecco ama alaab loo dhiibto ec qofkii uu waayo badan soo noqon waayo, ammaanadii waxa ay dhexgashaa hantidiish. Ka dibna waxa uu ku tirsadaa waxa uu leeyahay.

43. Anigoo bannaan arkaya maxaa babac(11) i saaraaya.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa; qofka oo dembi la'aan iyo meel aanay dhaliil ka soo gaareyn heli kara maxaa wax dembi iyo dhaliil ay ka soo gaarayaan gelinaya.

44. Anigu ku sheegi maayee shan bilood yey ku sheegin.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofku ogaado inay jiraan waxyaabo badan oo aan la qarin Karin. Sida haweenayda uurka leh oo kale. Sidaa oo kale waa in qofku ku baraarugsanaadaa wixii mar uun soo bixi doona, inaan qarintood lagu ceeboobin.

45. Anqaw isku dhufte isagaa u dhutiya.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka gaeantiisa iyo qorshahiisa isku waxyeelecya isaga oo keliya ayaa u dhibaatooda.

46. Aqoon la'aani waa iftiin la'aan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: cilmigu waa iftiin uu qofku ku kala garto saxda iyo qaladka. Jahliguna waa mugdi qalbiga iyo maskaxda hareeya.

Telegram Somali Books @som_Books

47. Aqooni arag kama horeyso.

Duluc* Maahmaahdan macnaheedu waa: marka uu qofka wax arko ayaa ay u bi laabtaa aqoontooda dhabta ah .waayo waxa aad aragtay ayaad ka garan ogtahay wax laguu sheegay.

48. Ardaa[12] nabadeed baa aroosyo leh

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: gole iyo deegaan aanay colaadi ka jirin ayey dhalinyaradu isku arkaan oo ay isku ............guursadaam.

49. Adduun nabad lagu waayey waa aakhiro janno lagu waayey

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: xiHiga liolosha aduunyada wax nabad ka qaalisan ma jiro, Marka aakhiro ta tagana wax janno ka qaalisan oo llaahey wejigiisa ahaynma jiro.•

50. Adhi been waa didaa beense ma dhutiyo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: arigu baqdin gashay darted i nicel aan bahal j oogin wuu ka didi karaa, Laakihi marka uu dhuntinaya beentiisa ma aha oo qodax baa ku jirta.

51. Adhi j ir ma kala abaal waydo

Duluc: Maahniaahdan macnaheedu waa: carruurta ariga maalintii raacda, wanaagga ay isu sameeyaan si dhakhso ah ayey isugu gudaan. Waayo baahida dhexdooda ayaajoogto ah.

52. Arrin aan laguu dirsan eed[13] baa kaa raacda.

Duluc: Maahniaahdan macnaheedu waa: qofka iska gala arrin ama hawl aan loo dirin oo dad ka dhaxeysa; Waxaa laga yaabaa natlijada ka soo baxda inay raali gelin waydo dadka qaarkood oo markaa lagu dhaliilo

5 3. Arrin keen ahow ama aqbal[14] keen ahow.



Telegram Somali Books @Som_Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dadku waa nololwadaag, Qoysama shaqo, MarkawaaimiutalQwmgmkeeno ama taladii la kccno uu taageero.

## 54. Arrin ku dhaaftay aah[15] maceliso.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: talo kaaxumaatayoo aad ku degdegtay ama meet marnoqon wayday shalaay dambe waxba kama tari karo.

## 5 5. Arrin nin galay eed gal.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka xaajo ama hawlo kale oo nolosha la xiriira gala, taas oo aad badan saameynaysay way adagtahay sida isagaoonadiifah uga dabaasho. Waayo qaar mm baa sida uu wax u maamulay cabasho ka keena,

Telegram Somali Books @som_Books

## 56. Arrin talo shalay kuma dambey so.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: haddii ay dadku waxa ay sameynayaan ay ka tashadaan, wixii arrintaa ka xumaada lagama qoomameeyo.................................................... .........................

## 57. Aroos laguma raago lagamana raago

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in aroosku ka mid yahay waxyaabaha la dedejiyo. Sida meydka oo kale niaxaa ycelay waxaa culcyska la ga qaadayaa lammaanaha cusub..

## 58. Aroosaa miskiin maaha.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka guur u hawooda.ee go'aansada in uu reer yeesho dhaqaale ahaan miskiin ma ah oo wax wuu haystaa. Waayo guurku waa hawl xoolo u baahan.

59. Arrad waadan uskakse[16] waadoqonimo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa;qofka in uu dharku ka dhamaado oo maryo jeexjeexan oo duug ah uu xirto ceeb maaha ee waxa ceeb ah in uu xirto dhar wasakh ah haba cusbaadee>

60. Arrin xurno abaar ka daran.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: talo xumadu waxa ay ka xun tahay faqriga iyo wax la'aanta. Waayo talo xumada waxa ka mid ah qorshe xumada xagga dhaqaalaha.

61. Atoor[17] sagaaro intiisa waa ku duq.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: sagaarada labka ah ee atoorka la yiraahdo haba bar ama nis yaraadee intiisa wuu ku da'weynaan karaa..

62. Awr awr wado iyo nin naagi waddo midna kaama leexo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: rati uu cunayo oo dilayo rati kale iyo nin ay soo dirtay haweenay midna kaama noqdaan oo w ay ku jiiraan ama ku waxyeeleeyaan.

63. Awrka yari awrka weyn ayuu saan qaadkiisa leeyahay

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: ratiga weyn sida uu u socdo ee ah lugta uu qaado iyo meesha uu dhigo ayuu awrka yama raacaa oo ku daydaa.sidaa oo kale qofka weyn waxa uu sameeyo qofka yarna wuu ku daydaa oo sameeyaa<

64. Ayaamihii waa tageen ayaan daraase hartay

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waamiaalmaha dhibaatada iyo wax la'aanta way tagaan, laakiin waxa ay ka tagaan nasilb xurno ah ceeb aan dadka qaarkii ka go'ayn.•

Telegram Somali Books @som_Books

65. Ayaanley[18] aqal ma weydo.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: gabadha nasiibka badan si kasta oo uu waqtiga uga hiiliyo guur ma weydo oo calafkeeda way heshaa.

66. Ayax tag eelna[19] reeb.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: cayayaanka Ayaxa la yiraahdo waxa dhaqankiisa ah meesha uu ku dego ee uu ka guuro in uu ugxan ku dhalo. Kuwaas oo marka dambe soo dhasha oo Ayax cusub noqda. Dhibaatada gumeysiga ayaa la mid- ah oo meesha laga xoreeyo wakiilo ayuu kaga tagaa.

67. Baadi daawadeed waa in la helo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: haddii ay xoolo mood iyo nool mid nun ah ay lumaan Faa'iidada ay leeyihiin waa in la helo oo dayaca laga soo hooyo.

68. Baadi iyo ninkii lahaa aragti baa ka dhaxeysa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: xoolaha luma nool iyo mood midka ay doonaan ha ahaadeene qoikii lahaa haddii uu arko baryo iyo baqdin midna ma oo isaga ayaa kaxaysanaya ama qaadanaya.

69. Baadi lo'aad ceelkaa loo fariistaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: haddii lo'du ay dhunto waa wax biyo jecel oo oonka u nugute, halkii laga waraabin jirey ayaa loo fariisanayaa. lyadaayaa halkaaimaaneysa.

70. Baadi nimaan lahayn bay agjoogtaa.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: baadidu marka ay qofkii lahaa ka dhunto, badanaa meel cidlo ah ma joogtee waxa hela oo gacanta ku haya qof aan lahayn oo ammaano ahaan uhaya.

Telegram Somali Books @som_Books

71. Baahi badan iyo bugto badanba waa la isku nacaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dadku qofka waxa ay ku nacaan markaay baahidiisu badato ama cuduradiisu ay bataan ee uu bukaan socod noqdo.

72. Baahiyi nin kuu daran bay kuu geysaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: markaay qofkukudhacdo dhibaato wax Iaᵛaaneed ee uu gaajoodo xishoodkii iyo sumcadii uu dhawran jirey meel ayuu iska dhigaa oo xitaa cadowgiisa wax buu weydiistaa.

73. Bad dhan hal Malaay baa qudhmiya

Telegram Somali Books @som_Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qoys ama bulsho dhan waxa magacooda iyo sumcadooda haleeya oo ku eiyaara hal qof oo iyaga ka mid ah oo dhaqan xun ku kacay.

74. Baqal baa la yidhi aabahaa waa kuma, hooyadey wʳaa Faras bay tidhi

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: baqashu waxa iska dhalay dameer lab ah iyo Faras dhedig. Marka waa qofka oo ku faana meesha ay dhalashadiisu ka fiican tahay. Dhanka aabbe misc dhanka hooyo ..

75. Bakeyle intuu bur[20] ku jiro ayuu bur kale daydaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: bakeyluhu waa xayawaan caqli badan. Marka uu meel dcgan yahay geed ama god waxa uu sahansadaa meel kale oohaddii cadowsoo weeraro uu.galo. Qofkuna inta uu fursadhaysto ayuu iursado kale sameystaa.

76. Barasho dad waa markay barwaaqo tagto.

Duluc: Maahmaahdan niacnaheedu waa: qofka waxa aad si dhab ah ugu baran kartaa marka aad soo wada martaan xilli adag oo abaar ama colaad ah, Waayo dhaqankiisaruntaah ayaa soo baxaya,

77. Ballan badan waa been badan.

Duluc: Maahmaahdan niacnaheedu waa: qofka ballanka badan ee niarkasta waqtiga uu qabsaday dheeraysta ama qofka warwareejiya ee oofin waaya, Waxa ay tilmaan u tahay beentiisa.

78. Ballan darro waa diin darro

Duluc; Maahmaahdan niacnaheedu waa; qofka aan ballanta nu qaado aan oofineyn> waxa ay tilmaan u tahay in aanu qofkaa diintaku wanaagsaneyn.

79. Ballan habeenimo kaakac arooryo ayey leedahay.

Duluc: Maahmaahdan niacnaheedu waa; marka ay dadku shaqo ama arrin kale ay habeenkiikuballamaan inay subixii qabtaan waxa iyada oo la isku duuban yahay la toosaa xilli hore>

80. Ballan waa deyn.

Duluc: Maahmaahdan maonaheedu waa: qofka ballan galla oo qof kale ka qaada niacnaheedu waa qof deyn kugu leh oo kale ilaa aad ballankii u oofiso..................................

81. Banaankii mare maradiisa geed ma qabsado.

Duluc: Maahmaahdan niacnaheedu waa: qofka xumaanta iska dhawra ee meet dheer ka istaaga, dhibaato iyo denibi ciriiri geliya uma imaanayaan.

Telegram Somali Books @som_Books

82. Baqal fardo la miratay faras bay is mooddaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; qofka dad uusan la heer iyo dhaqan ahayn la dhaqma waxa uu nioodaa in uu iyaga ka midyahay.

83. Baqashu ma dhasho wax dhalana ma jecla.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka waxa uusan isagu lahayn a ma awood u lahayn dadka kalena uma ogola xaasidnimo darteed inay lahaadaan ama ay awoodaan.

84. Baqti wareen[21] waaxaaraan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qof dhmtay in wax xun laga sheego lama ogola. Waayo inta aduunyada uu ku nool yahay ayaaba Iaguu diiday ijaad xamato.

85. Baqtiga ma cunee fiiudkiisaan cabbaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado waxa xun ay wada xun yihiin, waxa wanaagsana -ay wada wanaagsan yihiin. Sida xoolo Jafahoodu xaaraan yihiin inaanay faa'iidadoodu xalaal noqon Karin.

86. Barasho horteed ha i nicin

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: ma haboona in aad qofka ku nacdo wax lagaaga sheegay ama qiimeyn dusha ah oo aad ku sameysay. Laakiiu waxa aad dhab u baran kartaa marka aad wada hadashaan ee aad wada dhaqantaan

87. Barasho yari waa bil saddeexaad

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka oo aad inyar ka barato ama ka taqaan xiriirkunu uma raago sida bisha habeenka ay saddex tahay aanay circa ugu raagin.

Telegram Somali Books @som_Books

88. Baraaro aan bahdaa kula qabin, waa bar kuma taal

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; nimcada iyo nolosha wanaagsan waxa ay ku fiican taliay in ay dad aadjeceshahay kula wadaagaan. Haddii aad keli ku noqoio si fiican uguma. raaxeysaneysid oo waxbaa kaa maqan.

89. Baroortu[22] orgiga ka weyn.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka oo ka cawda wax yar iyada oo ay wax kale oo qarsoon u weheliyaan.

90. Barrow iyo barrey waa isku baadi maqan yihiin.

Duluc: Maahmaahdanmacnaheedu waa: labo qof oo midba midka kale waxa uu u haysto inuu yahay mooyee isaguna wax kale oo aan meeshaba oolin isagana u haysta.

91. Bartii yaqaan bari uma korodho.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka marka xoolo badan oo shirko ah isaga intiisii uun daba orda ee dacalka ku dheaenaada, faa'iido badan kama helo ganacsigiisa.

92. Baruur baa baruuro qudhmisa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qof xun ayaaduufsada oo luiniya dad badan oo kale oo wanaagsanaa. Sida ardayga xun uu iskuulka uga saari karo arday kale oo saaxiibkiis ah.

93. Baruuro sabool ayaa badhaadha[23] leh.

* Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waal xoolaha aad hesho xilliga aad ugu baahi badan tahay ayaa keena farxadda iyo dheregta.

Telegram Somali Books @som_Books

94. Baryo badan iyo baahi badan waa la isku nacaa

Duluc; Maalimaahdan macnaheedu waa; in qofku ogaado in baryada tirada badan iyo baahida iyo saboolnhnadajoogtada ah dadku way kugu nacaaru Waayo waxa ay dareemaan culeys aan loo baahneyn inay tahay.

95. Beec baro ama been baro.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: ganacatadu waxa ay qaarkood bartaan sida nadiifka ah ee loo ganacsado. Qaarkoodna waxa ay ku shaqeystaan khiyaano iyo laalaah

96. Beelaayo guur ama guurso ayey ku tidhaahdaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dhibaatooyinka dadkareer miyiga ah haysta waxa ugu badan marka ay guurayaan iyo markaay guursanayaaii. Marka waxahabboon labadaa xilli

■' ee adag in uu oqtkulu diyaar garoobo.

---

97. Beelo(24) coloobay warsan iskama sheegaan

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: haddii ay dadkucolaadi dhex marto, Marka la iska xaalk wareysto dhi nacba waxa uu dhaliilaa dhinicii kale oo uu wax aan wanaagsaneyn ka ..............shcegaa.......... . ...................................................... ................

98. Beelo nabadeed baa baadiyi dhexmartaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: marka ay reeruhu colaadi ka dhaxeyn ee ay heshiis yihiin ayaa ay baadida ka lunrta isu celiyaan.

Telegram Somali Books @som_Books

99. Been fakatay run ma gaadho.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: beenta si kasta oo loo qurxiyo run ma noqoneyso ama qiimo ahaan run uma dhigmeyso.

100. Been hal lug bay leedahay, haddii la qabtana way kuftaa

Duluc; Maahmaahdan macnahcedu waa: qofka beenta sheegaya waxa uu isticmaalaa xeelado lagu rumeysto. Haddii xeeladahaa la fahmo way ka fashimaysaabeentii uu sheegayey,

101. Been iyo war badan habeen bay wada dhasheen.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: inta badan qofka hadalka badan waxa lagu tuhmaa in uu beenaale yahay. Maxaa yeelay isaga oo aanay kas ka ahayn ayuu hadalka; badan waxa uu la gelayaa been.

102. Been sheeg laakiin been run u eg sheeg.

Duluc: Maahmaahdan macnahcedu waa: dadka iskuma jiraan oo sida beenta loo sheego wax ku kala xeel dheeryihiin. Dadka qaar ayaad iska fahmeysaa marka ay been sheegayaan. Qaarkoodna inta ay qurxiyaan ayaa ay run u ekcvsiiyaan.

103. Been waad ku cabtaa kumase rakaadatid[25]

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka dhaqanka dhigta in uu been sheego si uu danahiisa u gaaro ayaa marka dambe waxa dhacda in lagu fahmo oo lagu ogaado in uu beenaale yahay. ,

Telegram SomaliBooks @som_Books

## 104. Been wax ka orod gaaban.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku ogaado in beenta si kasta oo loo qurxiyo run ma noqoneyso ama qiimo ahaan run uma dhigmeyso,........................................................................

## 105. Beenaale marqaatigiisuu fogeeyaa.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka dhaqan u leh in uu been animaha ka shcego si uu hadalkiisa u xoojiyo waxa uu marqaati u qabsadaa qof dheer ama dhjntay,

## 106. Beentu waxay laqdaa kii tufay

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: beentu qofka sheega ayaa inta ay dib ugu soo noqoto ayaa ay hareysaa oo ceebeysaa.

Telegram Somali Books @som_Books

## 107. Beeni raad ma leh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: beentu wax muuqda ama la taaban karo malaha ee marka la damco in dib loo raaco si dhab ahaan waxa ay tahay loo ogaado mod ay sal ku leedahay lama arko.

## 108. Beenlow baadidiisa lama helo.

- Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka beenta badan baadidiisa sida uu kolba meet uusan hubin ugu tilmaamayo ayey fogaancysaa oo halkaa ku raad go'aysaa.

## 109. Beenlow nin dhintay iyo nin dheer ayuu marqaati u qabsadaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in siyaabaha lagu garto in qofku been sheegayo ay ka mid tahay marka la arko dadka uu markhaatiga u qabsanayo.

110. Beentaada hore runtaada dambe ayey u daran tahay

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka dhaqan ka dhigta in uu been sheego sidaana lagubarto* marka dambe xitaa haddii uu run sheegayo waxa la moodaa in uu been. sheegayo....................................................................... ........... .

111. Beertaad 20 jirka ku beerato 60 jirkaad u baxsataa

Duluc: Maalimaahdan macnaheedu waa: qofka wax mustaqbalka anfacaya qabsada marka uu dhalinyarada yahay, waxa uu ku nasanayaa marka uu weynaado.

112. Belaayo daaman la qabtay leedahay ee dabo la qabto maleh

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: belaayadu waxa ay ku wanaagsan tahay in laga hortago inta aanay dhicin, laakiin marka ay dhacdo way adag tahay sida wax looga qabto.

Telegram Somali Books @som_Books

113. Belaayo ha u yeedhan kuumaba timaadee.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku haddii uu wanaag iyo nabad ka shaqeeyo dhibaato kuma dhacdo. Haddiise uu waxyaabo dhibaato keeni kara faraha la galo waxa ay ka dhigan tahay in uu u yeertay.

114. Belaayo il la’aatay ama lug la’aatay

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in badanaa dadka iimaha gaarka ah leh ay in yar mooyee inta kale ay ka shiddo badan yjhiin dadka caadiga ah.

115. Belaayo intay kaa maqan tahay qayrkaa bay ku maqan tahay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dhibaato aduun sida cudur . iyo murugo inta ay kaa maqan tahay meei iskama fadhido ee waxa ay ku maqan tahay dadka kale>•

116. Belaayo kaa sii jeeda la iskuma soo jeediyo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheeduwaa: dhibaato w'ejigeedauu kaa sii jeeda lama doonto oo lagama gayb gala.

117. B elaayo laguma bato

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa : shidada iyo dhibaato abuurka bulshada laga dhex oogo waxa ay keentaa colaad lagu le$^{v}$do iyo khilaaf lagu kala tago>i

118. Belaayo salgan[26] baa ka horeeya.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: inta aanay beelaayadu dhicin waxa ka horeeyaa ifafaalo uu garan karo qoika indhecr-garadka ah.

119. Belaayo waa tii kaa qoslisa

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in qoikuogaado in mararka qaarkood isaga oo qofka dhibaato weyn dhexda kaga jira, haddana inta uu naxdin daayo uu iska qoslo. Waayo ihararka qaarkood ayaa yaabka lala qoslaa.

120. Berri iyo beenba ma dhamaato.

Duluel Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka ballanka badan ee maalinkasta waqtiga dib u dhigta ayaa waxa uu la mid yahay berida ousub oo maalin kasta dhalata.

Telegram Somali Books @som_Books

121. Bidaari sibiq[(2/)] ayey kugu gashaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa:: qofku madaxiisa timuliu Kama daataan hat mar ee tartiib ayey uga dhacaan. Sidaa waxa la mid ah arrimaha qaarkood marks aad fududeysato si qunyar all ayey kuugu balaarfaaty

122. B il dhalatay ku dhaaftay

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: iyada oo samirka iyo in waqtigalaga faa'iideysto qofka labarayo ayaa loo sheegaa inay bishu tahay maalmo kooban oo sida uu moodayo ay ka dhakhso badan tahay>

Telegram Somali Books @som_Books

123. Bil Sadex ah gurigaagana waa kaa bixisaa mid kalena kuma geyso.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: bisha bilatay marks ay habeenka saddexaad mareyso meet fog kuuma dheelmin karto, Waxa taas la mid ah cuud yariyo cilmi yarbahalka aad dooneyso kuma, gaarsiiyaan,

124. Bir iyo biyaba waa la isku boobaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: si aadan qabowgooda ama xanuunkeeda aanu qofka u dareemin labadoodaba si deg deg ah loo isticmaalaa.

125. Biyo dhul lagu arag lagana dhawr.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: marka la kala ilaaliyo labo wax ama qof oo aan is-hureyn oo si walba isu mudam

126. Biyo fadhiya biyo socda ayaa kiciya.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu. waa: dad ama fikrado xambaarsan ujeedo ayaa bedela ama kiciya dad iyo fikrado kale.

127. Biyo intay ku soo gaarin ayaa la iska moosaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waai si aanay dhibaato soo socota kuu soo gaarin, sida aad uga gaashaaman karto ayaa la samceyaa.

128. Biyo meel godan ayey isugu tagaan.

Telegram Somali Books @som_Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: nuxurka iyo murtida hadalka marka dambe meesha danta ah ce aan laga maarmi Karin ayuu ku soo gororaa.

129. Biyo sacabadaada ayaa looga dhergaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: baahidaada waxa aad leedahay ee aad haysato ayaa lagula dagaalamaa.

130. Booddo qoyaanka ayaa lagu qabtaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: arrin weliba sida ay ku miro dhali karto ama wax looga qabankaro ayaa loo maraa.

131. Booraan hadimo[28] ha qodin hadaad qodana ha dheereyn ku dhici doontaana ma ogide.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: ka fogow in aan xumaan u maleegto dadka. Waayo waxa laga yaabaa in ay xumaantaa adiga kugu soo noqoto>

132. Boqol dhuntay boqol ayaa lagu kafnaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: marka uu qofku ganacsi ku jiro waxa ay u baahan tahay geesinimo. Haddii uu khasaaro waa in aanu baqin ee lacag kale uu di b ganacsigiisa u gcliyaa.

133. Boqol soome bakhti ku afurey ha noqonin.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: ma wanaagsan qofka wax badan wanaag sameynayey ama cibaadeysanayey oo markii dambe wanaagjina gooyey, cibaad adjjna j ooj iyey<

134. Boqor waxbaa la sii baraa.

Telegram SomaliBooks @som_Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka yare e la doonayo in mas'uuliyad loo dhiibo marka uu weynaadowaa Joo sii tababaraa.

135. Bawdyo rag maalinba mid baa qaawan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku inta uu aduunyada joogo isku filnaan buuxda lama gaari karo co maaiinba nolosha wax baa ka dhiman.

136. Budo qabe iyo biyo qabe way isku baahan yihiin

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dadku inayisu baahan yihiin oo qoikan wax uu hasto uusan qof kale haysan. Isaguna kan kale wax uu haysto uu u baahan yahay. Inay iskaalmeystaana ay habboon tahay.

137. Burkaba bahal kama fileyn.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qqf dhibaato ama khiyaano kala kulmay qof uu kalsooni buuxda ku qabay ama aanu ka fileyn,

138. Buro foolka kaaga taal foolxumana lama sidan karo, xanuunna lama goyn karo.

Dulue: Maahniaahdan macnaheedu waa: qofka kula dhashay ama aad dhashay ee xun sina ugama madax banaanaan kartid.

139. Bushi[29] maragii waa matag.

Dulue: Maahniaahdan macnaheedu waa: tilmaamahainqofkuuu xanuunsan yahay lagu garto waxa ka mid ah matagga. Markliba qofkaa waa loo qirayaa inuujirran yahay.

140. Buufimo meel ay taal Biri kuma qabowdo.

Dulue: Maahniaahdan macnaheedu waa: meesha ay ku jiraan dad belo buris ah ama dadka isku dira nabad laguma gaaro.

141. Buul habreed hayina[30] ma qaado, habama ma gasho.

Dulue: Maahniaahdan macnaheedu waa: aqalka eafashka badan niarkala qaadayo, marka la dhisana yar ee aan dadka qaadeyn ayaa loo soo qaataa.

142. Caado la gooyey caro Alley leedahay.

Dulue: Maahniaahdan macnaheedu waa: dhaqarika wanaagsan oo la joojiyo sida quudinta masaakuntaama xmirinta qaraabada llaaheymajeclaado.

143. Caano aan fiiqsi[31] loo dhamin iyo hadal aan fiirso loo odhan labadaba feerahay wax yeelaan.

Dulue: Maahniaahdan macnaheedu waa: hadalka aan loo meel dayin waxa uukeenaa khilaaf, caanaha degdega loo qurquriyana *waxa ay keenaan caafimaad darro.

Telegram Somali Books @som_Books

144. Caano daatay dabadooda ayaa la qabtaa

Duiuc: Maahmaahdan macnaheedu waa: haddii ay dhibaato dhacdo waa in hambada hanti iyo dad wixii soo haray la badbaadiyaa<.,

145. Caano yar iyo ciidan yarba marka la waayo ayaa la ogaadaa.

Duiuc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dhaqaalaha yar ee meel kaa soo gala iyo adeege tabar yar oo ku caawdya marka aad waydo ayaad baahidooda dareentaa..

146. Cadar[32] xaggaa ceel kaama furto.

Duiuc: Maahmaahdan macnaheedu waa: xilliga xagaaga eccirku daruuro aan da'ayn uu leeyahay, baahida in loo dhaamiyo rcerka wayjirtaa. Sidaa oo kale qofku maaha in uu rumeysto wax dhalanteed ah.

147. Cadawgaa caano macaan baa la siiyaa.

Duiuc: Maahmaahdan macnaheedu waa: si aad shartiisa uga nabad gasho cadowgaaga hadal macaan iyo sasabaad ayaa la isugu daraa, si aad xilliga ku habboon iska celintnsa ula sugto.

148. Cadowgaaga dhuux sagaaro ayaa loogu subkadaa.

Duiuc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka xaasidkaaga ah ee jecel in aad jabto waa la isu qurxiyaa oo wax kale haddaad waydo wcjiga ayaa loo subkadaa. Si uu n moodo in aad dhergan tahay.

Telegram Somali Books @som_Books

149. Cadowgaaga koi ka digtoonow saaxiibkaana kun jeer

Duluc: Maahrnaahdan macnaheedu waa: dhibaatada kagaa timaada saaxiibkaa ayaa ka khatarsan midda cadowgaaga kaaga timaada. Waayo saaxiibkaa iska jireysid oo feejignaan kania qabtid sida cadowgaa.

150. Calafkaaga cid wuu kuugeeyaa, kulamase heshiisiiyo

Duluc: Maahrnaahdan macnaheedu waa: fursadu qofka way soo martaa, laakiin dabeecad iyo karti uu kaga faa'iideysto uma noqoto................................................... ...............................

151. Cagtaada iyo calooshaada midna lama caasiyo.

Duluc: Maahrnaahdan macnaheedu waa: meelia ay cagtaadu ku gayso iyo waxa aad cunto ee aad calooshaada ku rido midna lama abaal rido oo lama yiraahdo wax faa'iido ah oo ay ii keeneen ma j irto. >

152. Cagtii joogsan wayda marbay ceeb la kulantaa.

Duluc: Maahrnaahdan macnaheedu waa: qofka xumaanta uu sameynayo laga waaniya ee ka hari waaya iyada oo uu Ilaaliey marar badan ku asturay, marka dambe wuu ku fadeexoobayaa.

153. Calaacal waa rag ceebtii.

Duluc: Maahrnaahdan macnaheedu waa: qofku in uu dhibaatooyinka soo mara ka cawdo oo samir iyo adkeysi yeelan waayo waxa uga yimaada dhaliil ah in uu yahay qof H it a oo aan karti iyo dulqaad lahayn. ...............................................

Telegram Somali Books @som_Books

154. Calaf waa intii calool gasha.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku waxa uu uruuriyaa Inta uu aduunyada joogo hanti badam Laakiin dhab ahaantii waxa calfadaa inta uu cuno ee calooshiisa gasha,

155. Calool adayg waa ciirsi(33) ilaahay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: geesinimadu waa kaalmo iyo hibo Ilaahey qolka siiyo. Taas oo uu dhibaatooyinka qaarkood kaga gudbo.

156. Calool dhergan calool baahan kama naxdo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dadka wax haystainkasta oo aanay isku mid ahayn, haddana badanaa kama naxaan dad foqorada ah. Caloosha dhergana waxa ay moodaa markasta in caloolaha oo dhami ay sidccda u dhergan yihiin», .....................................................

157. Canaan intaan dhagax iyo dheri ahayn ugama darto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: sida la ogyahay toosinta iyo canaantu way wanaagsanyihiiumarka xumaan looga hortagayOi Waayo dherina wayjcbisaa, dhagaxna kama daadcgto.

158. Canaan la'aan caruuri ma korto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: carruurtu waxa ay markasta u baahan yihiintoosin, waanin iyo hogotusaaleym Si loogu gogol dhigo mustaqbal wanaagsan.

159. Candhool aa curatay.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: marka dheeftiisa la helo dhul, xoolo ama dad markii hore lagu hungcysnaa
* waxtarkooda;

Telegram Somali Books @som_Books

160. Canjeero sida ay u kala sareyso ayaa loo kala qaadaa.

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa; hawlaha sida ayu kala horeeyaan ee ay u kala muhiimsan yihiin ayaa loo kala hormariyaa.

161. Caqli gaalo iyo inclho quraanjo midna lama arko.

Dulue; Maahmaahdan macnaheedu waa; siyaasadda iyo xeeladaha ay muslimfinta ama dalalka soo koraya ay kuladhaqmaan iyo indhaha foolka kaga yaal quraanjada yar yaraantooda midna markiiba lama arki kuro,

162. Caqliga f lyow ayuu jidh fiyow ku jiraa.

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa: jimicsiga iyo socodka badau iyo ciyaaraha noocyadooda kala duwan qofka badsada waxa uu yeeshaajidh caafimaad qaba. Qofkuhaddji uu caafimaad buuxa helana caqli iyo feker fiyow ayaa ka soobaxaya.......................................... .............................

163. Caraabo fadhibaa quusiyey[34]

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa: qotka doonaya in uu meet fog, u sii hoydo waxa wanaagsan in uu horey u sfi soedo si xilli tiican u tago. Laakiin haddii uu sheeko ku habsaamo inuu baryo ayey noqoneysaa.

164. Carab da.lab[35] leh lug dalab leh waa laga garan ogyahay

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa; qofka sida qaloocan u hadlo ee oraahda xanafta leh ku hadla waa laga garan ogyahay qof dhutinaya.

Telegram Somali Books @somaliBooks

165. Carab laf malaha laakiin laf waa jebiyaa.

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa:carabka lagu hadlo waa cad hilib ah oo laf ma leh, laakiin ereyga xun ee uu yiraahdo qofka wuu dhaawici karaa......................................................

166. Carab lo'aad caws looma tilmaamo.

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa: lo'du waa xayawaanka biyaha iyo cawska ugu jecel duunyada la dhaqdo. Sidaa awgeed haddii aad lo'da meet doog leh gayso, uma baahna in lagu qasbo inay daaqdo.

167. Carab macaan kanna isaga dheeree kanna ku soo dhawee.

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa: hadalka macaan ayaa loo isticmaalaa cadowgaa iyo saaxiibkaa labadaba. Waayo iyada oo aanay uur-xumo jirin ayaad qofna ku soo dhaweysan kartaa. Midna isaga dhecreyn kartaa..................... .............

Telegram Somali Books @som_Books

168. Carabi intay ku nab to ayey Nebiga kaaga hormartaa.

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka ay dhalashadiisu carab tahav inta uu ku dulmiyo, ayuu haddaua dhalashadii carabnimada Nebj (nnk) kuu shecgtaa........................... .............

169. Caro iyo cimri baa cirro soo saara.

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka waxa timhiiisa madaxa caddeeya waxa ugubadan inuu fekero oo welwelo iyo in ay da diisugaarto xilligii cjrada.

170. Caro walaal waa la bariiyaa.

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka aad walaalo tihiin ama aad qaraabada tihiin haddii aad isku xanaaqdaan markiiba go'aan lagama gaaro ee waa la sugaa inta ay caradukaa degayso.

171. Carruurtaada haddii aad kuftana waa kagu qoslaan, haddii ay kufaana waa kugu ooyaan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waat carruurtu caqli iyo dareerika qofka weyn oo kale ma leh. Waxa ayka fekeraan iyaga waxa saamcynaya. Marka haddii aad hortooda ku kufto waa uriwaayad, haddii ay kufaana-waa u xanuun>

172. Carruur iyo reer guuraa raacba wax baa la isaga sheegaa ismana arkaan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waaimarka la guurayo dhaqan ahaati soomaaUdu waxa ay carruurta ku cabsiiyaan bahalo aan jirin oo iyaga ay sameysteen, si marka ay daalaan ugu socodsiiyaan....................... ........... ............... ...............

173. Carruuri kor cabsooday leedahaye kal[36] cabsada ma leh

Telegram Somali Books @som_Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: carruurtu marka ay wax haleynayaan waxa ayka baqaan in la dilo eekamabaqaan ceeb iyo may sharaftooda wax soo gaarto.

174. Carruumimo waa ciil laga koro.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: xilliga carruumimadu waa xilli uu ilmuhu dayacan yahay, tabar daran yahay oo dhaqaale yaryahay. Marka uu weynaadana dhibaatooyinkaa oo dhan ayuu ka gudbaa.

175. Casaan qurux kama tagana

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: quruxda waxa la yiraahdaa waa hadba sida uu u arko qofka eegaya. Laakiin waxajira meelo la isku raacsan yahay waxa ka mid ah qofka leh midabka casa ma guduudan.

176. Cawlba cawlkiisa ayuu la boodaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: nolosha waa isku heer iyo fil, Haddana waa isku jinsi iyo nooc. Marka nooluhu noocba noociisa ayuu raacaa oo la ciyaaraa.

177. Caws jiilaal canba can[37] buu bidaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; xilliga jiilaalka ee roob la'aanta wax waliba way yaraadaan sida cawska iyo biyaha. Marka cawska yar neefku goosto ayuu ku rogrogaa afkiisa. Sidaa waxaa la mid ah xilliga adag qofka cuntada yare e uu afka geliyey cabbaar buu ku hayaa oo markiiba iska liqo.

178. Cayri caymo ma diido.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka saboolka ah ee aan hanti buuran haysanin, haddii wixii yaraa ee uu haystay ay ka dhacmaan ama ka qasaaraan, in ay wax uun uga soo noqdaan wuu jecel yahay,.

179. Cayriin cune calooshiisa ayuu ka cabsi qabaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka cuna cunto aan geedka ama dabka ku bislaan caafimaad ahaan waxa laga yaabaa itiay caloosha ka qabato. Marka dareen baa qofka gelaya ah armav wixii aad cuntay ku qoomaan.

180. Ceeb aad leedahay cid kale lagulama galgasho.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; dcmbiga aad gashay ama wax ceeb ah oo aad sameysay in aad si aad uga dabaalato aad dad kale guudka ka saarto waa dhaqan aad u xun. Waayo qofku haka dabaasha waxa laguhaysto, isaga oo aan qof kale booskiisa gclin.

181. Ceebtaada oo ay kun ogtahay kow looguma daro.

Telegram Somali Books @som_Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: haddii ay qofku wax magac xumo ah ku dhacaan, ma habboona in uu isyiraahdo koley waa la wada maqlaye inta hartay sii faafL Weli dad ayaan ogcyn waa in uu qariyaa,.

## 182. Ceel aanad ka biyo gaareyn lama qodo

Duluc: Maahmaahdau macnaheedu waa: atrin aadan salkeeda faa'iido kakeencyn waqtigaaga laguma lumiyo ee waa laga haraa.

## 183. Ceel nina waa qodaa, boqolna waa ka cabtaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: airimaha samofalka ah sida ccelasha iyo dugsiyada iyo isbitaalada waxa laga yaqabaa in uu hal qof fikradooda lahaa, laakiin waxa ka faa'iideysta dad badan..

## 184. Ceel nin galay baa laga wareystaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: arrimaha sida ceel u gundheer waxa xogtooda o goo sheegi kara qofldi dhab ahaan u dhexgalay ee ay soo mareen.

## 185. Ceel nin topxsaday[38] isna ku cadiban cuudna ma cokona[39]

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa:: inta badan dhaqan ahaan soomaalidu marka ay xoolaha shubeyso way iskaashadaan oo wadajir ayaa wadaanta ceelka loogasoo saaraa. Haddiise qof keligii uu damco in uu sidaa sameeyo xoolahanma waraabin karo, wuuna ku dhibtoonayaa. Hawlahakale oo dhanna waa sidaa,. ...................................

Telegram SomaliBooks @som_Books

186. Ceel biir[40] ah ninkii galay ayaa laga wareystaa

Duluc: Maahmaahdan niacnaheedu waa; ceel biyo qadhaadh oo uraya leh qofka gala ayaa wax laga weydiiyaa. Ammo isku murugsan oo dhib badana qofkii aysoomareen ayaa la weydiiyaa..

187. Ceelna uma qodna cidina uma maqna.

Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka ama dadka dhibaateysan oo aan iyagana waxba qabsaneynin ay dhibta kaga baxaan. Sahari iyo dad ka saaradhintaana aanay u ttWffieytk ........ .................................................... ....... ,

188. Ceesaantii malageed galaa madax shabeel bay leeftaa

Duluc: Maahmaahdan niacnaheedu waa: waa rida marka ay yar tahay ee aanay well cman, halkanse waxa loola jeedaa qofka wax khatar ah faraha la gala dhiniasho hall $ ayuu u yahay.

189. Cayn[41] xumaatay ninkeeda ayaa leh.

Duluc: Maahmaahdan niacnaheedu waa; dadka ganacsigakujira ayaa yaqaane haddii qof badeeco iibsado oo ay sidiiuu doonayey ay u noqon waydo waa heshlis oo qofkii laga gaday ayaa iska leh oo loo spo celinyaa.

190. Ciil sokeeye kaa galay carab baa lagu baxshaa, ciil shisheeyana cudud.

Duluc: Maahmaahdan niacnaheedu waa: khilaaf iyo tabashada walaalahaiyo qaraabadakaa gala wada hadal ayaa lagu xaliyaa. Midka shisheeyaha kaa galena kolbasi baa lagu dayaa.

Telegram Somali Books @som_Books

191. Ciirtaa dhammaa caydaa yaqaan

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku dadka uu ka tirsan yahay ama uu la soo korey ayuu xog og yahay oo badanaa mcclaha ay dlial i i 1 aha ku leeyihiin garanayaa.

192. Ciise socod uma laabna Waraabena samir uma laabna.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa; mararka qaarkood ayaa ay baahida iyo daniufiu isu keentaa sida waraabahan baahan iyo ninkan daalay.

193. Cilmi iyo Maal midna lagama dhergo.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in aadamigu w'axkasta oo kale uu ka dhergo, laakiin labadan aan kor sheegnay aan laga dhergin, Jaceyl loo qabo darted.

194. Cilmiga ha laguu dhigee caqliga kaasho baa la yidhi.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka waxa uu barashada aqoonta u kaashadaa garaadkiisa wanaagsan. Badanaa dadka aan caqliga badan lahayn waxa la yiraahdaa fahamka qotada dheerkumawanaagsaua,

Telegram Somali Books @som_Books

195. Cilmigu waa caqli la ururshay.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in caqliga wanaagsan iyo cilmigu ay isbuuxiyaan. Waayo labaduba waxa ay ku taliyaan wanaagga iyo badbaadada.

196. Cimri tegay ceeb laguma sagootiyo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku markii uu waqti dheer hawl adag soo hayey oo uu dulqaad iyo samir la kaashanayey marka ay dhammaan rabto rnaaha in uu ka cararo ama dayaco ee waa in uu si qurux badan ku dhamystiro.

197. Cimrigaaga oo raagay geel dhalaayana waa ku tusaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku marka uu waayo badan joogo waxa uu arkayaa waxyaabo badan oo la yaab leh oo ay nolosha u saamaxday inuu gaaro.

198. Cindi[42] naageed iyo cir roobaad midna lama maleyn karo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dadka Inta yar ee taqaan saadaasha hawada mooyee dadka kale ma garan karaan xilliga uu cirkuroob kujiro. Cagliga dumarkuna wuu xeelado badan yahav oo lama qiyaasi karo.

199. Cir wuxuu keeno dhul ma qaadi waayo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: sida muuqata xagga weyninka cirka iyo dhulku way isku sat go-an yihiin. Sidaa oo kale waxa ay ilmuhu keenaan waalidku ma qaadi waayo.

200. Cirbad la urursahy masaar bay noqotaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; sida caadiga ah marka wax islehla isku ururiyo waxa ay noqdaan wax badan sida cirbada masaarta noqday. Sidaa oo kale haddii dhaqaale yar la tashiilo oo la isu geeyana waxa uu noqonayaa wax badan..

201. Cirbad maalin dhuntay habeen lama helo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: hawl maalin qabsoomi wayday, siiba wax baadi la xiriira habeenkii lama helo. Dhinaea kale wanaag cadaalad lagu waayey eex iyo laablaab laguina helo.

Telegram Somali Books @som_Books

202. Cishe iyo naag xunba waa la dedejiyaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; haweenayda xun dhakhso ayaa loo furaa, si aanay carruur kuugu dhalin. Waayo markaa dhibkeeda ayaa kugu sii badanaya, Salaadda cishahana gadaal ayey ka cuslaataa. Waayo waa xilli hurdo>

203. Ciyaar la'aan caqliga wuu caabuqaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku haddiinajimicsi sameyn oo aanu jirka firfircooni gelin waxa laga yaabaa in caqligiisa caajis iyo wahsi hareeyey darteed uu si firfircoon u fekeri waayo. ..................................................................

204. Ciyigii(43) waa ka bariyey ninkii cunay baa ka liita.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: hadiyad ama deeq lala soo daahay oo xilligii la filayey dhaaftay, qiimihii ay markii hore lahayd ma yeelato oo waa sida hilib waagu ka barycy,

205. Col hortii ayaa hub la sameystaa.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: belaayo inta aanay ku soo gaarinayaa laga gaashaantaa. Waxa la diyaarsadaaliubiyo mecl aad ka gasho.

206. Col iutuu guul guul kaaga gooyo soo galiin kaagama gooyo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: mushkiladu inta ay bakhdinteeda kaa govso$_3$ kaagama goyso marka ay kugu dhacdo..

Telegram Somali Books @som_Books

207. Col kaa badan iyo biyo kaa badanba waa ku hafiyaan[44]

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; waxyaabaha badnida wax ku dila ama ku baabf iya waxa ka odd ah dadka colka ah iyo biyaha. Marka looma bareero haddii ay taas dhacdo.

208. Col ku dhac oo tuugo kuu ciidamisay.

Duluc: Maahmaahdan niacnaheedu waa; dhibaatooyinka ugu badan ee qotka la soo gudboonaada waxa ka mid ah in qofkii dhibaateeyey iyo kuwii u soo gurmaday ay u kala roonaau waayaan.

209. Col ku galay cabsi kugu reeb

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: raadadka ay colaadaha iyo cuduradu ka tagaan ayaa ah in qofku ka baqo in aanay weli dhammaan oo ay soo noqon doonaan.

Telegram Somali Books@som_Books

210. Col naag ka kacay iyo cadho[45] nirig ka kacday midna ma qaboobo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dumarku way kicin ogyihiin raga xagga qiiradda, waana sharaf qoyska, Nirigtuna waxa ay si fudud cadhada u gaarsiin kartaa geela intiisa kale.

211. Col yar iyo col badan Ilaahey baa is baday.

Duluc: Maahmaahdan niacnaheedu waa: mar haddii ay dagaal arrintu noqoto oo ay wadahadal soo dhaafto, colku in uu xeelad adeegsado mooyee si kale oo uukubadbaado ma leh.

212. Colka waraf[46] ma lagu dayey

Duluc: Maahmaahdan macnahcedu waa: marka labo col uu dagaal dhex maro qolo weliba wixii ay heli karto ayaa ay niaciinsataa. Dhinacakale marka qofka ay arrin adag la soo gudboonaato ayaa la yiraahdaa si kasta ma lagu dayey>

213. Cudud caano gaabsheen cagaar ma koriyo.

Duluc: Maahmaahdan macnahceduwaa: ilmo ay caano korin waayeen, koosto iyo cagaar ma koriyaan. Waxa aan Balkan ka fahmaynaa qi itnaha ay caannhu ubadka u leeythiin.

214. Culimo jiilaal injir lagama qabto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qof baahan waa laga ■feejignaadaa in hunguri la gal iyo, haddii aan wax la siineyn. Siiba culimada oo gacanta bulshada baratay.

215. Cunno qarsade cayil ma qarsado.

Duluc: Maahmaahdan macnahcedu waa: qofka dhaqaale ahaan marka ay nolosluisa wax iska bedelaan,. xitaa haddii uu waxa uu haysto qariyo dhabankiisa ay laga garanayaa.

216. Daacadi ma hungowdo

Duluc: Maahmaahdan macnahcedu waa: qofka lilaahida ah ee aan sir iyo khiyaano ku dhaqmin hawlaha uu qabto kuma qado ee wuu ka faa'ndaa..

217. Daad la' aan doox ma soo rogmada.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: sida aanay roob la'aan biyo u qulqulin, ayaa shaqo la'aan aanay dhereg jirin. Cilmi la'aana uusan iftiin u jirin.

Telegram Somali Books @som_Books

218. Dab aan lagu guban dambaskiisa lagama leexdo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku waxa uuka fcejignaadaa waxa ay horey dhibaato uga s o q gaartay. Sida biyo uu ku haftay ama dab uu ku gubtay.

219. Dab iyo dawladba lama agjoogsado.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: marka dabkaiyo dawladda si qaldan loo agjoogsado waa lagu gubtaa. Sidaa awgeed waxa wanaagsan in labadaba aan loo dhawaan, lagana fogaan............................*............. ........ .............. .................

220. Dab munaafaq shiday muumin baa ku gubta.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka xun dhibaatada uu gaysto waxa Iaga yaabaa intaay fido inay dad wanaagsan ......... •.... waxyeejayspo........................ ■...............................................

221. Dab nin hayo daa lama yiraahdo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka dhibaato ku jira wax digniin ah uma baahna, waayo isaga ayaa kaaga dareen badan .

222. Dabagaale abeeso ma guursado lagamana guursado.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka wax daneeya, haddana tabar ama kalsooni ay u diiday inuu waxaas hanto.

223. Dabalaay gooji(47) ama ha goojin geela guga dhalaya ayuun baa lagugu tirin.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: goojintu waa tilmaan hasha lagu yaqaan inay riman tahay. Ujeedada waa qof wax shinsanaya oo wixii sida wax looga helayo iaga soo daynyey.

Telegram Somali Books @som_Books

224. Dabar caano ma qaraareeyo.

Duluc; Maahniaahdan macnaheedu waaixariga neefka lugaha looga xiro si loogu lnaalo, haddii uu weelka caanaha ku dhaco waxba kama dhibo. Sidaa Oo kale waxyaabo badan oo aan wax kala dhibin ayaa jira. Sida caanaha iyo biyaha.

225. Dabeecadda diinta waa ka badh.

Duluc: Maahniaahdan macnaheeduwaa: asluubta wanaagsan waxa ay ka mid tahay waxyaabaha ay diintu dhiirigelisay in ay dadkukudhaqmaam

226. Dabkii baxayaa dab lagu qabsadaa.

Dulac; Maahniaahdan macnaheedu waa: wax jira no bilaabanayaa wax kale lagu su kordhiyaa. Sida xooio. aduudan,

227. Dad iyo dameeraba nin leh ayey u daaqayaan.

Duluc: Maahniaahdan macnaheedu waa: -waxa habboon in qolku uu iska ilaaliyo in daniac ka galo haddii uu arko dad iyo ...........dameero dayacau.......................... ........................................... •

228. Dad iyo duurba waxaadan filayn ayaa kaaga soo baxa.

Duluc: Maahniaahdan macnaheedu waa: labadaba waxa gudahooda ku jira no khatar ah lama wada ogaari karo. Sidaa awgeed ayaa laga yaabaa adiga oo waxkasta caadi moodaya in ay dhibaato kaaga soo baxdo.

229. Dadku waa isku muuq haddana waa kala maan

Duluc: Maahniaahdan macnaheedu waa: aadamigu muuqaalka kore oo wada bani'aadam. Laakin xagga garashada iyo fekerka way ku kala wanaagsan yihiin.

Telegram Somali Books @som_Books

230. Dad ma ceeb la yahay lama yidhaahdo ee ma cayntaa ayaa la yidhaahdo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: ma jirto bulsho meel degen oo 100%ceebkasaliinah. Laakiin waxa dadka laga wareystaa inay nabadi jirto,

231. Dad madi iyo macalin ayaa ugu maan<48) xun.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: labaduba waxa ay jecel yihiin in waxkasta iyaga la siiyo ama loo sedburiyo

232. Dad mawada wanaajin kartid ee haysada xumeyn.

Dulac: Maahmaahdan macnaheedu waa: waxa habboon in qofku haddii aanu qofku. dadka wanaag u wada sameyn Karin, uu isku dayo in uu xumaantiisa dadka ka ilaallyo.

233. Dad nin u taliyey iyo nin tuugay baa yaqaan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dhab ahaan dadka dabeecadahooda waxa si fiicanu barta qofka ubaahday ee baryey iyo qofka maamulay ee kala hagay,,

234. Dad waa xan daaq duunyadana waa xaab daaq.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dhaqanka dadka waxa ka mid ah in ay noloshooda faaqidaan. Taasina haddii lagu arko wax lala yaabo maaha. Xooluhuna dhaqankoodu waa caws daaq.

Telegram Somali Books @som_Books

235. Dadaal laguma qado.

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofba qofka ee ka dadaal iyo shaqo badan yahay ayuu ka no lol fiican yahay. Dadkuna waxa ay ku kala hormareen dadaal iyo nasiib.

236. Dadaalaa waa gaaraa.

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado waxyaabaha la isku dhaafo ee lagu kala xoolo badan yahay calafka ka sokow\ haddana dadaalka iyo u lahaanshaha shaqadaada karti iyo aqoom

237. Dagaal gondahaaga[49] ayuu ka dhashaa.

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa: waxa wanaagsan in qofku markasta hubkhsa sito, sida usha iyo ableyda oo kale. Waayo si kedis ah ayey khatar kuula soo gudboonaan kartaa,

238. Dagaal waa gelin dambe.

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa: guushaha iyo guul daradu waa walaalo. Badanaa waxa meet mar ah oo qiimo weyn ku fadhida guusha ka dambeysay guuldarada.

239. Dagaal wiil baa ku dhinta ee wiil kuma dhasho.

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa: sida taariikhda lagu soo bartay dagaalku waxa uu galaaftaa wiilasha, ce wiilal ma keeno.

Telegram Somali Books @som_Books

240. Dal aqooon la'aan waa la ambadaa[50] dad aqoon la'aanse waa la qadaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: waxa wanaagsan inta uu qofku nool yaliay in dadkana uu badsado. Dal mareena uu noqdo st uu waayo arag u noqdo.

241. Damac badane dariiquu ku dhintaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka hunguriga weyn ee markasta ku dadaala in uu waxa oo dhan isagu helo, marka dambe isaga oo kororsiimo do on ah ayuu meel cidlo ahku dhintaa.

242. Dameer ceel ku dhacday koyna[51] waa lagu dayaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: haddii ay dhibaato kula soo gudboonaato, xalkeeda si kasta waa lagu dayaa. Sida xitaa dameer ccel ku dhacay oo magaccedii loogu yccryeeray.

Telegram SomaliBooks @som_Books

243. Dameer iyo dooc ka yeedhba daankaa lagu dhuftaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka hadal uusan kujirin anta la siinin booba ee dhexda ka soo gala waa la dagaalaa oo hadalkii uu sida waraabaha la tegay laga soo ritaa.

244. Dameer iyo ninkii wata daymaa iga deeqda

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: badanaa sawraca iyo muuqaalka noocyada gaadiidka iyo dadka wata way isu egyihiin. Waayo qofka indheer garadka ah iiiro ayuuku qiimeyn karaa noloshiisa.

245. Dameeraha tan ugu yar baa ugu biqlo[52] badan

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: dadka waxa ugu dhib badan qofka yar ama la yaso ee no lai ahaan hooseeya. Waayo wixii kaa gala waxa laga yaabaa inaad dhibaato badan kala kulanto.

246. Dameeri dhaan raran raacday.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: ma wanaagsana qofka dan la'aan kolba qofkii socda meesha uu u socda iska raaea ee baadida alu lyaga oo laga yaabo in ay hawlo badan baylali kayihiim........................................ ..................... .................................

247. Dameeri intay ci'[53] baran bay dhuuso barataa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; badanaa dad baa jira afxumo isaga dhashay ama ku soo barbaaray, Qofka sidaas ah waxa laga yaabaa inlii aanu hadalada ixtiraamka leh baran in uu bartay hadalada j arcexada ah

248. Dameeri intay rar ka dhunto ayey rar kale u dhuntaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qof baa jira dadka ka mid ah oo Inta uu shaqo lagu jecel yahay ka cararo, n taga shaqo kale oo abaal la'aan loogu xamaasho, iyada oo aanay weMba waxba ka soo galeym

249. Dameeri isku halayn bay hooyadeed dabada uga nuugtaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; ilmaha waalidkood waxyaabo badan ayey isku haleyn ahaan ugu sameeyaam lyaga ooisleh waxba lagu oran mayo.

Telegram Somali Books @som_Books

250. Dameeri tan ugu xun ayaa ugu haraati kulul.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dadku isku mid ma alia, xagga carada iyo dabeecadda. Waxa laga yaabaa qof aad yareysatay oo aanad ka maleysaneyn in uu erey xun. kugu yiraahdo ama si xun kuula dhaqmo.

251. Dameertu geela ha didisee, bururfta ayey uga sii dartay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: waxaa loola jeedaa qofinta uu wax aan fiicneyn kugu sameeyey, haddana mahadho kale kuuraaciyey.

252. Damiin far waaweyn baa wax loogu dhigaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dadku isku fahmo iyo garasho niaaha. Qofka jaguuga ah. waxa loo sheegayo si cad oo muuqata ayaa loogu qayaxaa.

253. Dan iyo xarago is weyday.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: hawlaha qofka laga ma maaermaanka u all dhiiqo iyo dhuxul ha loo galee waxa fiican in uu qofku qabsado oo aanu ka xaragoonin.

254. Dani waa seeto(54)

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka dantiisu waa dabar xira oo aanu ka talaabsan Karin. Waayo mararka qaarkood ayaa ay qofku hawadiisa u been sheegtaa, laakiin dantiisu ay ..............unindtee&M......................................... ....................................

255. Dani xishood ma leh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka dantiisu waa baahidiisa, mana haboona qofku inuu baahidiisa ka xishoodo.



Telegram Somali Books@som_Books

256. Dantaada iyo madaxaaga midna lagama boodo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; ma jiro qof madaxiisa dherer ahaan ka boodi kara, Baahidiha oo hortaaiana indhaha ka qarsan kara.

257. Dantaada laguma dheelo lagamana dheeraado.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; qolka ma haboona in uu muraadkiisa waxa uu ku xiran yahay ama uu ka helayo dayaca ama uu ku ciyaaro.

258. Dantaada maqaar Ey baa loogu seexdaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: wixii ay qolka maslaxad ugu jirto si uu u gaaro waa in uu meet aan habooneyn oo aan u qalmin u maraa$_{y}$ una fariistaa.

259. Dantii mooge maro duug ah horteed buu dhamaadaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qolka baahidiisa Iagama maammaanka ah ku ciyaara ee daryeeli waaya> cimrigiisa ma dhameysto go wuu ka hormaraa..

260. Dadow weji waa dambe u dhigo

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku in uu ku dadaalo in dadka wanaajiyo inta uu xoogga iyo shaqada haysto. Si uu marka uu gaboobo ama waxbeelo abaalkii loogu gudo. Ama carruurtiisaba ay u; aayaan.

261. Dad haddii la waayo daanyeerkaa la walaashadaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: noloshu wehel la'aanta way ku xun tahay. Waxa habboon in qofka waalid$_{5}$ooriama saaxiibo la noolaado. Hddiise intaasi la waayo qolka kuugu diir iyo dareen dhaw ayaa la dugaashadaa.



Telegram Somali Books @som_Books

262. Dawaco halkay macal ku barato ayey macaluul ugu dhimataa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku meesha uu wax ku barto lagama karo xitaa haddii uu xaalkeeda isbedelo oo ay noloshilsa khatar ku hayso.

263. Dawaco socodkeedii ka tagtay kii nebigiina gaadhi wayday.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dadka qaarbaa jira isku daya in ay dad kale dhaqankooda qaataan, sida socodkooda iyo lebiskooda. Qofkaasi dhaqankiisiina wuu ka tagaa, mid kalena ma gaaro.

264. Dawarsato dariiqay isku naqdaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: inta badan dadka tuugsada waxa ay u kala hor maraan meelihii ay wax ka heli jireen. Waxa la mid ah dadka isku xirfadda ah sida kalluumeysatada.

Telegram Somali Books @som_Books

265. Dayax haddii la waayo xidigaha ayaa lagu gudaa[55]

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qolku haddii uu sidii uu u baahnaa uu waayo, waxa uu sameeyaa sida uusan ka badin Karin. Tusaale haddii aad hilib waydo digirta ayaa u dhiganta oo la cunaa....................... ......................................

266. Dayooy diil[56] webi kaa sharan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka meesha uu xumaan ka sameeyo ee ay faro ka yaalaan ama deyn looga leeyahay wuu ka warwareegtaa. Waayo meeshaas weji fiican uma yaalaan.

267. Dayr iyo dumar midna deeqdooda kama haraan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: xilliga dayrta waxa ka dambeeya xilliga jiilaalka oo biyihii ay dhigtay qalijiya, Durnarkuna intabadan waxa ay bixiyaan waxa ay jec-el yihjin in abaal aliaan loogu gudo,

268. Dayro hore deeq dambe kama dhacdo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka oo markaugu horeysa eq wax la weydiisto liaddii uu hayana bixiya haddii aanu haynna cudur daarta oo aan qofkii soo celcelinna siin ayey la mid tahay<

269. Deeqi waxa la isa siiyo ma ahee waa sida la isu siiyo.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waaiwejiga furan iyo kal iyo laab fumaanta oo wax lagu bixiyo ayaa ka fiican in ivada oo gunuunac iyo weji kaduudan lagu bixiyo.

270. Degaan badeedbaa dabaal lagu bartaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku meelaanbiyo lahayn dabaal kuma baran karo. Sida badaha, w'ebiyada iyo waraha. Sidaa oo kale xirfad waxa lagu bartaa mcesha lagu hayo<

271. Derisba diintiisa ayuu kuu yeelaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: labada reerood ee meel wada degan maaha keliya in ay adeegyada kala qaataan. Waxa ay sidoo kale kala qaataan dhaqanka iyo dabeecadaha.

Telegram Somali Books @som_Books

272. Deriskaaga kuma caddeeyo kumana madoobeeyo ee sida uu yahay ayuu kaa dhigaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: reerka la deriska ah reer kale wax kale kuma sameeyo ee sida uu yahay dhaqan ahaan iyo asluub ahaan ayuuku bedelaa oo baraa.

273. Deriskaaga waa ilaalo aan laguu dirsan.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: reerka kula deriska aham qofka kula deriska ah waa sida kormeere oo waxa uu eegayaa dhammaan dhaqankaaga. Qaarkood inta xun eeay kugu xaman karaan ayey kaa qaataan.

274. Deriskaaga xun sagaal geedi ayaa laga guuraa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka xun meet kasta waad kaga fogaan kartaa. Laakiin deriska gurigaaga ku agyaalo oo kugu xumaaday wax ka dliib badan ma jiro. Isagana waa laga fogaadaa.i

Telegram Somali Books @som_Books

275. Deynta aad gacantaada ku bixiso lugtaada ayaad ku raadisaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku si fudud ku bixiyo deyn oo siiyaqof kale oo aan xilkas ahayn wuu ka shalaayaaama ku dalai raadintceda.

276. Dhac[57] dushii laguma wada hadlo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: ma habboona in meelaha jarka iyo waraarta ah ee laga dhici karo in la istaago oo lagu wada hadlo. Haddii hadalku kulul yahayna kuma sij jirto.

277. Dhacdaye miyaad leefi.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: ma habboona in qofku ku farxo wax qof kale ka xumaaday ama ka qasaarey. Waayo waxa laga yaabaa in aanu isagana waxba ka soo galeyn.

278. Dhagar(58) qabe dhulkaa u dhaqdhaqaaqa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka dhiig galay ama xoolo ummadeed dhacay waxa uu ka naxaajaqafta gccdaha iyo foorida dabeysha.

279. Dhagarow ma tanaado

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka khiyaanada badan ee aan la aamini Karin. Sina uguma faa'iido waxqabadkiisa iyo ................ dadanUdisa.......................................................... ........................

280. Dhagax biyo kuma qarqaro.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu wraa: qofka arrin u adkeysi badan oo waqti badan waayo-arag u soo aliaa karna gilgisho oo uma dugaadan waayo wixii ka yimaado,

281. Dhagax kuma fadhidid ee isaga ayaa kugu fadhiya.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka dan bida oo dhagax ama meel adag salka saara ugu dambeynta waxa uu ogaadaa in culeyska iyo dhibaatada aanu dhagaxa ku dhaceyn ee uu ................ fcaga fa? dhacayby;............................................ .......................

282. Dhagax labo shimbirood laguma wada dilo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: may wanaagsan tahay in hawlkasta markeeda la qabto oo aan la isku dayin in hal sabab labo ujeedo loo isticmaalo. Waayo waxa suurto gal ah in labadaba lagu guuldarcysto,

Telegram Somali Books @som_Books

283. Dhagax meel dhaw buu ku dhacaa dhawaaqna meel dheer.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: hadalka xun meel dheer ayuu garaa, laakiin dhagax la tuuray inta ay ishu qabato ayuu ku dhacaa. Marka sumcadda qofka iyo ummadaba waa la ilaaliyaa.

284. Dhagax taataabasho iyo tuutuujis waa isugu too[59]

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka qalbiga adag ee bakhcylka ah baryo iyo xoog midna waxba loogama qaado.

Dhalaan dhunkasho wax uma tarto ee dhiishiisaa dhay loogu shubaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay habboon tahay in carruurta wax loo tabco oo aankoolkoolin keliya lagu korin Karin.

285. Dhalaan waxaa raadsha qof aan dhalin kana dheereyn.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: inay u sahlan tahay in uu soo helo qof aari ilmahaas dhalin oo aan aad ugu beer nugleyn wararkiisa ama aan ka dheereyn oo jecel in la help.

286. Dhalin dhafoor bay ku taalaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku in kasta oo uu cimrigiisa qariyo ama yareeyo waxa lagu karan karaa dhabankiisa iyo muuqaalka wejigiisa.



Telegram Somali Books @som_Books

287. Dhar aadan lahayn dhaxan kaama celiyo

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in wax aanu lahayn aanay baahidiisa dabooleyn waqti dheen Sidaa oo kale dal aan dalkaaga ahayna xomimo buuxda kuma
• ItefoySid............................................J,?.;.......... ;............ ,

288. Dhar magaalo sida loo qaato way dhaw dahay, dhal magaalo sida lagu noqdaase dheer.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka reer magaalka dhaqankiisu yahay waa mid ku dhashay ama waayo badan ku dhaqmay. Laakiin maaha qof dhar cusub oo qurux badan soo xirtay.

289. Dhagax baa la tuuraaye, hadal lama tuuro

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: hadalku sida dhagaxa oo kale maaha ee meel dheer tunryo lagu gaarsiiyo. Hadalku waxa uu u baahan yahay in si dhaw oo degen loo yiraahdo..

290. Dhaxal goroyo dhebed(60) baa leh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: mararka qaarkood ayaa dhaxalka dadka qaarkood waxa hela dad kale oo aanayba isku isir ahayn. Taas oo ku timaada baylah sanaanta qofkaas.

291. Dhayda dhan, xoorta iyadaa kuu soo dhiciye.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: arrimaha sida ay u kala horeeyaan ayaa loo kala qaadaa. Waayo arrimaha qaarkood ayaa isku xiran oo adiga oo aan guursan ubad ma dhali kartid.

Telegram Somali Books @Som_Books

292. Dhega dheere kaan u dhigtayba maaha.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofku arrin uu ku talo galay ma aliee uu la kulmo arrin kale oo aanu meeshaba soo dhigan. Sida adiga oo qof sugaya uu qof kale oo ka wakiil ah kuu yimidaado.

293. Dhalasho iyo dhego geel midna halkooda ma dhaafaan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka meesha uu asalkiisa ka soo jeedo ma bedeli karo. Sida aanay dhego geel kuwa maroodiga oo kale unoqoneyn.

294. Dhegta haddii la gooyo daloolkaa hara.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: waxyaabaha qaarkood ayaan la salguurin Karin, haddii wax walba lagu sameeyo. Sidaqawmiyada meel degenayd oo kale si kasta oo loo gumaada wax uun baa kadhara.

295. Dhegtaadu kaa war dheer ishaaduna kula fil.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa:: qofku intauumaqlay ayaa ka badan intauu arkay Waayo qofka cimrigiisa iyo xogta uu hayo way kala badan yihiin. taakiin qofka cimrigiisa iyo waxa uu arkay way isla egyihiin.

296. Dherer iyo dhug la isku waa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: inta badan dadku waxa ay ku xantaan dadka dhaadheer in ay maangaaban yihiin. Sida dadka gaagaaban loo yiraahdo indheer garad ayey u badan yihiin.

Telegram Somali Books @som_Books

297. Dheri la kor taagan yahay ma karo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay wax waliba u baahan yihiin in waqti la s-iiyo uu diyaar kunoqodo. In. wax la dhararo waxa ay xumeysaa qalbiga qofka iyo wixii wanaagooda.

298. Dheri ninka u dhaw ayaa laf kala baxa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: sida badan waxa aan qadin oo wax nun ka hela qofka raqda ama meesha wax lagu hayo jooga. Laakiinbadanaa qofka meesha ka maqan siduu doono ma bclo, Arrintani waxa saameyn ku leedahay caddaaladda.

299. Dherig karka waxa ka keena kuleylka.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa; in mararka qaarkood qofka ay caro badan ka keento wax lagu samecyey oo looga gardaran yahay darteed. Waayo dadku isku dabeecadma aha.

Telegram Somali Books @somBooks

300. Dherigii faro badiyaa wuu fiiud xaraareeyaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa:haddii uu qofku la taliyayaal badan yeesho ama xaajo ay garsoorayaal badan ycelato way xumaataa oo qofkeeda uu ku wareeraa.

301. Dhibkaad dhawrataa dhashaaduu sugaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka inta uu nool yahay ee jir ahaan iyo dhaqaale ahaanba uu xoog leeyahay waa inuu maareeyaa wax alle iyo wixii caqabado ah ee ku gudban horumarka nolosha qoyska.

302. Dhicisku inta birta loo soo sido ayuu bakhtiyaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka ay baahi weyn hay so oo ay xaaladiisu aad u liidato inta wax, haloo diyaariyo la leeyahay ayaa laga yaabaa in uu noloshiisaba waayo.

303. Dhidar[61] xabaalo qodaa qurun buu u dhacaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka dabeecad ka dhigta in uuxaacraaco oo uu baarbaaro ceebaha iyo dhaliilaha dadka} waxa uu marka dambe kala kulmaa ceeb iyo dheg xumo weyn.

304. Dhiig baxaya dhafooro kumajiro.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: arrin ay dhibaatadeedu socoto lama fududeysto oo looma muujiyo dadka kale wax aan sidaa u weynayn.

305. Dhiil buuxda dhiil maran laguma dhufto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka wax hasta waxa wanaagsan in uu ka feejignaado oo wixii uu u tari karana isaga aamusiiyo dadka aan waxba haysan ee fuqorada ah.

306. Dhubuq dhubuq hore dhabano hays dambe ayey leedahay

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka dhaqan xumo barta ee hadana ka hari waayo, marka loOga digo cc laga waaniyo, waxa marka dambe uu la kulmaa fadeexad weyn.

307. Dhul dhego ma leh dhagar qabaase ka buuxa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: haddii hadal sir ah uu qofku meel qarsoon ama ammaan ah uu ku sheego oo hadhow uu maqlo isaga oo hadalkii suuqa uga horceya. Waxa uu ogaanayaa in qofka kale uu warkaa sheegay, Marka qofka waa in uu markasta taxadaraa.



Telegram Somali Books @som_Books

308. Dhuunta iyadaa moqorka iyo afkaba og

Dulue; Maahmaahdan macnaheedu waa; qofka adeegaha ah isaga ayaa madaxda iyo shaqaalaha u dhaxeeya> Sidaa oo kale ............wasiirku isaga ayaa madaxda sare iyo shacabka u dhaxeeya.

3 09. Dhul jid baa ka toosan, dadna kii mara.

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa; dadkawaxa ugu wanaagsaix qofka dadka kula dhaqma sida toosan ee ay diinteenu tilmaameyso. Isla markaana iska ilaaliya laalaabka.

310. Dhurwaa hilib ku raro

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku niaaha marka ammaano loo dhiibto inuu ka fakrifalo oo uu ilaalin waayq.

311. Dhurwaa iyo dhallaan, badal xun baa dhexdooda yaala

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa: dhaqan ahaan soomaalidu waxa ay marka la guurayo iyo marka la neg yahayba waxa ay camiurta ku cabsiiyaanin Waraabe sao socdo oo uu cuni doono. ........................................ .............................

312. Dhurwaaga kan aamusan iyo kan ciya iyatnaa daran.

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa: dadka qofka hadalka badan ee aan calool ku hayn lahayii iyo qofka aamusan waxa wanaagsan qofka waxa uu qabo markiiba wejiga ka saara .............qofka. ............ ......................................................................

313. Dhuumasho uu dhabarku muuqdo dhuumasho maaha.

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa: inta badan lama jeclaysto oo ma wanaagsana qofamn isu muujinaya inuu ka madax banaanyahay, haddanasi dadbanislaarrinkuugu dhexjira.

Telegram Somali Books @som_Books

314. Dib u dhaca qoonsimaad buu leeyahay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: marka ay dadkuxilliiyo meel ku wadaballamaan haddii la arko qofka cago jiidaya qabsoomidii ballanka ama xilli dambe iska yimaada waxa lagu tuhmayaa in qofkaasi raali aanu ka ahayn.

315. Dib u dhige dhibaatuu la kulmaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: waxa wanaagsan inhawl kasta waqtigeeda la qabto oo aan mid maanta taala aan dib loogu dhigm beri iyo saadambe.........................................................

316. Dibi foofay wayl uma xidhna

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka wax ka dambeeya oo uu ka naxo aan lahayn sida carruur, xaas ama waalid inta badan kalsponi buuxda oo mashiuliyadeed lama saaro<

317. Dibi hooyo xumi kormo ma noqdo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: ilmaha aanay waalidkood si fiican u soo korin xagga dhaqaalaha iyo tarbiyadda dad hoggaamiyayaal ah oo dhisan ma noqdaan.

318. Dibiga doolood dhegtiisa waxsan bay maqashaa laakiin ishiisu waxsan ma aragto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in markasta dadka ama ummadda loogu baaqo baraare iyo bashbash iyo weliba horumar, haddana waxa gacanta lagu hayaa ay tahay musuqmaasuq, eex iyo ma shaqeystenimo.

Telegram Somali Books @som_Books

319. Diiday hore kuma xishee diiday dambe yey ku xilin.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; qofka marka hore haddii uu haw lama qaaraan laga codsaday uu yiraahdo ma sameyn ama ma heli karo waa laga qancaa< Laakiin marka hore waa yahay inta uu yiraahdo ka dibna haddii uuisbedelo ayaa la eedeeyaan.

320. Diini waa waano.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; diintu waa toosin iyo ka waanin iyo ku waanin. Dadka waxa ay ku waanisaa samofalka iyo wanaagga. Waxa ay ka waanisaa xumaanta iyo tafaraaruqa.

321. Diinku ilmihiisa eegmaduu ku koriyaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: noolaha oo dhami siyaabo kaladuwanayey ubadkooda u xanaaneeyaan. Qaarnaas nuujiya, qaar baalasha ku koriya iyo kuwo-sida diinka indhaha ku koriya.

322. Diinku madaxuu dikaamiyaa mise dagaalamo

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; sida diinka oo kale dadka reer magaalka ah afka ayey ka murmaan, laakiin ma dagaalamaan. Dhaqanka ugu wanaagsana waa in afka laga dodo oo aan la dagaalamim

323. Diqsi biyo ku dabaal bartay fuud kulul buu ku gubtaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka waxa uu mararka qaarkood ku dagmi karaa waxyaabo muuqaalka kore isu eg, laakiin kala duwan oo laga yaabo in ay qaarkood khatar nolosha qofka u yihum

Telegram Somali Books @som_Books

324. Dirxigu dantiisuu qudhunka ugu jiraa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waaidadka qaar ayaasi ay dantooda ugaaraan dhib iyo meelo xuu u mara. Kuwaas oo samir adag ka dib waxa ay gaaraan dantii ay lahaayeen..

325. Doob dareen baa dila.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka aan guursan well ee xilli badan ay dumarka kala maqnaayeen waxa uu tuhunsan yahay markasta in raga kale oo dhan ay isaga dhaaniaan oo haweenka ay xiriir fiican la IccyihiiiL

326. Doofaar ficil la'aan baa loo cadaabaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qdfka aan hiilada lahayn marka qof garabkiisa ah wax layeelo ayaa lagu guubaabiyaa in qofka aan hiilada lahayn uu yahay ehelu naar>

327. Doofaar weligii ma daakiro.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka dhaqan xunlagu bartay ee marka dambe isaga oo qiiq isku qarinaya sheegtay in uu wixii horey xalay dhalay ka noqday ayaa lagu yiraahdaa sida aad isu bedcsho way adag tahay.

Telegram Somali Books @som_Books

328. Doob yaciis[62] kaaga dambee

Du luc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofkasta oo garmaamo iyo dhalinyaronimo iyo doobnimo soo mara, marka dambe waxa u dambeeya in uu carruur yar yar dhalo.

329. Dooradu xaarka way wada cuntaa, laakiin af tirtirasho ayey is dheer tahay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in dadku ay wada dcmbaabaan ama qalad iyo gef uu ka dhaco. Laakiin hab dhaqarika iyo adaabtaiyo asturaada ay ku kala duwan yihiim..

330. Doqon fiiro[63] taqaan iyo fulay daandaansi badan midna lala ma dego.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka nacaska ah. ee ficilada xunee isaguba muu yeelo la yiraahdo iyo fuley gardaro badan midna lala ma dego..

331. Doqon ha u gargaarin hana gargaarsan

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka maangaabka ah u hiilintiisa lama ammaanin. Waayo waxa uu moodayaa in isaga aad wax u dhibayso ama maba garanayo wanaaga and u sameynayso.

332. Doqon hadal kama demana[64]

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: sida la ogaaday qofka waa nacas la yiraahdo ee la saluugo mararka qaarkood hadalka loogu duurxulayaan fahma, hadal weyn oo xanuun badana rida.

333. Doqon hadal xun baa ka dhaca dameerna hilif[<65]

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: badanaa qofka maangaabka ah lagama waayo meel ka dhac ivo hadal aanloo meel dayin oo dadka qaarkood lafojebis ku ah.

334. Doqon haddii la xifaaltamayo[66] in la kala tagayo ayey moodaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu w'aa: marka uureer magaalku kaftamo, ee weliba kaftanku uu kululaado qofka aan meel fog wax ka eegin waxa; uu moodaa in meesha lagu kala tegay oo uu dagaal ka dhacayo.

Telegram Somali Books @som_Books

335. Doqon qufacday mana oga meel laga gaaray.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dad qaar ayaa erey iyo ficilba hawlo kala duwan iska dhex dabaasha. Taas oo laga yaabo hi aanay dad badan raali gelin. Marka waxa laga yaabaa in meelo ay hah iyo habaar ka qaadeen.

336. Doqon sokeeye ma aha hilibna sooryo ma aha.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka aan caqliga badneyn waxa la yiraahdaa sokeeye ma noqdo waayo waxa uu kaa goynayaa wax aanu shisheeye kaa goyn lahayn.

337. Doqon usha agteeda ku dhufo, haday garan waydana korkeeda ku dhufo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka sida xuunshada denianaha ah waa loo digaa. Haddii uu dareemi waayana wixii looga digay ayaa lagu ridaa..

338. Doqoneey dabkaa ba' a.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka maangaabka marka uu wax faa'iido ah nolosha yeelan waayey, dhibaato mooyee waxa lagu habaaray in uu dhinto oo dabkiisa uu demo.

339. Doqoni calaf ma leh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in aanu qofka nacaska ah lahayn nasiib lahayn. Haddii uu leeyahayna aanu sida ay tahay uga faa'ildeysan.

Telegram Somali Books @som_Books

340. Doqoni casarkii waxay kugu aragto ayey cishihii kugu caydaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka jecel in iimaha dadka uu ku arko raacraaca ee ka dibna ku caaya. Dhaqankaasna maaha mid wanaagsan. Waayo qofka ceebtiisa waa la qariyaa ee lama faafiyo.

341. Doqoni dab karna kacdee daamankay meermeerisaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka caqliga yar ma garto qiiqa dabkaka kac eekolba dhinac ayuu indhaha iyo madaxa u wareejiyaa. Sidaa waxa la mid ah qofka doqonka ah hal dhibaato ayaa waqti badan haysa oo uu katashan waayaa.

342. Doqoni dibir[67] kama dheregto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka nacaska ah aanu "■ legdin ceebeedka dhcrgin, mar haddii 24-ka saac oo tobanaan qalad sameeyo.

Telegram Somali Books @som_Books

343. Doqon Qadar Alle taqaan lagama gar helo

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: maaha wixlixumaadaba sida in qadar ilaahcy sabab looga dhigo, Sida qofka aan xisaabtamin uu sameeyo, Waayo mararka qaarkood ayaa sababta arrin ay u dhacday la baaraa.

344. Doqoni saaf[68] ciid loogu riday sed ma moodo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka maangaabkaah wax si dadban loogu roonaaday ma fahamto oo lama dhuumato ee qofkii sidaa u ycclay ayaa ay dadka hortiisa ku cccbeysaa.

345. Doqom xarigga lagu xirayo xusuladey ku sidataa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka aan caqliga buuran lahayn marka uu dapwoonayo hadaladiisa isdhaafsan ayaa waxauu ku muteystaa in uu galo dembi lagu xiro. Dhanka kale isma difaaci karo.

346. Doqommo daawo ma leh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in doqonimadu ay taliay cudur. Cudurkastana waxa uuleeyahay daawo doqonimo mooyee.

347. Doqon dhaaxa jirtay wax weydii

Telegram Somali Books @som_Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka waayo badan soo noolaa ee liaddana caqli yari lagu xanto ayaa wax la weydiiyaa. Si aan asturaad lahayn ayuu waxkasta sidaay ɱ jinjireen kuu. sheegayaa.

348. Dudumo in la dugsado iyo in la dareensado la isuguma daro.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa:dudumooyinka waxa gala bahalaha guurguurta sida halaqa* Badanaadadku way ka baqaan. Laakiin marka ay meeshu bannaan tahay gabaad ayaa laga dhigtaa. Sidaa waxaa la mid ah qof aad la socoto ama la nooshahay oo aad hadana iska eegto.

349. Dumaal nin ka xishooday kama ilmo dhalo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: haweenayda laga dhintay ee isla qoyskii qofka mid ah uu dumaalay, haddii laga baqo oo ninkii hore lagu ixtiraamo reer ma dhaqmayo, Waxa taas la mid ah in arrin dan ah qofka la ixtiraamo looga baqo oo ay sidaa ku Junto.

## 350. Dumar iyo dameeraba duco la'aan ayey tarmaan.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: dhaqan aliaan dadka soomaaliyeed berigii hore dadka waxa ayjeclaayeen raga, duuiiyadana geela. Sidaa awgeed tixgelin weyn ma aanay siin jirin waxa ka soo hara oo dhan.

## 351. Dumar nin ammaanay ayaa leh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dadka oo dhami wayjecel yihiin amaanta. Laakiin liaddana dumarka ayaa aad u sii jecel. Ninka doonaya in uu gabar rag badan oo kula tartamaya oo ka soo jiito, waxa uu u huwin jirey ammaan.markaa ayuu qalbigeeda gac-anta ku dhigi jirey.

## 3 52. Durduro waxarood xanan bay kula gashaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: xoolaha inta meesi ay yihiin waxa xaggai oradka ugu fudud waxaraha. Haddii aad istiraahdo qabo waxa laga yaabaa inta oodda kaaga boodaan in aad ku dhacdo. Sidaa oo kale la baratanka carruurta yaryar waxa ay kuu keeni kartaa dhibaato.

## 353. Ergo wixii la faray gaysaa, wixii la siiyana way cuntaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dhaqanka iyo xeerka lagu yaqaan dadka xariga nabada xira ee loo yaqaan ergada waxa wceye in wixii loo direy oo ah wargelin wadahadal iyo in wixii sooryoah ee la siiyo ay ay canto oo aanay tilaabo kale qaadin.

## 354. Ey iscunaysa waraabe iskama celiso.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in bulshada wada nool haddii uu soo dhexgalo khilaafaad gudaha ah in aanay endow bannaanka uga yimid aanay iska celin Karin.

Telegram Somali Books @Som_Books

355. Aydin geel hadba waa ninkii ay leu dambeyso.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: geelu qiimaha uu dadka soomaaliyeed. u leeyahay waxa aad ku garaneysaa hadba uolosha waxa tixgelin ku leh kolba qofka uu xeradiisa geel kujiro,

356. Facaa ka har foolxumo ma dhaafto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka lagu qiimeeyo heexkiisanolosha dadka uu la da' yahay ma ka sareeyaan mise wuu la siman yahay, Mar haddii uu ka liaro waa qof aan duceysneyn.

357. Fadhi iyo fuud Yicib[69] la isku waa.

Telegram Somali Books @som_Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: shaqadu waa sharaft sidaa aWgced qofku in uu iska fadliiyo iyo in uu nolol xushmad leh ku noolaado iskuma helayo.

358. Fadhi keliya ayaa labo iyo toban fadhi kaa kiciya.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: arrinyar oo aad qabsan lahayd oo aadmaalin ka wahsato sidaana kugu dhaafto, dhibka ay mar labaad soo celiso ayaad labo toban jeer u kaceysaa si aad u qabato hawshaa.

359. Fal[70] aan laabta jirin iyo faruhu way isdiidaan

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in-qofka waxauu sameynayo uu qalbigiisa la jiro. Haddii kale wax sugan oo dhameystiran ma qaban karo. Mararka qaarkood ayuu shaqadii kuciyaaraa oo qabashadeedaheer sidii horeka xun gaarsiiyaa,.

3 60. Fal waa faro ku hayn.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka xirfadauuyaqaan ay tahay in uu faraha ku hayo oo uu ku shaqeeyo. Haddii kale wuu iloobayaa ama waxyaabo casri ah oo aanu garaneyn ayaaku soo kordhaya,

361. Falaari gilgilasho kaagama go'do.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka haddii dembi ama arrin lagu haysto oo lagu soo eedeeyo oo ay arrintuna dhab tahay waxa habboon in aanu ka doodin ee uu iska qirto.

362. Falaartii cirka loo ganay nin walbow filo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: inbulsho meelwada degen haddii ay arrin dhibaato ah timaado waa in uu qofkasta fishaa in ay dhibaatadaa meet uun ka soo gaarto.

363. Faq[71] fagaarahuu yimaadaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in waxa la qariyo ee ama dad loo sheego ama meel cidlo ahba lagu sheego ama dad gaar all lagu qarsado ay marka dambe soo if bixi doonto.

364. Faqiir wax helay iyo fadhiid socod bartayba way fookaneeyaan[72]

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka saboolka ahaa ee wax helay iyo ilmaha ku socday shan jir labaduba farxadooda meel laga fariisto ayaa la wayaa.

Telegram Somali Books @som_Books

365. Far bukta faraha ka dheer.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; inmeesha qofka xanuuneysa uu moodo in jirkiisa infa kale ay ka soo horeyso oo meesha uu u dhaqaaqaba iyada ayt damqeyso. Sidoo kale qofka xumaanta ama dembi isku og isaguna dadka kale wuu ka dareeti iyo shaki badan yahay.

366. Far keliya fool ma dhaqdo.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in wadajiika qiimo gaar ah leeyahay, hawl wanaagsan oo fudud in la qabto haddii la doonayana iskaashigu uu yahay lagamamaarmaan.

Telegram Somali Books @som_Books

367. Faras aanad lahayn fuulmadiisa futo qarar(73) baa laga qaadaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qoiku aanu isku haleyn wax amaano ah oo qof kale leeyahay. Waayo waxaaad crgis ku soo qaadatay qofkii lahaa marka uu u baahdo wuu kaala noqdaa.

368. Faras hadiyo foolkiisa lama eego.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofka aanu xaqu lahayn haddii wax hadiyad ah la siiyo in aanu iimihiisa faaqidin. Waayo waxa lagu siiyey bilaash.

369. Faras waa kujoog amakajoog.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in quruxdiisa iyo waxa loogu talo galay faraskuuu yahay in lagu xaragoodo oo la fuulo ama laiska daayo oo aan la yeelan.

370. Fardo kubo[74] daalo ayey leeyihiin ee kubab daalo ma laha.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: innooluhu marka ay ordaan ama waqti dheer ay socdaan uu nooc kasta meel gaar ah ka daalo, Tusaale ahaan farduhu waxa ay kadaalaan kilyaha ee lugaha kama noogaan.

371. Fardo la isu hayo la isuguma faano

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in labo wax oo la wada heli karo aan dood ku saabsan faankooda waqtiga la isaga qaadin. Waayo iyaga oo la tartansiiyo ayaa lagu kala saari kataa durbaba.

372. Fari tog bay kula xushaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in avhawlaha qaarkood marka ay yar yihiin haddaan wax laga qaban aan marka ay weynaadaan aanay suurto gal ahayn in wax laga qabto.

373. Farihii dufan leh ayaa wax duuga.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka wax haysta xagga dhaqaalaha uu baahiyo badan maareyn karo. Laakiin qofka aan waxba haysan oo faro maran aanu xitaa meydkiisa aasan Karin.

374. Fariin waa qaan[75]

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofkuogaado haddii meel hadal loogu dhiibo ay waajib tahay in uu warkaas qofkii u sheeg la yiriuuu geeyo. Waayo faniintu waa sida deyn qofka lagu leeyahay oo kale. .

Telegram Somali Books @som_Books

375. Farta iyo meesha bukta ayaa is og.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofkawax isku og dambi ama wax iiu haleeyey oo shakiyo markastaoo la soo eego ama wax hadal all oo uu magaciisa ku j iro maqlo. Waayo wuu ka gubtaa marka la wevdiiyo arrin la xiriirta waxa uu qarinayo.

376. Fartaada oo xumi filiqfiliq[76] kaagama harto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka aan walaalo, ehel ama qaraabo aad tihiin haddiiuu dhaqan ahaan xumaado aanay suurtogal ahayn in aad iska goy so oo aanu dib dambe kuu dhibin Laakiin waa in aa dulqaad l<u wadaa.

377. Faruhu siday isugu xigaan ayaa la isugu xidhaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: marka dhaxal uu jiiro ama si kale wax loo qaybsanayo dadku sida ay qoys ahaan isugu dhaw yihiin ayaa la isu raaciyaa, Taas oo waxyaabo badan fududeynaysa.

378. Faro dufan leh bay faataxo ka kacdaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka marka laga eodsado in uu duceeyo ama uu qnraan akhriyo in wax la siiyo oo caloosha loo buuxiyo. Marka ayaa ay tuftjisu ay aqbal noqotaa.

379. Fiintu j irka[77] soo socda ayey ka oydaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka waayeelka ah uu inta badan uu fiiriyo waxa soo socda oo uu markasta gogol xaar u sameeyo mustaq wanaagsan,

Telegram Somali Books @som_Books

## 380. Finka[78] caloosha ku yaal carabka ayaa dila.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in wadahadalku waxa uu nadiifiyaa caloosha ay ka buuxaan tabashooyinka iyo cuqdada. Markauu qofku sikal banana uuuhadlo, waxa uu daaweeyaa calooshiisa.

## 381. Fiqi[79] tolkii Kama janno tago.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka uu la qayb yahay tolka uu ka soo jeedo. Haddii tolkaa uuxun yahayna xukunkiisu uu yahay qof x-un. Haddii uu wanaagsan yahayna uu yahay qof wanaagsan.

Telegram Somali Books @som_Books

## 3 82. Fududaa hawl la fiirsanayo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka ay la sahlan tahay shaqo aanu gacanta ku hayn ee dad kale ay hayaan qabashadeeda. Waayo daawashada ayaa u muujineysa in sidaa iyo sidaa la yeelo oo la dhameeyo,

## 383. Fuley dhiigiisa lama tuso.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka fulcyga ah marka uu dhiigiisa arko uu gadoodo oo wax laayo ama uu cararo oo uu cagaha wax ka dayo.

## 3 84. Fuley geesi hortiisa ayuu dhintaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qoika fuleyga ah uu qabta ugu horeysa ee dagaalkaba uu cararo markaana dhabarka laga toogto ama uu baydado oo dhinicii cadwga uu u cararo oo xabadka laga toogto.

385. Fuley isagaa kaa lib[<80)] jecel.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka fuleyga ah haba ka cararo dagaaladee, haddana uu jecel yahay in ciidankiisa guuleysto. Sidoo kale marka ammaanta la qaybinayana uu jgaguna doonayo in uu ammaanta qayb ka help.

386. Fuley wax ka fiiro badan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka fuleyga ah dabeecad ahaanuu yahay qof shaki badan oo dad iyo dugaagba waxyeeladiisa uga tuhun qaba. Sidaa ayaa uu waxkasta indhaha ugu caddeeyaa,

387. Fuley wax ka ulo badan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka fuleyga ah uu dadaal badan yahay. Sidaa awgeed si uu naftiisa u badbaadiyo waxaa uu xambaartaa hub badan. Kuwaas oo uu marka dambena ka cararo.

388. Fuley xantiisna mooga.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka fuleyga ah uu og yahay in ay dadku hadal hayaan fuleynimadiisa. Waayo waxa uu xantiisa ka maqlaa suuqa iyo dadka dhexdiisa..

389. Fuley hooyadii ma gablanto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay sababtutahay in marka dagaalku dhacayo ee dadka la dilayo ama ay dhimanayaan isagu maha joogo oo mar here ayuu goobta ka cararey oo meet nabad ah ayuu joogaa.

Telegram Somali Books @som_Books

## 390. Fulow guuli kuu dhaw kaana dheer.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka fuleyga ay haysato nasiib darro weyn waayo isaga oo guusha ay u dhaw dahay ayuu ka niyad jabaa oo ka tagaa. Sidoo kale waxa isagana Alley ah qofka guul darada ka baqa.

## 391. Fuulimaad waa faro ku hayn.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka fardo fuulka yaqaan uu iloobo haddii uu waayo badanmoogaado. Haddii aanu wada iloobina sidii uu ugu xaragoonjirey uu u tog rogi waayo.

## 392. Gaal dil gartiisana sii

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waat in qofka aan muslimka ahayn marka aad u garsooreyso aad cadaalad u sameyso oo aanad uga eexan dadka kale ee muslimka ah. Adiga oo dim ahaan ku eexaysanaya.

Telegram Somali Books @som_Books

## 393. Gaalo jabkeed waa qarsataa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka aan muslimka ahayn inta badan marka ay dhibaato soo gaarto way qariyaan si aan jabkooda loogu farxin.

## 394. Gaashaan qaad ma habaabo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka qaangaadhka ah ee dagaalka gel! kata, haddii meel loo diro aanu lumin oo uu leeyahay caqli ku filan oo uu ku soo noqon karo,

395. Gabari god hakaaga jirto ama gunti rageed.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in dumarku ay waxkasta oo aynoqdaan ay kaga wanaagsan yihiin inay guursadaan oo ay guri yccshaan. Waayo gabdhaha waa daaqadaay ceebta ka soo gasho qoyska.

396. Gabari Kun bay koodisaa[81] kowna way ka guursataa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in xilliga guurdoonka ay gabdhu shukaansato ilaa kun nin. Laakiin ay marka dambe ka xulato qofka ay calafka ku yeclato.

397. Gabari waa guur u joog.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in gabadhuuu jadwalka nolosheeda ka mid yahay ama uu ugu horeeyo guursi. Kaas oo ay u aragto in mustaqbalkeeda dhabta ah uu yahay.

398. Gacal isma cidhiidhiyo

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dadka isjccel gogol yama way ku seexan karaan. Dhuuni yama way isla euni karaan. Kurd ama fadhi yarna way ku wada farii $ an karaan. Isma ficlaan oo isma balaariyaan.i

399. Gacantaada oo gubatay, goshaada ayaa la gashadaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in si qofka uu waxyccladiisa u qarsado, si aanu cadowgiisa ngu farxin gacantiisa oo gubatay dadka wuu ka qariyaa. Sidoo kale qofka aad walaalaha ama riximka aad tihiin xumaantnsaba dadka- waa laga qariyaa,

Telegram Somali Books @som_Books

400. Gacan gacan bay dhaqdaa, wadajirkoodana wejiga.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: marka laga hadlayo muhiimada wadajirkaiyo iskaashiga gacan keliya ma sacbiso, waxa ay labada gaemood oo la isu geeyey qabtaana gacan keliya ma qaban karto.

401. Gacan gadaal ka baqeysa horey wax kama goyso.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku baddii uu gadaal ka baqayo canaan ama ganaax uusan go'aan cad oo cadaalad ah gaari Karin. Waayo badana dadka wax dulmiya waa kuwa awoodda leh ee laga baqo.

402. Gacan jabtay gunteeday[S2] dhextaal.

Telegram Somali Books @som_Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu. waa: inuukalsooni buuxda qabo qofka ay dhibaato ku dhacdo haddii taladiisa beeshiisa ama ummadiisa la dhex dhigo si waxlooga qabto.

403. Gacan qaad aan laguu ogeyn iswadh[83] baa la yiraahdaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku uu yabooho xoolo aanbixintooda dadkii wadasocday aanay ka tashan oo aanay isku raacin bixintooda iyo tiradoodaba. Qofka sidaa sameeya dhaliil mooyee ammaan halkaakama helo.

404. Gacan waa la dhawraa, lugna waa la dhibaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofkubarto sida ay xubnaha qofka u kala nugul yihiin. Haddii nabar uu ku dhaco gacanta ama qaar sare ee qofka waa in la ilaaliyaa. Haddiisc qaarka hoosc ay ku dhacdo sida lugta dhulka ayaa laqabad siiyaa.

405. Gacani waa nin lihi u go'do.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: inla ogaado in gartaiyo xaqa si kasta oo loo duticduuco uu marka -daniba u dhaco qofka iska lch co lagahor joogo.

406. Gacaniba waxay goysay leedahay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qolkasta ogaado in dembi ama dulmi uusameeyey aan qof kale loo ciqaabeyn co ay tahay ul jam oo isaga meet u taak

407. Gacantaada haday dhudhub[84] gasho laguma soo dhuftee waa laga soo dhirindhiriyaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku haddii ay arrintiisu meel ciriiri ah gasho, xoolo laga dhacay oo gacan kale ku jiro allaha ka dhigee xoog laguma doono ee :si miyir ah ayaa loo furdaamiyaa.

408. Gacanta aadan goyn karin waa la dhunkadaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: hab nololeedka dunida waa siyaasad. Haddii uu qofka cadowgaa ah kaa awood badan vahay waxa uu caqligu ku siinayaa in aad iska sasabto.

409. Gacantii qaad-qaad barata gumudkeedaa dhaqdhaqaaqa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in haddii qofku tuugonimo ku weynaado oo uu dhaqan ka dliiglo. Marka dambena uu isku dayo in uu iska dhaafo oo ka waantoobo. Waxa uu arkayaa gacantii xatooyada looga oo dooneysa may wax

Telegram Somali Books @som_Books

410. Gacmo geel j ire gadaal baa loo dhaqaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in waxyaabaha tolka dhexdiisa ama dadka deriska ah ama shirkad iyo shaqaalaheeda dhex mara oo xumaan ah in ay iyagu si hoose u dhameystaan.

411. Gacmo isdhaafay ayey galadi ka dhalataa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waadn dadku ay iscaawiyaan oo kooxba ay kooxda kale u gacan celiso waxa ay ku dhaantana siiso. Marka ay sidaa dhacdo ayuu wanaag iyo hommar yimaadaa,

412. Gacmo maran geel laguma salaaxo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in wixii deeq ah ee ilaahey ku siiyo waa loo weel sameystaa. Sida haddii aad beer goosaneyso, haddii aad xoolo liseyso iyo haddii aad khayraad badeed guraneyso intaba.

413. Gacmo wadajir bay wax ku qabtaan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in labada gacmood oo isu tegay ay hawl badan qabankaraan. Sidaaookale marka ay dadku isku tagaana butir ayriixikaraan.

414. Gadaal ka gaar waa goob[85] dumis.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka aan wax badan kala socon hawl meel ka socotauu arimaha dhexda kaga dhaco oo markaa habsami u socodkii hawsha uu carqaladeeyo.

Telegram Somali Books @som_Books

415. Gafuur cawo ninkiisa ayuu gubaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in aanay cidna arkeyn dareemayna oabashadiisa iyo caradiisa qofka habeenkii keligii carcoda.ee afkataagga. Waayo waa muqdi oo cidna caradiisa ma arkeyso.

416. Gal(86) dad liqi ul baa lagu dayaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku inta aanu moolkeeda ku dhicin aria khatamimo looga shakiyo oo ay dad badan ku dliici waayaan. Si loo ogaado inta ay khatartccda la egtahay.

417. Gar diid waa alia diid.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka marka garta laga helo diida oo cadaalada u arko inay tahay oo keliya marka uu isagu sida uu doonayo uu helo<

418. Gar iyada oo aan gacmo lahayn ayey geed kugu xirtaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka caaqilka uu yahay qof marka laga jid helo, ka garaaba. Waana qofka uu go'aanka garsooraha ku qanca oo uu xiro xitaa marka isaga ' gardarada la saaro,

419. Gar waa loo wada islaam.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay gartu tahay cadaalad. Dadka oo kala xaqsoorana waa loo wada siman yahay muslim iyo gaalaba.

Telegram Somali Books @som_Books

## 420. Garawshiinyo waa sed waayeel.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka oo eedda loo soo jeediyo qaata ee ka garaaba, xaal iyo xumeyntia ka bixiya ayaa qofka waxgaradka ah ku qancaa oo xitaa qaar ka mid ah xaqii uu helay saaniaxaa.

## 421. Garba gar baa la tusaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: marka la doodayo ee qofka aad wax isku haysataan uu wax gar ah u sheego garsooraha, qofka kale i'saguna waxa uu soo bandhigi karaa wax jid ah oo toosan. Markaaayaasidhcxdhexaadah wax loo xeerin karaa.

## 422. Gardaro garab og iyo gaajo guri og midna lagama kaco.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka og in ay ka dambeeyaan dad dulmiga u garbo yeela oo taageera, isaguna garta ma qaato ee dulmigiisii ayuu ku sii indho-adcygaa. JBaahi wax la'aan kugu ogtia kaa ma tagto.

## 423. Gardaro looma garbayeelo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: ma wanaagsana in haddii uu qofku arko qof gardaranin la sii dhiirigcliyo in uu gardaradiisa ku sii socdo. Waxaase habboon in la qabto oo looga digo jidka uu ku socdo ee dulmiga ah.

## 424. Gari laba nin kama wada qosliso

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in marka Iabo qoflook aia gar qaado mid ayaa garta hela, kan kalena waxa la saaraa gardaradii. Qofkii garta helay isaga oo faraxsan oo qoslaya ayuu halkii ka baxaa. Qofkii laga helayna isaga oo murugeysan,

Telegram Somali Books @som_Books

## 425. Garow(X7:) iidaankii waa gaajo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado waxyaabaha cuntada macaaneeya ay ka mid tahay baahida iyo calool mamaanta. Sidaa awgeed ayey cambuulo u macaan tahay qofka gaajeysan.

## 426. Gartaada inta aadan geedka tegin ayaa la naqsadaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku inta uusan geedka gartiisa lagu qaadayo aanu tegin, waa in uu keligii isla hadlaa oo naftiisa ku yiraahdaa maxaad gar ku helaysaa, maxaase garta lagaaga helayaa. Hadday bataan arrimaha garta looga helayo in uu iska daayo garta..

## 427. Gaws la qaaday.geel la qaaday ka daran.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in aanayhabbooncynin wax la isku ag-cuno. Waxaase dhaqan wanaagsan ah in waxa la helo la wadaago oo la wadacuno. Sidoo kale haddii dadku ay deris yihiin waa inay iska war qabaan,

Telegram Somali Books @som_Books

## 428. Geed joog gartiisa waa yaqaan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka had iyo jeer garaha la qaadayo iyo maxkamadaha wax lagu garsoorayo u badan, dadka muran iyo jikaar kuma dhibo ee wax gar ku iyo waxa kale waa uu kala yaqaan.

## 429. Geed kaa dheer kuma dhaxan tiro.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado inwaxuga muhiimsan aanay jirin in uu si dhab ah ula noolaado dadka uu deriska ama ood wadaagta la yahay oo aanu u hanqal taagin dadka ay dhalashada is xigaan ee ka fog.

430. Geed laga dhacay gacmo lalama gaaro.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku marka here waxyaabo badan oo khatar ah oo hadday dhacaan aan wax laga qaban Karin isku taagi dood in uu ka feejignaado. Sida arin la mid ah geed laga dhacay oo kale. Sida guur aan la hubsan ama deg deg ah oo kale.

431. Geed waa madal in joogtana waa marqaati.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: meelaha ay soomaalidu talada iyo garaha ku gorfccyaan ayaa waxaa ka mid ah geedaha hoostooda, Meesha madasha ah inta qof ee niaalintaa joogta waa marqaati beri wax laga weydiin karo.

432. Geed walba in gubta ayaa hoos taal.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in la ogaado in qofkasta wax ha haysto ama sabool ha ahaadee uu qabo dhibaato in ku filan oo in la calaacali karo,

433. Geed waliba dheecaankiisa ayuu dhalaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ilmaha aanay sinaba ugu duwaan Karin waalidka dhalay ee ay ka soo farcameen. Waayo ha ogaado waalidku haddii ilmuhu dhaqan ahaan sida uudoonavo uusannoqoninisagauudhaqankiisa wato.

434. Geed dheer geed gaaban ayaa lagu koraa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: W'axajira waxyaabo badan oo aadan gaarin Karin adiga oo aan u kaashan waxyaabo kale oo kaa caawiya, Tusaale ahaan haddii aad dooneyso in. aan ganacsi ballaaran gasho waa in aad marka hore iskaashato ka mid noqofm

Telegram Somali Books @som_Books

435. Geedba mirihiisa ayuu dhalaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: waa1idkasta waxa ka beermaoo uu dhalaa ilmo ama carruur muqaal-iyo dhaq.an labadaba isaga ku bannaan.

436. Geedkii fudeyd lagu koro fudeyd baa looga soo degaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in arrimaha qaarkood ee la xiriira kuwa mustaqbalka aan lagu degdegin ee laga baaraan dego. Sida guurka, tacabka beeraha iyoxoolaha. Haddii kale qofku meeshii uu ka tegay ayuu dib ugu soo noqonayaa isaga oo sldii horeka tag daran. .

437. Geedkii labaatan jirka lagu waabto[88] lixdan jirka ayaa la harsadaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka inta uu dhalinyarada yahay waxa uu qabsado ee nolol fiican ah ayaa uu u baxsan karaa marks uu weynaado ee xoogiisa uu hoos u dbaco»

438. Geel diday dooh laguma karo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in arrin darcen gelisay dadka duunkooda aanan dejin iyo qaboojin wax looga qaban Karin, Waayo waxa fiican in marka hore laga taxadaro ................ arimaha keenaya in la kala dido<...............................................

439. Geel labo jir soo wada mar.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dadku carruumimo iyo saboolnimo dhammaantii wuu soo maray. Sidaa awgced baa ............... wanaagsan in heeraika nolosha po dhan la fixgeliyo;

Telegram Somali Books @som_Books

440. Geel aan gaawe loo hayn lama godlo

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado waxkasta marka loo diyaar garoobo ayaa la gudo gala. Sida neefka aan loo lisi Karin iyada oo aan weelka la diyaarsan. Sidaa oo kale gunrkana waxaa- ka horeeya shaqo xoolo tacab.

441. Geel aan qawsaar[89] lahayn iyo adhi aan qawdhiidh lahayn midna ma dhaqmo.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: xagga dhaqaaleynta xoolalia waxa wanaagsan in nu jiro qof foofiya oo u go'an oo har iyo habeen u diyaar ah hawshiisa. Waayo soomaalidu xoolalia nool waa halbowlaheeda.

442. Geel caruuri qaaday ma dheera.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in aanay qofka med dheer ka tegin hawl ay dad aan u ehel ahayn ay bilaabeen ama arrin loo dhiibay dad aan xog ogaal u ahayn.

443. Geel cisil daaqay iyo gob jilicsanba waa laga Waaq-duraantaa[90]

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: haddii geelu uu daaqo geedka sunta ah ee ciinka ama xeerbeegti odayaal ah oo aan go'aan si furcadi leh u goyn Karin labadaba waa laga duccystaa.

444. Geel doono geeso dhiigay dhashaa

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku isku daya in uu xoolo ama maal aanu lahayn si salxlan u soo meersado. Waxa laga yaabaa in difaacooda uu ku dhinto ama ku ■dhaawacmo.



Telegram Somali Books @som_Books

445. Geel fudeyd kuma rimo, fudeydna kuma dhalo.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: marka aad eegto nolosha aduunyada oo dhan waxkasta waxa ay u baahan yihiin samir iyo sugid iyo dulqaad. Sida geela, beerta iyo haweenayda aad guursatay.

446. Geel geel waydaartay geedo la'aan baa leh.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in looturo daaqa dhulka, lagana ilaaiyo xaalufinta. Si taas looga jibo keeno waa in qorshe loo sameeyaa hab-daaqsimecdka dhulka. Waxa taas la mid ah dhaqaalaha yare e qoys balaaran ka dhaxeeya haddii aan la tashiilin wuu dhamaanayaa.

447. Geel jire geela waa wada jiraa waana kala jiraa

**Duluc:** Maahmaahdan macnahecdu waa: in ay jiraan danaha dadka kuwo si guud isugu xiran iyo si gaar ah loo kala leeyahay. Hadaba waa in tan guud la daryeelaa, si ay midda gaar ah mirodhalunoqoto.

448. Geel jire isaga oo usha meesha laga goynayo og ayuu haddanaku weydiiyaa.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: dadka qaar ayaa talo ku, weydiiya sida ay arrin yeeli lahaayeem Haddana qofkaa waxa laga yaabaa inuu dadka kale fikirkooda ogaanayo laakiin isaga ay arrintu meel uga go^Aan tahay.

449. Geel jire ka caanee buu ku caano waayaa.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: dadka qaar ayaa jira sida ay u leeyihiin ku dadaal ganacsigaaga ama tacabkaaga beeraha ania dhaqaalcynta xoolaha, Marka dambe ku talax taga oo ay taasi qasaare weyn u keento, Marka waxkasta dhexdhexaadka ayaa wanaagsan.

Telegram Somali Books @som_Books

450. Geel jire dhawaan diidow, dheeraan ka dabo orad

**Duluc:** Maahmaahdan macnahcedu waa: in qofku mararka qaarkood muraadkiisa oo meel dhaw jooga ayuu si nun u fududeystaa oo marka ay fogaato oo ay meel ciriiri all gasho ayuukusoo baraarugaa o o ka daba cararaa.

451. Geel jiruhu gabanka ugu yar ayuu gaawaha[9J] ku rartaa.

Duluci Maahmaahdan macnaheedu waa: sida ay isleeyihiiti wiilasha geela raaca, hadaba waxa ay agabka ay nolo! maalmeedka u sitaa u dhiibaan wiilka ugu d a* da yar.. lyaga oo is lchha ku tababarto, hana ku adkaato. Laakiin waxa loo baahanyahay in ay bulshadu- isu turto.

452. Geel shafkuu ku fariistaa ragna shin[92]

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: sida xoolaha ookale dadku kuma fadhiyo shafka ee waxa uuku fadhiyaa rejo nololeed oo uu sugayo. Dalian qaadyo uuhelay ayaa iyana ka mid ah waxyaabaha uu niyadda kuqabowsado,

453. Geel uu ninkii lahaa dhacayo lama dhicin karo.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku haddii uu isaga ka dambeeyo ama uu lug ku leeyahay dhibaato naftiisa ama maalkiisa haysata waxba lagama qaban karo.

454. Geel waa geel wixii gooyaana waa geel.

**Duluc;** Maahmaahdan macnaheedu waa: in dhaqan ahaati soomaalidu geela uu ku ahaa agtooda wax aad u qiirno badan $ sidaa awgeed ma aanay rumeysneyn in geela lagu soo heli karo wax aan geel kale ahayn ama aanay duunyadu inteeda kale goyn Karin,

Telegram Somali Books @som_Books

455. Geel ay duqdiisa durdurisay aarankiisa maxaad mooday.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in haddii uu qofka weyn bood boodo ama waxqarbudo ama sida carruurtau dhaqmo dadkii yar yaraa ce isaga arkayey waxa ay moodayaan in la fasaxay usyeelyeelka

456. Geelu haddii uu labada lugood ee dambe uu habeed(93) ku leeyahay waa gediisii, haddii uu labada hore ku yeeshana waa ged(94) uu la soo baxay

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in haddii qofku dhaqan lagu aqoon jirey lagu arko mid xun oo uu horey u daayeyba ha noqdee lalama yaabo. Haddiise dhaqan aan horey loogu aqoon uu la soo baxo waa wax cusub ou la soo baxay.

457. Geel col mooyee abaari wax ma yeesho

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in geelu uu yahay duunyada midka ugu adkeysiga badan xagga abaarta iyo biyo la'aanta, Sidaa awgced keliya waxa u daran in la dhaco oo uu sidaa dhaqaaleyntiisa ku dayacmo.

458. Geelu nabar aanu ogeyn ayuu ku gagabaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: sida xoolahaba dadkuna nabar aanay fileyn ayaa wax yeela. Waayo qofku waxa uu filayey adkeysi iyo ka gaashaamasho ayuu ka leeyahay.

459. Geenyo(95) iyo gabar baa guud la qabsado leh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu wraa: inta badan gabdhalia iyo fardaha ayaa ku caan ah inay leeyihiintimo ama guud dheer oolaqabsankaro.

Telegram Somali Books @som_Books

460. Geeri haday ku dayso gabow baan ku daynayn

Duluc: Maahmaahdan macnaheeduwaa: in qofka heerarka noloshiisu ay dhammaad leeyihiin. Haddii qofku ilaahey cimri u siiyo in uu waqti dheer noolaado waxa noioshiisa saameyn ku yeesha gabow uu hawlihiisa ka qabsan waaya.

461. Geeridii galbeed laga sheego gondahaaga ka day.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku uu markasta ka feejignaado oo udiyaar garoobo dhimashada. Waayo geeridu haddii meel aad kaaga fog lagu sheego. Ha moodin in aanay imaaneym

462. Geeridu koi bay noloshu dhaantaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheecdu waa; in qofku marka aanuku nooleyn nolol gooninio leh, oo uu quursi, sharaf dhac iyo dulmi uu ku nool yahay ayey geeridu nolosha dhaantaa.

463. Geeriyey bushi(96) baa ii kaa nugleeyey.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofku ku calaacalo in wax la'aantu ay dhibaatooyin badan lugaha u qabatay, Sida cudurkuba uu geerida sabab ugu yahay.

464. Geeriyi nimaadan garaneyn iyo geel jirey ku roon tahay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay geeridu tahay wax naxdin badan marka aad maqasho. Haddana waxa ay ku sii kulushahay marka qof aad taqaano uu noqdo. Sidaa awgeed ayaa ay dadku yiraahdaan dhibtaadu waxa ay ku wanaagsan tahay dadka aan la aqoon.

Telegram Somali Books @som_Books

465. Geeri iyo geediba waa lagu kala tagaa

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in dadka wada degcn ee isku raaska ahama walaalaha iyo qaraabada all wax a kala fogeeya dhimasho iyo in la kala guuro.

466. Geesi alia ma xilo[97]

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka caloosha adag ilaahey kuma ceebeeyo marka uu qaato go'aano awoodisa ka w'eyii oo haddana uu ku guuleysto.

467. Geesi dhereb[98] kuma jiro.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka geesiga lagu garto marka uu dhabta hooyadii ku jiro. Waayo baxaaligiisa iyo dhaqankiisa ayaa laga garanayaa.

468. Geeso lo'aad kuleyl kaa lagu gooyaa

Telegram Somali Books @Som_Books

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: marka inarinla doonayo in wax laga qabto sida dhiig dhacay oo kale. Inta ay arintu raadkecda cusub yahay ayaa wax laga qabtaa.

469. Giir[99] lo'aad iyo girid[100]mocooyo midna ma go'o.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay adagtahay sida uu raadkiisa u go'o isirka ayeeyo amamidabka giiran ee lo'da.sidii horeyba loo yiri sinji waa ma guuraan.

470. God aakhiro gadoon ma leh.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay wax dhab ah tahay in qofka dhinta aanu aakhiro iyo iilka ka soo noqoneyn. Sidaa oo kale arrimaha qaar ayaa $ida waqtiga ku dhaafay oo kale aanu soo noqoneyn.

471. God waliba wixii qotaa loogu tagaa.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: inraas weliba dadka degen ama ku nool loogu tago. Guri walbana waxa ku hoyda wixii dhistay.........................................................................................

472. Gol[101] Ey baa lagu sahmiyaa.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka laneceb yahay loo diro oo lagu ogaado sida ay tahay meesha laga baqayo ee nafta iyo qofka la jecel yahay lagu aaniini waayo.

473. Goor xun socdaa goorsan taga.

Telegram Somali Books @som_Books

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka doonaya in uu socod meet fog ku tago uu socodklisa bilaabo goor xun oo ................kulul amaxun oo qabow si uu xilli wanaagsanu tago.

474. Gows la qaaday geel la qaaday ka daran

Duluc:: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay xun tahay in qof baahan wax lagu agcuno isaga oo aan wax laga siincyn. Waayo dhaqan ahaan geela la kala dhaco aad buu u xanuun badnaa..

475. Gudinay hadaan gabalkay kugu jirin imaadan goyseen.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa; inhaddii cadowga aad la dagaalameyso ayqayb dadkaagaka mid ah raacsan yihiin ama ay horsed u yihiin guul kama gaareysid.

476. Gurbaan garabkaaga ha kuugu jiro ama gacalkaa ha kuu hayo.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in dan iyo ujeedo uu qofku leeyahay si uu u gaaro waa in uu isagu mindida daabkeeda gacantiisa kuhaysto ama uu u hayo qof uu ku kalsoon yahay oo aan waxba ka hagraneyn,

477. Guul daro habeen ba cid bay la hoyataa.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in dunidu aanay qofha la dhalan ee ay nasiibku iyo calafka ay marba qof deris la yiliiin. Sidoo kalcna guul daraduna aanu qofha gaar u lahayn ee loo siman yahay.

Telegram Somali Books @som_Books

478. Guur waa god mugdiya oo gacanta la geliyey.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: inqofku guursanaya dooqiisa xusho, ka dibna uu Ilaahey talo saarto in uu guurka u hagaajiyo. Waayo guurku waa god mugdiya oo waxa kaaga soo -baxaya ma garaneysid.

479. Guur waa guur hoose beema waa beer hoose.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: dad badan ayaa waxa ay qiimeeyaan in guurku ku wanaagsan. yahay sokeeyaha iyo in xigtadaada la guursado. Beeraleyduna waxa ay qiimeeyaan meesha godan ee biyo fariisiga leh in ay dalagyada ku habboon tahay.

480. Guur waa ina'lu"'

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka guursanaya uu arooso qof uu yaqaan oo uu leeyahay waa ina hcbel hebel. Waayo taasi waxa ay suurto gclinaysaa in qofku hiddo yaqaano halka ee ka guursaday.

481. Guur waa nasiibe gacalkaa haboob in.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka dadaal iyo xulkasta oo uu sameeyo si uu qof wanaagsan u guursado uu arrinku xiriir la leeyahay calafka iyo nasiibka.

482. Guurku marka hore waa san dhuuban yahay marka dambena waa sino balaaran yahay

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in guurku marka hore sida lagu gala ay fududahay. Laakiirt marka labada lammaane ay guri yeeshaan ayaa waxa ballaarta noloshii labada qof ee keliya ahayd oo xldid iyo carruur ayaa timaada

483. Hadal iyo laf midna feenta lagama dhameeye

Duluc: Maahmaahdan macnahecdu waa: waxa habboon in qofka gar ama arrin ka hadlayaa uu wax u hambeeyo dadka ka dambeeya oo aanu hadalka ku rafan, kuna noqnoqon ee. uu qodobo gaar ah ka hadlo kana baxo. Lafta hilibka alma waa sidaa oo waxa loo hambeeyaa dadka kaa dambeeya.

484. Haani guntay ka tolantaa.

Duluc: Maahmaahdan macnahecdu waa: waxkasta oo la doonayo in ay raandhiis yeeshaaoo dhaxalgal ay noqdaan waxa laga bilaabaa salka ama aasaaska hoose. Sida hanta caanahaba tolmadeeda looga bilaabo salka ay ku fariisato.

485. Haba kuu darraadee dad waa ina adeerkaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: si kasta oo aad isugu xun tihiin ama uu kuugu daran yahay, bakheyl u yahay haddana qofka dhalashada ay idinka dhaxeyso j iir ayaa isugu kiin yaal oo sinabauma kala go'aysaan,.

Telegram Somali Books @Som_Books

486. Habaar oo dhan waa dhimo, duco oo dhanna waa dhurow[(103)]

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku uu ugu jecel yahay wax loogu dueccyo dhurow oo ah ilaahey ha kuu barakeeyo xoolaha, ubadka iyo cimriga. Habaarkana waxa ugu xun cimrigaabad allaha kugu rido oo dhimo.

487. Habar fadhido legdin la fudud

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka fadhiya oo daawanaya kurey legdameysa ay la fududahay sida loo tabceeyo oo loo legdo qofka oo waxa uu ku odhanayaa maad halkaa qonofka ka gelisid oo dhulka dhigtid.

488. Habar iyo hayinkeeda isla raran.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: inta badan dadka waaweyn waxa ay lecjecladoodu gaarsiisaa in gaadiidka u raran aanay waxyaabaha qaarkood ku aaminin ee ay iyagu dosha ku qaataan. Si ay gacan aamin ah ugu jiraan.

489. Habar karis xun iyaba kaal[(104)] ku leh.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka agaasinka xun ama cunto ha ahaato ama wax kale oo la qorsheynayo ha ahaadee isaguba qayb ayuu ku lahaanayaa waxaas lagu ciyaarey ee xun.

490. Habar mayti[(105)] xustay mooradeeda ayey ka garatay.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: inta badan dadka waaweyni waxa ay caado ahaanxusaan waalidiintood, culimadood iyo dad kale oo karaamo lahaa. Haddiise qofku xusktisa bata oo markasta uu xoolo qalo waxa la ylraahdaa xoolo ku filan ayuu haystaa.



Telegram Somali Books @som_Books

491. Habari curadkeeda cay uma quurto.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: inta badan waalidkuihnaha ay dhalaan caayda iyo habaarka labadaba way ka Haaliyaan. Waayo cayduna ilmaha filkiisa ah ayaa ku caayaya. Habaarkuna mustaqbalka ayuu ka xumeynayaa.

492. Habari korisay horey(106' ma noqdo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: ilmaha aan madax banaanida ku korin ee aan dib jirin faciisana wax la qaybsan ma noqdo mid karti leh ee marka dambe carruuita filkiisa ah wax la qaybsan kara.

493. Habartii awrka cirka aragtay ee dameerkeeda jarka ka tuurtay ha noqon.

Telegram Somali Books @som_Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku in uu ku kalsoonaado waxa uu llaahey qayb u siiyey, oo aanu dadka kale waxa ay haystaanindhaha kutaagin. Xitaa waxaaga qitmo ahaan habaka hooseeyo waxa kale ee aad aragtay...................................... .......

494. Habeen waxa la hadlaa inta gacantaadu gaarto,maalintiina inta ay ishaadu gaarto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: iyada oo asluubta wada noolaanshaha dadka iyo deegaankala eegayo ayaa waxa habboon in qotku codkiisa gaabiyo habeenkii. Maalintiisa si la maqli karo u hadlo. Sida ay habeenka iyo maalintu xagga iftiinka ugu kala duwan yihiin.

495. Habeenkaad dhereg filanayso gaajana filo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: xaalkaaduunyada ayaaba iska ah m hadba sida aad wax u qorsheysato aanay noqon mararka qaarkood. Qofka oo rejo fiican qaba ayaa waaya. Isaga oo rejo beel ahna wax buu helaa..

496. Hadaad dhimaneyso dhareerka waa la iska duwaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku si kasta oo ay xaaladiisa dhaqaale ama caafimaad u liidato waxa wanaagsan in uu adkeysi muujiyo g o u u samro, Dadniniadiisana jlaaliya. ................ ..............................

497. Hadaan la kala roonaanin roob ma da'o.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay wax wanaagsan tahay in labada qof ama koox ay mid haddii sida fiicneyd aanay sameyn aan lagu dayan oo laga wanaagsanaado.

498. Hadal aadan fileyn iyo falaarba waa kaa nixiyaan.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in uu qofku u dul badan yahay una calool adag yahay waxa uu filayo oo xagiisa suurto galka ka ah inay ku dhacaan. Laakiin waxa ka nixiya wax aanu ku talo gelin hadday si kedis ah ugu dliacaan.

Telegram Somali Books @Som_Books

499. Hadal aan fiiqsi loo odhan iyo caano aan fiiqsi loo dhamin, labaduba feedhahay wax yeelaan

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado inhadalka iyo wax cuniduba ay u baahan yihiin in si degen oo miyir leh ay u baahan yihiin. Waayo hadday degdeg noqdaan labaduba caaftmaadka ayey wax yeelaan

500. Hadal waa la iloobaa qoraalse dhaxal buu gala

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in uu qofku ogaado in waxa la qorev ay markasta ka faa'iido badan yihiin waxa afka laga sheego. Waayo horey ayaa loo yiri qalbi dad xaashi ma aha.

502. Hadal af dhaafay afaaf[107] dhaaf.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in uu qofku ku dadaalo in uu sirtiisa ama midda lagu aaniinay qariyo ee aanu faaflm Waayo hadalku mar haddii uu afka ka baxo albaabka guriga wuu dhaafaa oo waxa uu xulaa bulshada dhexdceda.

503. Hadal badan bar waa been biyo badana bar waa callow.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in uu qofkuiska ilaaliyo hadal badnida iyo tororogta. Waayo hadalka badan farriidnimo maaha oo dadku waxa ay u qaadanayaa in qofkaasi beentiisa hadal badan ku qarinayo.

504. Hadal badan dan baa dhaanta.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa; inuu qofku ogaado inuu shubo hadal iyo sheeko dheer oa uu dantiisa ku iloobo.waayo qofkamaadlowga ah ee meelaha ka sheekeeya inta badan dantiisa way dayacan tahay>....................................................

Telegram Somali Books @som_Books

505. Hadal badani fariidnimo ma aha

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qoiku aanu karti iyo ammaan ka doonim hadal badan oo dadka uu afka qabsado. Waayo caqliga iyo xeeldheeridu waxa ay ku jirtaa aamuska iyo u fijrsiga.

506. Hadal caruureed iyo haraati baarqab[108] midna lagama kaco.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in la iska jiro oo aan lagu kadsoomin, hadalka wax ma garatada ee aan xil iyo xishood midna kaa dabaaleyn. Sidaa oo kale haraatiga awrka weyn isaguna een dambe ayuu leeyahay oo lagama kaco.

## 507. Hadal garowshiinyaa looga dhergaa, hilbana biyo.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qotkuogaado tabashada oo la qirto ama la ogolaado waxa lagugu sheeganayo inay fududeyso qaandhawga ama xoolaha qofka lagu xukumm Sidaa oo kale hilbana haddii aad dooneyso in aad si fiican u cunto waxa kuu fududeeya biyaha.

## 508. Hadal haamo lagama buuxsho.

**Duluc;** Maahmaahdan macnaheedu waa: in sida biyaha, caanaha iyo cuntooy inka kale aanu hadalku weelal laga buuxin Karin. Taasina waxa ay ku tusaysaa waxtar la'aan tiisa iyo sida uu u duulo ee ay hawadu u qaado.

## 509. Hadal intuu afkaa ku jiro ayuu amaanadaa yahay

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: mar haddii hadalkii sirta ahaa ee caloosha ada ku jirey uu afkaaga ka soo baxo, waxa uu ka baxayaa xifdintii iyo ammaanadii uu kugu ahaa oo dadka kale ayaad ula siman tahay>

## 510. Hadal iyo hablaba duco la'aan bay bataan

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in si dadka iyo dnunyaduba ay u bataan loo baahan yahay in alle laga baryo in uuu bad iyo oo u barakeeyo. Laakiin berigii hore Soomaamlid liadalka badan iyo gabadhahabadan ma aanayjcclayn.

## 511. Hadal iyo hilbaba kala qalan.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay wanaagsan tahay in hadalkana la qeexo si loo fahmo, hilbahana la saafo si ay biseylka iyo cunida labadaba ugu fududdaato.

Telegram Somali Books @som_Books

512. Hadal lama agjoogsado ee geed baa la agjoogsadaa.

Duluc: Maahmaahdan macnahcedu. wear in qofku ogaado in aanu hadalku liadh lahayn ladugaashado sida gecdka oo uu yahay wax marka la yjraahdo hawadaraaco oo taga..

513. Hadal lama wadaago ee caanaa la wadaagaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheeduwaa: in qofku ogaado in liadalka uu ku qumx badan yahay in la iska sugo oo uu kolba qof yiraahdp. Marka uu dhameysto qotkii kale loo warecjiyo. Qofkiikalena uu mafkifca dhageysto. Si loo faluno waxa lagahadlayo.

514. Hadal marqaati leh iyo hilib mindi leh midna laguma mergado.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay wanaagsan tahay in qofka doonaya in uu ajiinku soo oogo qof in uu marqaati sameysto. Si ay dacwadiisu meel mar u noqoto. Sidaa oo kale haddii hilibka loo haysto mindi lagu yar yarceyo isaguna cunaha ayaa si dhib yar loo marin karaa.

515. Hadal murti leh iyo hilib miid[109] leh midna laguma mergado.

Duluc: Maahmaahdan macnahcedu waa: in hadalku marka uu kooban yahay, qeexan yahay$_5$ haddana xubno jeeyahay waa la fatal ogyahay. Sidaa oo kale marka uu hilibku baruur leeyahay isagana waa la liqi karaa......................................................

516. Hadal nin si u yiri nina si u qaaday.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: inuu hadalkuyeelankaro macnayaal iyo ujeedooyiu badan. Qotkastana sida ay la noqoto ama unjecel yahay uu u fahmo. lyada oo ay dadku garashadakukala duwan yihiin,.

Telegram Somali Books @somali_Books

517. Hadal nin yareeyey kama wada tegin nin badiyeyna ma wada dhameyn.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in uu hadalku nuxurkiisa ku jiro in la soo kobo 00 keliya danta laga leeyahay lagu soo ururiyo, Waayo haddii hadalka la badiyo waxa ku dhcx baaha 00 ku luma dantii iyo hadafkii laga lahaa.,

518. Hadal run baa lagu caddeeyaa ilkana rumay[110]

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in aan hadalka sida dharka 00 kale aan loo maydhin st loo caddeeyo. Laakiin hadalka waxa lagu qayaxaa runimada. Ukabana waxa caddeeyaa rumey iyo nadaafad..

519. Hadal waa dan iyo daal.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in hadalku u qaybsamo labo nooc 00 kala ah mid dan iyo baahi jirto looga hadlayo 00 lagu maareynayo iyo mid iska sheeko iyo waqti dhumis ah 00 marka dambena lagudaalayo;

520. Hadal waa margi oo hadba meel u jiidma.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in uu hadalku yahay sida seed 00 kale 00 hadba sida loo jiido ama loo leexiyo noqonaya. Waayo adiga 00 hadal si ulajeeday ayaa uu qof kale kugu xumeyn karaa 00 si qaldan u leexin karaa.

521. Hadal waa mul ti iyo macno la'aan.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in uu hadalku yahay mid xikmad leh sida gabayga, maahmaahda iyo oraahyada iyo mid iska haw raar caadi ah aan sido la qabsado lahayn.

Telegram Somali Books @som_Books

## 522. Hadal waa murti iyo yoonyoon [0']

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa; in uu hadalku yahay mid xikmad leh oo la jeclaysto iyo mid iska cantara baqash ah oo meel laga xusuusto aan lahayn.

## 523. Hadal waa run kama rayste.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in sida dhulka uu biyaha ugu baahan yahay, jirkana dhaashiga ugu baahan yahay uu sidaa oo kale hadalkuna runta ugu baahan yahay.si xiriirka dadka dhexdiisa ah uu kalsooni u yeesho.

## 524. Hadal waayeel waa guud mar.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka waayeel ka ah aanu hadalkiisa diirka uga qaadin ee si dad yar ay u fahmaan ama qofka loola dan leeyahay oo keliya marka ayuu sarbeebaa.

## 525. Hadal ha yaraado danna ha ahaado

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa; in uu hadalkukoobnaado baahi iyo muraadna uu ku saabsan yahay. Si aanu u noqon mid aan danlagas gelin oo aan wax qiimo ah lahayn.

## 526. Hadalka runta ah kaftanka ayaa keena.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa; j.n reer magaalku uu hadalkiisa dhabtaku gudbiyo. Si kaftan ah oo qabow> lyada oo ay dadka qaarkii moodanayaan in uu iska ciyaarayo.



Telegram Somali Books @som_Books

527. Hadalkaaga hortiisa afeef baa la dhigtaa, aqalkaaga hortiisana ood-afo

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku marka uu hadalka bilaabayo ka eudur daarto in haddii ay wax gefaf all ka dhacaan loo saamaxo. Sidaa oo kale si cadwoga iyo dugaaga looga nabad galo waa in guriga deyrkiisana la iska oodaa.

528. Haday degdegsiinyo door dhasho kaadshiinyana waa kiish lacag ah.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in waxkasta oo la sameynayo si miyir leh loo qabto, Sidaa oo kale hadalka qudhiisu w'axa uu ku wanaagsan yahay in si degen loo yiraahdo si qofka dhageysanayo u fahmo,

Telegram Somali Books @Som_Books

529. Haday fooli timaado guda qarsiiyo dhamaa

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in haddii xanuunama dhibaato qofka ka tan wTeyn ay ku timaado in aanu xishood iyo isqarxis waqti u hayn oo uu dayacan yahay.

530. Haday hamadaadu(112) kuu been sheegto taagtaada ayaa kuu run sheegta.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa; in haddii ay qofka ay hawadiisa ku tiraahdo cirka ayaad gaari kartaa, awoodiisa ayaa xirta oo meel fariisiisa.

531. Hadba sida loo jabaa loo dhutiyaa.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku uu u dhaqmo kolba inta ay awoodiisa le' eg tahay, marka laga hadlayo xagga dhaqaalaha.

532. Haddii ilaah irid xidho irid kale ayuu furaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in iimaanka wanaagsan uu dhigayo in haddii qoiku uu meel wax ka soo geli jireen ama shaqo uu haystay ay ka dhammaato in uu meetkale faraj uga furayo.......................................................

533. Hal diqsi oo loo yeertay inta kale ayuu u yeeraa

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu vzaa: in ay jiraaii waxyaabo haddii laga helo qayb ka mid ah sida duqsiga iyo shinida ay inta kale soo jiidaam V/axa sidaa g o kale la mid ah in warka xun iyo dembiyadu ay isfurfuraaty........................................

534. Haddii lagu sheelo(U3) waa lays sheegaa, haddii lagu sheegana waa lays sheelaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in haddii waxtarkaaga, hawlkamimadaada iyoqiimahaaga ay dad kale sheegaan, waa la aamusaa. Haddiise lagu qariyoxaasidnimo darted waa la hadlaa.

Telegram Somali Books @som_Books

535. Haddii magacu kaa xumaado maal wax kuuma taro.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in haddii qofku sharafta iyo milgaha gobanimo dhaawac ka gaaro oo uu ceeboobo in aanay maal badan oo uu ku bixiyo si uu u soo ceshado aanay waxba u tareyn,

536. Hala tukado loo kala hari waa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay dhab tahayin dadku isku raacsan yihiin in llaahey laga cabsado oo salaadda la oogo. Waayo taasi waxa ay tusaaleu tahay islaamnimada saxda ah.

537. Hal aad nin ku baratay kaama bi'in.

Duluc: Maahmaahdan niacnaheedu waa: to qofka wixii xoolo ah ama waqti ah ee kaga luma qof barashadii amaun kubarto aanay ka qasaarin, Waayo waxa mi ammaanadiisa bartay qpf<

538. Hal bil qaday beri kuma dari waydo.

DuJuc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka in badan wax u $oo samra to ay habboon tahay in uu maalmo kale no kooban ku sij daro $i uu dantii tm ka lahaa u gaaro.

539. Hal booli(Il4) ah nirig xalaal ah ma dhashao.

Dulijc: Maahmaahdan macnaheedu waa: to waxa ay asalkeoda xaaraan yihiin aanay ka farcami Karin wax xalaal ah. Sida beer xaaraan aan looga goosan Karin daleg xalaal ah ama lacag xaaraan ah aanay ganacsiahaan u faa'iidi Karin lacag kale oo xalaal ah. ............................................... ..................

Telegram Somali Books @som_Books

540. Hal diideysaa geed ay ku xoqoto ma waydo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: to marka uu qofku doonayo h wax la weydiistay uu diido uu u hefo waxyaabo badan oo uu ku marmarsiinyoodo, Siaanan loo marin waxauu ................ diidayey.......................................................................................

541. Hal libaax arkaysa ma godlato

**Dulue;** Maahmaahdan macnaheedu waa; to haddii qof meel dood iyo hadal looga baahan yahay ama marqaati fur on uu goobta j oogo qof uu ka haybaysanayo in aanu si wanaagsan u hadli Karin.

## 542. Hanqaraarac lug uma dhutiyo.

Du hie: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka xoojo badan haysta ama carruur badan haysta haddii uu qasaare yar soo gaaro waxba uma noqonayo oo wuu ka soo kaban karaa. Sidahanqaraaraca lugaha badan haddii uu rnidka go'o aanu socodkiisa wax u ycelayn.

## 543. Harag sagaaro iiga kac mooyee iiga durug ma leh

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in waxa haddii ay aad u yar yihiin aanay inta badan labo dhinac wada kaafiti Karin ee ay hal meel uuti baalii dabooli karto.

## 544. Harag ari intuu wanaajiyo hadal ma wanaajiyo

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in marka la gaaro in baalii la maareeyo ay hooda iyo iyo waxqabadku ka wanaagsan yihiin hadalka iyo badan qaadka beenta ah.

## 545. Harag kasta cididiisaa xoqi taqaan

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay baahiynhu kala duwan yihiin, midkastana qofka ay u gaarka tahay uu yaqaan si da wax looga qabto. Sida qofka meesha cuncunta ay cididiisu ugu fududahay xoqidiisa.

## 546. Haruub la tolaaba haantiisaa ka weyn

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay carruurtu ogaato in waalidku ilmahiisa katixgelinlceyahay > Baraliana ardaydiisa> ....................................... ................................



Telegram Somali Books @som_Books

547. Hasha labada geel jecel dhexdooda ayuu bahal ku cunaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofkugo'aan yeesho oo aanu arrimaha ka labalabeyn, si aanuu isaga oo labo airimood dhexdooda ku daydayana aanay dhibaato uga soo ........gantim: •■=L

548. Hasha maqaarka diideysaa meel dalooshay ka eegtaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qoika doonaya inuu wax diido uu ceeb u yeelo isaga oo aan xitaa ceeb lahayn. Waayo waxa ka go* aan in aanu waxaas iibsan. Taasina dhaqan ahaan lama ammaanin.

549. Hashu iyadaa geela cunta iyadaana cabaada.

Dnine: Maahmaahdan macnaheedu waa: in dadka qaarkii ay iyagu dhibaatada abuuraan huriyaan, haddana iyaga cabashada badiyaan si aan loo fahmin oo ay qiiq isugu qariyaan.

550. Hashu laaca[115] ayey aragtaa ee laaga[l 16] ma aragto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: inuu qofku ogaado in ay jiraan waxyaabo badan oo wanaagoodu kuu muuqdo laakiin ay dhibaatooyin badan ka sokeeyaan

551. Hashu maankeyga gadaye ma masaar bay laqday

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka marka uu arko wax maankiisa ka weyn oo uu la yaabo. Sida qof dhaqan aadan kuogeyn laguguyiri isaga ayaasameeyey

552. Hawi baa hagar bax leh

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku uu ogaado in waxa si dhab u deeqa ay tahay shaqo uu geliycy dhul, xoolo ama ganacsi. Taas oo uu marka dambe ka faa<iido

Telegram Somali Books @som_Books

553. Haween u samir ama ka simir

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in dumarka ay dabeecad ahaan ka duwan yihiitt taga. Marka khilaaf uu dliacana ay ihiin dhibaatada ka dhalata. s

554. Haween waa belaayo loo baahan yahay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in dumarku ay cabasho badan yiliiin. Inta badana ay ragga marka ay qabtaan sidii arrintooda loo dhameyn lahaa ay dhibaato badan kala kulmaan.

555. Hawo iyo hoos galbeed midna laga gaaro

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in. marka uu hooska galbeed soo baxo inuu dhulka oo dhan ku baaho. Sidaa oo kale qofka hawada iyo damaca badana mama ma soo kobobaahidiisa oo dhan.

Telegram Somali Books @som_Books

556. Hilib beer laga doortay waa weyd[117]

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in xubnaha uu ncefku ka kooban yahay lagu kala sooco neefka shilisnimadiisa iyo caatonimadiisa. Sidaa darted haddii neefka beer mooyee meel kale oo laga qaato laga waayo neeikaas oo xayeesi.

557. Hilib waa nin waayey iyo nin dabada ku wadhwadhay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay jiraan waxyaabo badan oo dadka qaarna ay meel ay kala dhigaan la' yiliiin, dadka qaarkoodna aanay haysan. Waana badanaa sida ay nolosha aadamigu kala tahay,' .

## 558. Horsed Hagar kuma maqna.

Du hie: Maahmaahdan macnaheedu waa: in haddii qofku mas'uul ama hoggaarpiye lagadhigto ay xaq ku tahay in dadkii horseedka ka dhigtay aanu khiyaamin.

## 559. Hooyo baalkeeda ayey ilmaha ku korisaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in hooyadu cuntadaiyo caanaha ay iitnaha siiso ka sokow in aynaxariis iyo dareen jaceyl ay hooyadu ilmaha bogga ugu koriso.

## 560. Hubkaaga iyo hayinkaaga midna laguma hodmo.

Telegram Somali Books @som_Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in aanay habbooneyn in qofku aanu isku dayin baahi iyo dan haysa darteed in uu hubkii uu isku difaaci lahaa iyo gadiidkii uu fuuli lahaa iska iibiyo. Taas oo baahidiisiina aanwada dabooli Karin. Wixii lagu yaqaanayna dhaafmeysa.

## 561. Hubsiimo lial baa la siistaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofku hubsado oo xasilooni iyo feejignaan arrimaha ku maareeyo. Xitaa hubsiinadaa darted waqti iyo maalba ha uga lumee.

## 562. Hunguri waashaa war qaba, ninkii waalaa ka daran.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku xakameeyo damaciisa badan oo aanu hor boodin hadba waxa ay naftu ,________ damacdo>..................... ..........................................................

## 563. Hunguri wax ka weyn la mariyey wuu dilaacaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in haddii qofku wax aanu awoodin naftiisa kujaribo lagayaabo in ay dhibaato daano weyn gaarsiiso ay ku dhacdo,

564.Hunguri wedkii ma arko.

Duluc: Maahmaahdanmacnaheedu waa; in qofka hungurigaxun ee -damaca badan uu marka dambe bohol ka rido damaciisaa waatida ah. Taas oo gelisa Qatar noloshiisa.

565. Hunuhunu hadal ma aha, himbiririirsina[118] wax arag maaha.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: hadal nuxnuxda ah ee aan si cad loo fahmeyn hadal fiican ma aha, Indhaha aan si fiican waxugu muuqan ee madmadowga uuuga jiro midna wax lagu kalsoonaan karo oo talo lagu goosan karo maaha.

566. Hurdo habarba korin weydaye ma anigay hilbo i siin

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofku shaqeysto oo fadhiga ka kaco, Wahsiga iyo huradadana uu iska daayo. Waayo dadka waaweynee horey u soo tancaday ayaaugu badan dadka nasta ee hurda. lyaguna waxba kumakordhiso.

567. Intii orodjirey, kuftinna wayjirtey

Duluc: Maahmaahdau macnaheedu waa: in qofku ogaado intii ay nolol iyo tacab .ay j keen in ay faalido iyo qasaaro labadaba ay jirecn. Waayo maaha qofka in uu ku talo galo markasta in uu guuleysto ee waa in guuldaraduna uu nolosha qayb ka siiyaa,

568. Iimaan allaa uur buuxiya

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku waxyaabaha qaarkood oo sharaftiisa waxyeeli kata uu ka hawo gaabsado oo uu ku samro waxa uu markaa gacanta ku hayo.

Telegram Somali Books @som_Books

569. Isma hurto waa hadhuub iyo haan

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in dadka ay dano iyo dcegaan isku xiraan inay yihiin qaar aan ishurin oo ay noloshu isugu nudan tahay<

570. Ijiid aan ku jiidee waa gacmo daalis.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in aanay habbooneyn in ay labada qof iska laalaadaan. 1-yada ay noloshu ku fucan tahay in uu qofkasta maareeyo naftiisa. Laakiin haddii la kala maarmi waayo waa culeys>

571. Il ibtileysan ayaa belaayo aragta.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in aanay fricneyn in qofku noqdo mid markasta arrimaha dhanka xun ka eega ama dadka u fiira

572. Il ribix[119] arkeysa rixim ma dhawrto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in dadka ganacsiga iyo wax kororsiga ku jira ay markasta eegaan sidfi ay faa'iido hell lahaayeen ee aanay u aabo-yeelin qaraabo iyo saaxiib midna.

573. Ilaahey erey gef ah waa kaa keenaa kaagamase tago.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku iska dhawro hadalka badan iyo weliba hadalada laaqiga ah ee aan loom eel dayin. Waayo ereyada waarkood ee laaxinka ah waxa ay sababaan dembi weyn.

Telegram Somali Books @som_Books

574. Ilaahow noo deyn-yeel dadkana ha layn

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofku. jecel yahay rneelaha qaarkood, sida rneelaha wax iagu qaybsanayo in ay firanqo noqdaan, iyada oo aan dadkii meesha joogay aanay dhammaan ce sababo kale ay u mqan yihiin.

575. Ilaahey ma naxee wuu naxariistaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in dadku ogaadaan in wixii debec all ama dhibaato la iska qafiifiyo ah ee xag Alle ka timid ay ku timid naxariis iyo turfd xagga Alle ah.

576. Ilaahow aqoon la'aan ha nagu cadaabin eexana hanooga tegin

Telegram Somali Books @som_Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; Hawraar Iooga baahan yahay dadka garsoorayaasha ah inay in wixii garasho la^v^aan uga dhaca waa gaarkeed, laakiin ay iska jiraan eexo iyo cadaalad darroinay gaisoorkooda ku sameeyaan.

577. Ixsaanka ehelka ayuu ka unkamaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waatin qofku ogaado in samofalka iyo isgacan qabashada ay ku wanaagsan tahay in laga bilaabo qaraabada iyo sokeeyalia, Waayo iyaga ayaa xaqa koowaad qofka ku leh.

578. Ishu ayaan badanaa agteedana ayaan daraanaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in marar badan ay labo qof ama labo meel ama labo xayawaanay kala ayaan bataan. Taas oo ah qoraal xagga Alle ka yimid. Waayo rneelaha qaarkood haddii ay dadku dhibaatada kaga dhici lahayd waxa laga yaabaa inay rafaadi lahaayeen,

579. Indho aan meel wax ka arkeyn in ay dhacaan ayaa u dhaanta

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka ogaado in indhaha wejiga iyo kuwa qalbiga. marka la isku daro ay keenaan in qofku meel iog wax ka arko. Arrimahana hadhkooda ayuu fasiraa.

580. Ilko abeeso hoosta ayey ka xidhiidhaan

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in aan si qaldan loo dhexgelin dad walaalo ama qataabo ah. lyada oo ay jiraan colaadaa kore mooyec waxa kale oo hoos ahaan uga dhaxeeya oo ah wada dhalasho.

581. Ilko wadajir bay wax ku gooyaan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in marka laga hadlayo wadajirka iyo faa'iidooymkiisa tusaale loogu soo qaato sida ay ilkuhu wadjir cuntada uga burburiyaan.

582. Ilmo abaareed madar[120] laguma matajiyo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in iyada oo laga baqayo illaaco ama in la cawryo in ilmalia aan lagu hunqaacin meel dad badan oo baahan fadhiyaan. Waayo cuntada uu ilmaha matagayo ayaa laga yaabaa in dad badan ay halka ay ka timid isha raaciyaan.

583. Ilmo geed muuqda ayaa lagu geedi geliyaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in marka reerku guurayo ee ay ilmuhu daalaan ee ay ooyaan lagu yiraahdo si nlyadda loogu dhiso geedkaa naga horeeya ayaan degeynaa, Sidaa oo kale ciidanka iyo shaqaalaha waxa lagu rajo geliyaa wax ay hawsha ku labanlaabikaraan.

Telegram Somali Books @som_Books

584. In rag karo ayaa reer ka dhintaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in mararka qaarkood uu reerka dhibaato iyo baahiwax qabad ka mute hawl uu qofka reerka ka mas'uulka ah dabooli karo. Sidaa oo kale ummaddu wax ayiyada qabsan karto ayey shisheeyc la sugtaa oo ka baaba'a,

585. Inan rag hal uu kugu helo iyo mid uu kugu haysto isagaa leh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dumarka ayaa inta badan ku halqabsada ■niurtidan., lyaga oo rumeysan in raggu lceyahay awood rabbaani ah oo uu ku hanan karo. S idaa oo kale- waxa jira dad fursadaha hcla haddana ka f&fiideysta.

586. Indheer garad rag waa ku yaryahay dumama kumajiro.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in dadku uu ku kala duwan yahay xagga caqliga iyo odoroska. Qofkana waxa wanaagsanin waxa soosocda ama arrinka dhalan kara uu faaleyn karo.

587. Indho adag arooskeeday ka boodaa.

Du luc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in dhaqan ahaan ay ceeb tahay in gabadha la guursanaya aanay ka ciyaarin arooskeeda. Sidaa oo kale hawlaha qaarkood ayaa ku wanaagsan inay dadka kale sameeyaan, bedelka qofkii ay quseysay.

588. Indho rag in xun waa laga dhawraa.

D uluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka hunguriga xun ee damaca badan uu marka dambe bohol ka rido damaciisaa waalida ah. Taas oo gelisa Qatar noloshiisa.

Telegram Somali Books @som_Books

• 589. Inta aad qaleysay anna waan qaybinaayey

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: marka uuqofamn qorsheynayey, isla arrinkii uu qof kale si kale u qaabeynayey, Taas oo aan wadatashiga xaggiisa aan ku wanaagsaneyn.

590. Inta aan riix[121] qabe hadlin ayaa raaxo qabe hadlaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: arrin inta badan dhacda oo ah in qofka dhibaateysan inta aanu cabanin in uu cabasho sedbursi ah kceno qofkii ay isagu isugu toosneyd. Taas xaqa uu ka hadashiiyo.

591. Inta buufimo Taal biri ma qaboowdo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qoiku ogaado inta ay j oogaan dadkii dhibaato dhacday iyagu ka dambeyey in aanay dhibaatadaa si fudud u demi Karin.

592. Inta dhogortaadu dhan tahay ayaa la dhawrsadaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qoiku ilaaliyo sumcadiisa iyo sharaftiisa. Waayo sharaftu waa sida biyaha oo haddii ay daadato lama soo celin karo>

593. Inta jiilaal loo adkeysto jir looma adkeysto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in dhaqanka aadamigu uu yahay in qofka uu xilliga kuleylka ah abaar iyo oon uu ugu adkeysto. In aanay ugu adkeysan Karin roobka iyo -qabowga,................................................

Telegram Somali Books @som_Books

594. Intaad gaari doonayso baa goon-baar-[122)] wiilkeedu ciidamiyaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in guurku uu yahay nasiib. Waxa la doonayaana ay tahay ubad iyo waraso kaaharta. Marka waa in aan shardi lagu xirih. Sidaa oo kale shaqada iyo ganacsigu waa in aan laga xishoon in meet hoose laga bilaabo.

595. Intaadan falin ka fiirso.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku waxa uu sameynayo uu la tashi iyo ka fiirsi badanu yeesho. Si natiijadu u noqoto mid aan la isku canaanan.

596. Intay baaqan lahayd ha yaraato.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in beeraleydu marka ay meel aabuurayaan ay isku guubaabiyaan oraahdan. Sidaa oo kale waxa fiican inta aanay jiri lahayninhabayaraatee in wax la qabtm

597. Intay calooshu buki lahayd cagta ha bukto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku muraadkiisa meel kasta u maro. Si aanu ugu welwelin ama shalaayin maxaad sidaa u sameyn wayday,

598. Intii qof dhibtaa labo ma dhibto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: iniskaashigaiyowax-wada qabsigu yihiin wax hawsha adag ee badan fududeeya, Sidaa awgeed ayaa qof keliya wixii maalmo kuqaadan lahaa ay kooxi maalin ka dhameyn kartaa.

Telegram Somali Books @som_Books

599. Irbad la uruurshay masaar bay noqotaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in marka laga hadlayo wax ururinta si dhaqaale loo abuuro ama wax awood leh loo sameeyo ay ugn yar tahay irbadda. 4

600. Irid furan lama galee weji furan ayaa la galaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay dadka martidaah eegaan qofka waxa uu siinayo kasokow, sida uu qofku raali uga yahay joogitaankooda. Waa wejiga furan waxa uuka mid yahav martigelinta habboon.

601. Ishiisa laga arkaa ushiisa lagu tumaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; qofka laga arko in uuficilo iyo dareen soo jeeda lahayn ayaa wax isagu uu leeyahay dhibaato loogu gaystaa. Sidaa oo kale qofka afka garoocan ayaa xaqiisa la qaataa..............................................................................

602. Iskaashato ma kufto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: inliaddii ay dadku iskaashadaau ay xoogeystaan oo aanay dhicayu oo ay yeclanayaan awooday isku taagaan.

603. Iskudayasho dameeraa ku rima.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu. waa: in aanay wanaagsaneyn in qofku uuisaga daydo wixli dhaqan ah ee uu qayrkii ku arko. Waayo isku dayashada indhaha aan lahayn waxa ka timaado dhibaato aanu qofka kutalo galin.

604. Isma ogaa islaam laayey.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofku mararka qaarkood uu ceeb uu isagu leeyahay uu dadka kale u dhaleeceeyo. Isaga oo moog in isaguba ay dadku ku arkaan iintaas uu leeyahay.

Telegram Somali Books @som_Books

605. Isqaderis qoys kuma dagaalo.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in waxyaabaha ninka iyo naag'ta qoys wad a dhi say si wanaagsan ugu noolaan karaan ay ka mid tahay inay istixgeliyaan.

'06. Isu qabe aan loo qabin oo isla qaalan baa jira.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay dadka qaarkood islawcyni iyo kibir badan yihiin iyaga oo dadkuna ay u arkaan kuwo wax aanay ahayn iska dhigaya>

607. Jibin[123] dhaedaa fiin baa u dhug leh.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay dadka qaarkood kaga firfircoon yihiin ogaanshaha waxyaabo gaar ah dadka kale. Sida xogta ay kala hayaan qabadh iyo hooyadeed oo kale.

Telegram Somali Books @Som_Books

608. Jid ma qaloocna eejidiin[124] baa qaloocan.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay waxyaabaha ay tabashada iyo xumaanta ka imaan kartaa ay tahay waxyaabaha hunguriga la xiriira. Waayo dadku dibno la xiriiriyo ayuu leeyahay,.................................................

509. Jiljileec looma dhinto adadeygna looma noolaado.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay wedka iyo geeridu leeyihim xilli go' an oo qofka u qoran. Marka il-xumana looma dhinto, xoog badnina looma noolaado.

610. Jinni ninkiii keenaa bixiya.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay dhibaatooyinka qaarkood ay qayb ka ahaadaan xalkooda dadkii abuuray. Waayo waxyaabo badan oo ay ogyihiin ayaa fududeyn kara.

611. Jidh walaal ma ahee jidiin baa walaalo ah.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay dadku isugu xirmaan wax wada cun iyo wax isasiin. Taas oo saameyn weyn ku leh xiriirka wanaagsan ee ka dhaxeeya dadka.

612. Jid dheer haddaad mari jiraab([125]) sahay ku qaado

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay kaalin rnuhiim ah ka tahay sahaydu safarka wanaagsan iyo socodka joogtada ah ee meeshii la doonayey lagu gaaro.

613. Jidhkii la haye jiriidka kama qoslo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku haddii ay dhibaato ku dhacdo dad ay qaraabo, walaalo ama isku ummad yihiin ay isagana saameyn ku yeelanayso oo aanu faraxsanaaneyn.

614. Jid beereed jiilaal buu baxaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado hawl la qabtaa ama loo dadaalaa ay u baahan tahay in iyada oo aan xilligeedii bilaaban diyaar garow fiican loo sameeyo>

615. Ka door ka dar bay dhashaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in mararka qaarkood uu qofka wax wanaaji oo ka sii wanaaji sida uu u leeyahay laga yaabee in wixii ay xumaadaan oo sidii la doonayey ay noqon wayaan.

616. Kaadi badane waa loo gogol badiyaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka gefafka iyo sinbiririxada badan marar badan la saamaxo oo loo cudur daar bidayo ilaa uu iska garowsado.

Telegram Somali Books @som_Books

617. Kab xume ma haree kab laawaa hara.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in wax la'aan ay dhaanto in uu wax yar ama wax xuu. haysto. Waayo waxa aad haysato si kasta oo uu u liito waxa uu kugu simi karaa meesha aad dooneyso.

618. Kabbo uur ku madal leh.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in ha kala duwanaato ama ha kala badnaadee kabashada wax la kabado ay caloosha ......isugu tagayaan.

619. Kabtaada iyo tolkaagaba dhexdaa looga jiraa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka beesha uuka dhashay ee dhibkiisa iyo dheeftiisaleh ay habboon tahay in uu dhereg iyo baahiba ku dhex jiro oo la noolaado si ay .............garabugunoqdaan............. ............................... .... .................

Telegram Somali Books @som_Books

620. Kaftan iyo kaadi duulduul baa la isku cadaabaa

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa; in nadaafadda oo lagu dadaalo iyo hadalka aan qiimaha lahayn ee dembikuu soo jiidi kara oo laga fogaado ay qofka cadaabta ka badbaadin karto.

621. Kas naagood oo kadaloob rag kaaga dambeeyey kaad ku ogeyd maaha.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in dumarku ay xilliga guurka rag badan oo kala duwan ay la sheekeystaan. Ragas oo kala caqli iyo aftahamo ah. Sidaa awgeed ayaa waxa maskaxdooda soo mara isbedelo badan ooxaggga xo’aanka ah. ,

622. Kitaab meel aan lagu fasiri doonin laguma fiirfuro.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in hawlaba qaarkood meelaha aan wax looga qabaneyn lagu sop hadal qaadfa.. Waayo taasi waxa laga yaabaa in ay xalkeedii kor u sii laasho.

623. Kor waayeel waa wada indho hadduusan ahayna waa wada caqli

Duluc: Maahmaahdati macnaheedu waa: in qofka waayeelka uu waayo aragnimo xeel dheer leeyahay sidaa awgced uu waxyaabo badan arkikaro ama garan karo,

624. Kud ka guur oo qanjo u guur.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: marka ay amn taladeedu noqoto in la waayo mid ka wanaagsanmidda kale. Mararka qaarkoodtia ay ka sii xumaato middii horn ee dadka dhibaysay.

625. Kuftin jilib waayeel wax uga dhib leh.

Dulua Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka waayeelka ah aanu awood u lahayn sidii hore markaa ay badan tahay kuftintiisa. Waxa ugu xanuun badan midda uu jilibka dhulka kndhuf-ado.

626. La hubsayoo gorayo haad bay noqotay.

Duluct Maahmaahdan macnaheedu waa: in marka dhibatooda la ogaado wax ama qof sidii la moodayey niooyee si kale noqday. Sida qof geesi ama deeqsi la moodi jirey oo lagu hungoobay^

Telegram Somali Books @som_Books

627. Laab meel dhacday lama loodin karo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in aan lagu qancin Karin qofka meel kale u muuqato oo doonaya in lagu yiraahdo taladan qaado oo yeel.

628. Laabi labo u la'.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku marka uu hiyiga meel ku hayo aanu meel kale lagu haleyn Karin, Sida qofka ■ oo guurka qofka lagula taliyo, isaguna uu qofkalc jecei yahav ama shaqo loo hayo laakii uu mid kale doonayo.

629. Labaatan jir inta uu laan ka boodo ayaa talana ka boodaa.

Telegram Somali Books @som_Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka dhalinyarada ah sida uu xooggauga fudud yahay uu fikirkana uga fudud yahay. Sidaa awgeed waxyaabo badan oo la gudboon ayuu hareermaraa.

630. Labadii biyo hoostooda iska haraatiyey iyagaa is og.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ayjiraankhilaafaad badan oo dadka qaarkood ku dhex mara meelo ay iyagu si gaar ah n ogyihiin. Taas oo haddii la isku dayo haddii la fahmo ay adag tahay.

631. Labo kala bariday kala war la'.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay wax wanaag tahay in labada qof marka ay is arkaan isuxog waramaan. Waayo waxyaabo khayr ama shar ah ayaa soo kordhi kara.
Soomaalidu dhaqan ahaana way leedahay tilmaanta ah in ay sida quraanjada afka isu-saaraan.

632. Labo qaawani isma qaado.

Duiuc: Maahniaahdan macnaheedu waa: in aanay waxba is tari Karin labo qof oo dhibaateysan oo labaduba aanay waxba haysanitu.......................................................................................................

633. Labo xumo ku deristaa, dar Allay u colloobaan

Duiuc: Maahmaahdanmacnaheedu waa: in ay dadku ka fogaadaan in ay xumaan iyo sharta heshiis ku noqdaan. VVaayo marka dambe daacadniniada ayaa isku din doonta.

634. Labo aan waramin ma walaalowdo

Duiuc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay dadku wada hadlaan si colaada iyo cadownimada loogu bedelo heshiis iyo walaalnimo.

635. Labo sagaaro didmo mooyee wehel isma taraan.

Duiuc: Maahniaahdan macnaheedu waa: in ay ugaadha nooCeeda sagaarada aanay awood ay wax isaga celiyaan aanay lahayn. Sidaa awgeed marka ay isu yiniaadaan qaj afta ayey ka ................cararaan.....................................................:

636. Labo talaabo dhexdooda talaa ka dhalata.

Duiuc: Maahmaahdan macnaheedu waa: hi ay qofka maskaxdiisu shaqeysd 00 heer ay gaadho go'aankii ay mat dhaw gaartay ay bcdesho. Taas oo looga gaashaanianayo in hawlaha qaarkood la dedejiyo qabashadoodasi aanay u fashilin,

637. Laf dhuux leh iyo labo dhagax laysla waa

Duiuc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay mararka qaarkood aduunyadu ku wa siin oo aanad muraadkaaga meel keliya ka helim Noloshu waa qabyee marka aad meel daboosho meel ayaa ka baunaan,



Telegram Somali Books @som_Books

638. Lafjabtay sideedii ma noqoto.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in waxyaabaha qaarkood haddii uu qalad ku dhaco aanay sideedii here ku soo noqoneynj. Sidaa awgeedna laga feejignaando in fudeyd iyo ka fiirsi la aan ay wax ka xumaadaan.

639. Lafkaa weyn waa kujebisaa.

■Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay qofka waxycelo weyn u gaysato marka ay ku dhacdo arrinka tan weyn taagtiisa- iyo caqligiisa.

640. Lafo geri iyagaa la isku jebiyaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in mararka qaarkood awoodaada la kaydsado oo Si xeelad ah cadowgaaga mid la eg laga horgeeyo. ,,

641. Laftajecli ludda[126] jecli.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in aanay habbooneyn in qofka waxa q o dhan uu isaga doono. Ka dibna wax kasta uu yiraahdo aniga ayaa ay igu wanaagsan yihiin.

642. Laga barayba laga badi.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in dhaqamada qaarkood sida kuwa xun xun ay dhacdo in qofka laga bartay laga badiyo. Sida tuuginimada iyo balwadda.

643. Lama huraan waa caws jiilaal.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qolku si kasta oo uu damco nolosha dhabta ah ee uuku jiro inuu iska weyneeyo, haddana lama huraan ***ay*** ku noqoto in tiisa iimaansado.

644. Lax dhukani col iyo abaarba moog.

Telegram Somali Books @som_Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in dadka qaarkood ay ku j iraan qaar aan indhaha u fumeyn oo aan wacyiga la socon oo dhib iyo dheef xi lli lagujiraba aan garaneyn.

645. Lax waliba shilalka[127] ay isdhigtaa lagu qalaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka sida uu isu qiimeeyo iyo halka uu isdhigi ay dadku ku gawracaan oo dhigaan. Markaana ay habboon tahay in qofku sharaftiisa kor u hayo.

*646.* Legdin walaal ma leh

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in marka ay noloshutartan tahay aanay lahayn turaal oo qofku uu dadaalkiisa isugu geeyosi geeyo si uu u guuleysto.

647. Libaax nimaan aqoon baa lax ka rida

Telegram Somali Books @som_Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka waxa aanu garaneyn uu u qalbi adag yahay. Waxyaabaha qaaikood ayaa laga yaabaa in qof ay la weyn tahay, lana dhib badan tahay. Laakiin mid kale oo aan wax fikrad ahka haysan uu si fududahay,

648. Libaax nin ganay iyo nin galadayba kala og.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka weyn ee waayo araga ah ama caaqilka ah wuu garanayaa haddii ay wax eed ah ama dhib ah soo gaartay meesha ay uga timid.

649. Lihi libaax ka adag

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku cgaado in ay lahaanshuhu ama milkigu yahay wax ka difaaci kara waxyaabo badan oo shar ah ama dhibaato ah.

650. Lilaahi iyo laqdabo meel mawada galaan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheeduwaa: in aanaytalaabooyin badan wada qaadi Karin qofka daacadda ah iyo qo fka khiyaanada badan. Waayo marka dambe way kala haraam

651. Lug haday j eeniga dhaafto way j abtaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in haddii qofkudawgiisa uu ka leexdo oo meel aanu gaarin tiigsado waxa laga yaabaa may dhibaato weyn soo gaarto.

652. Lugtaneey marba nin ku qaad.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in arrin ama mas'uuliyad meel ay isaga dambeeyaan dad kata karti iyo caqli ah.kuwaas oo qaarna la mahdiyo, qaar katana. la saluugcn

653. Lun[128] walaalkaa ha qodin hadaad qodana ha dheereyn ku dhic doontaana ma ogide.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in aanu qofku maleegin shirqool iyo khiyaamo uu ku hagardaameynayo dad kale oo aanwaxba galabsan.

654. Luqun dheeraatay madax ma dhaafto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in flmuhu si kasta oo uu magac iyo maal u yeesho aanu ka magac dheeraan Karin waalidkiis.

655. Ma anigaa waalan mise cadan baa laga heesayaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku uu arko isaga oo istaquman oo ay dadka oo dhanna tayaabanyihiin gelkiisa. a Markaana uu dib isugu noqdo sida ay wax u jiraan.



Telegram Somali Books @som_Books

656. Magaca wanaagsan qabriga dushiisa ayaa laga helaa

Duluc: Maahniaahdan macnaheedu waa: sidabadaii ama caado ahaan dadka soomaalida lagu yaqaan in qofka inta uu nool yahay ladhaliilo. Marka uu dhintana la ammaano.

657. Maahmaah iyo masalba('129) meel bay ku socdaan

Duluc: Maahniaahdan macnaheedu waa: in hadalada xikmadda leh sida niurtida iyo maahmaahdu loo soo q aato marka uj eedo iyo meel ay ku habboon yiliiin loo cuskanayo,

658. Maag sokeeye maareeye ayaa loo diraa, maag shisheeyana macangag

**Duluc:** Maahniaahdan macnahecdu waa: in dhibaatada soo kala dhexgasha dadka qaraabada ah lagu maareeyo wada hadal. Halka dhibaatada shisheeyana lagu xaliyo a wood iyo ad-adeyg.

Telegram Somali Books @somBooks

659. Maalintii oday habeenkiina habar habar.

**Duluc:** Maahniaahdan macnahecdu waa: in ay dadku maalintiina walaalo guud iyo ilmo adeero yihiin. Habeenkiina baho iyo abtiyaal leeyihiin.

660. Maalin colaad fuley iyo geesi midna lalama tashado

**Duluc:** Maahniaahdan macnahecdu waa: labada qof midna sida saxda ah ee lagu badbaadi karo sharafiyoguulba kuma taliyaan. Midna hala cararo ayuu yiraahdaa, midna hala wadadhinto.

661. Maanka kaa maqan maskax walaalkaa ayuu ku j iraa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waal in ay wanaagsan tahay in qofku sameeyo la tashi guud si arrin uu maanka ku hayo u xaliyo. Waayo qofkakeligii sida uu utabar daran-yahay ayuu u talo daran yahay.

662. Macal cune soo muuqan doone.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka sedbursada ee xoolo aanulahayn ama dadkaka dhaxeeya cuna> vzaxa ay ka soo bixi doontaa mar aatiu fileyn.

663. Madal marqaati dhigo masaajidna dhagax dhigo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku si uu xaqiisa u helo ay wanaagsan tahay in sadaqo ahaan uu masaajid ku darsado, marqaati ahaan meel fagaare ah ka sheego.

664. Madag shin bay ku dhalataa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in ay arrin kasta leedahay xilli la gaaro miro dhalkeeda. Taasjna ay u baahan tahay samir iyo dulqaad.

665. Madax meel ka sareysa oo la salaaxo maleh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay meelkasta leedahay mas uul ugu sareeya oo ay talada ka goMo,

666. Madax muuqda iyo mindi saawir[130] ah midna lagama sainro.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in mararka qaarkood dadku ku kadsoomo in Utt kolba u muhdo qof wax matare ah hawl ii diridii ama mindi aart af lahayn haabashadeed.

Telegram Somali Books @som_Books

667. Malaay banaan ma yimaado ee makaalin(131) baa keenta.

Duluc: Maahmaahdanmacnaheedu waa: inqofkuogaado in waxkasta oo la qabanayo si looga gun gaaro ay u baahan yihiin in lagu daalo op waqti loo huro.

668. Manfac haddii lagu siiyo murdiye lama noqdo.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay asluubta dhaqanka qofka martida ah ay tahay in marka cunto la siiyo aanu weelka wada dhameyn. Waayo taasi dhaqanka soomaalidu ceeb bay ku ahayd.

669. Mandheer garkeeda ayaa lagu raadshaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka wax lagatabanayo ama xaajo guracan mid kasta gadaal loo raaco oo qofkana dadkiisa lagu raadiyo. Xaaladana sidii ay ku bilaabatay.

670. Manjo adhi labo waa ku xoqosho labana waa ku xaadhasho

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay habboon tahay in xubnaha uu qoysku ka kooban yahay ay hawsha u kala qaybsan yihiin. Qofkastana ogyahay marka waaguberyo waxa uu qabanayo.

671. Mar i dage(132) allaha dago, mar labaad i dagana anneys dagay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay wanaagsan tahay in qofku mar haddii ay meet ay dhibaato ka gaarto, in marka labaad isla dhibaatadii aanav ku soo noqon ee uu ka feejignaado.

Telegram Somali Books @som_Books

672. Marka ay ceelalyo[133] heshiiso ayey xooluhu biyo cabaan

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in marka uu hoggaanka iyo guurtidu ay heshiiso oo ay wanaag ka taliyaan ayaa ay bulshada inteeda kalena barwaaqo ku naalooneysaa.

673. Markaan talo hayey taag ma hayn, manta oo aan taag hayana tala ma hayo

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: marka uu qofku ku calaacalo waxyaabo badan oo markii uu awooday uu baylihiyey, kuwaas oo haatan oo aanu awood lahayn fahmay sixitaankoodii.

674. Maroodi inirtuu cuno maroorkiisa ayey ka jeeban tahay

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku waxa xaq dadeed ah ec uu si dulmi ah u cuno inay naftiisa ka go 'an tahay. Ciqaab arrintaa la xiriirtana inay ku dhacdo laga yaabo.

675. Maroodigu takarta saaran ma arkee midda kan kale saaran ayuu arkaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku aanu cambaareyn qof kale isaga oo waxa uu qotkaa ku dhaleecaynayo isagana sameynaya.

676. Marrey meel ay u talisay iyo maaw[i34] dameero la saarayba murug maarug baa u dambeysa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in infa badan meesha ay dumarka maamulaan lagu arko gefaf ku yimid deg deg iyo lafugurid dheeraad ah la'aanteed. Taas oo dadka qaarkood dulmi ku noqon karta>

Telegram Somali Books @som_Books

677. Marti deeq daran iyo oday faan daran midna lama arag

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku martida ah si fiican wax loogu siiyo uu marka uu sheekeynayo ku faano deeqsinimadiisa iyo odayguna kubaano caqli badnidiisa.

678. Marti foolkeeda ku dhaafay wan baa kuu qali lahaana waa la yidhaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay dhaqan wanaagsan tahay in martida laga farxiyo. Haddii aad awood u waydo-xitaa afka looga sheego sjda wanaagsan ee aad u soori lahayd haddii aad hayn lahayd.

679. Marti iyo meydba waa la maquunshaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in dhaqan aha an martida iyo meydkaba guriga meel gaar ah laga fariisiiyo. Si aanay qoyska guriga cag iyo cidi ugu dhibin.

680. Martida hore reerka ayaa ka naxa martida dambena iyada ayaa iska naxda.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in haddii reer ay horey marti ugu joogtay ay marti labaad u soo hoyato waxa gogoshiisa meet ka siiyo oo soo dhaweeya martidii horey u sii joogtay.

681. Mas madaxa ayaa laga dilaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in marka bahal la dilayo meel halis ah oo aanu ka soo kaceyn lagu dhufto. Si ay markiiba khatartiisa u yaraato. ,



Telegram Somali Books @som_Books

682. Maslaxadaada maqaar Ey baa loogu seexdaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in waxa dantiisa uu meel kastaumaro uiia seexdo> Xitaaliaddii ay tahay meel aanay naftiisa ka raali ahayn.

683. Matag meeshaad doonto kuguma simo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado baahiyaha qaarkood meesha aad dooneyso kunia gaarsiinkaraanoo waxa ay kugula dhacaan meel soke.

684. Meel aadan seexaneyn laguma luloodo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in meesha aanu muraadkii ka helayn uu waqti badan isaga qaado. Sidoo kale baahida qdfkana uu ku muujjyo meesha wax loogaqabankaro. ...

Telegram Somali Books@som. Books

685. Meel aar ka kacay atoor farfariisay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qof niagac iyo maamuus lahaa meel uu maamuli jirey, marka uu ka tegay ay bedelecn qaar kale oo aan kaalintiisa buuxin Karin..

686. Meel hal lagu qalay ma hilib yara mana hadal yara.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu v. aa: in meesha ay wax weyn yaalaan ay la yaab lahayn haddii dad badan lagu arko. Kuwaas g o doonaya in qofkasta qayb ka helo.

687. Meel hoo u baahan hadal wax kama taro.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in aanay wanaagsaneyn in lagula daalo hadal meel ay baahida ka jirta tahay wax siin ama baahi daboolid. Waayo taasi dhibaatada ayey sii xumeynaysaa.

688. Meel lagaa jecel yahay hadaad ka tagto meel lagaa neceb yahay ayaad tagtaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku aanu ka kibrin meesha laga qiimeeyo ee laga tixgelinayo. Waayo haddii ay taasi dhacdo waxa ku dhaca nabsigii meeshaas,

689. Meel waa laga muuqdaa ama laga maqnaadaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku shaqsiyad ahaan noqdo qof xilkas ah oo meesha shaqada maika uujoogo si daacad ah wax u qabta.

690. Meel dareen galay aamin ma galo

Telegram Somali Books @som_Books

Duluc*: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in shakiga iyo dareenku yihiin tilmaamo qofka ku beera aamin daro iyo tuhun, Marka

691. Meeli siday u taalo ayaa loola yaalaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in iyada oo nabadgelyada qofka la ilaalinayo ay habboontahay in qofku meesha uu tago-muu raaco sharciyada iyo xeerarka u degsan.

692. Meeshaad ku qoydo waa lagu qalajistaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku si kasta oo uu damco nolosha dhabta ah ee uu ku jiro inuu iska weyneeyo, haddana lama huraan ay ku noqoto in tiisa iimaansado.

693. Meeshii cir[135] laga filaayey ayey ceeryaamo ka timid.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in meel uu qofku faa'iido ama war wanaagsan ka sugayey ay ka timid wax aan ahayn wixii uu filayey. Ka dibna yaab iyo amankaak u keenay.

694. Milil[136] dushiis lama dhayo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in aanay habbooneyn in la duug duugo arrin u baahan in si cad loo sheego si loo daaweeyo.

695. Minjo dhooqo midba mar baa la baxshaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in marka ay dhawr dhibaato qofka ku wada kulanto ay wanaagsan tahay in midba mar la xaliyo.

696. Miro berde duuduub baa loo liqaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in mararka qaarkood hadala xun ee kicin kara dhibaato colaadeed ama cuqdadba keeni kara lama sheego oo waa laga aamusaa.

697. Miro gunti kujira kuwo geed saaran looma daadiyo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofku waxa uu haysto aanuu dayacin wax aanu haysan oo meel kale yaah Waayo ................ay., eeni kartaa i^lahadtibauu waayo,

698. Miskiin baa misko la fuulo leh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qolka jilicsan ee aan isdilaaci Karin inta badan dhibaatooyinka iyo culeysyada oo dhan lagu moosQ.____

699. Mukulaal minankeeda[137] joogta miciyo Libaax bay leedahay

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: inqofk adhulkiisajoogauu ka awood badan yahay sida marka uu dal shisheeye jooga. Waayo ciidda iyo hawada ayaa u hiilinaya...

Telegram Somali Books @som_Books

700. Muluc carruurta waa ku cayaartaa isna waa u qurgooyo.

Du luc: Maahmaahdan niacnaheedu waa: in mararka qaarkood wax qof u ciyaar ah ay qof kale utahay dhibaato. Taas oo aanu qofkaa hore aanu dareemeyn,

701. Muraadkaaga maqaar Ey baa loogu seexdaa

Duluc: Maahmaahdan niacnaheedu waa: in qolku ogaado in dantaada ama muraadkaaga loo maro meel kasta oo xun. Xitaa mararka qaarkood mcclo xun ayaa lop fariistaa.

702. Naag guur la’aan baa u daran nina shaqo la’aan

Duluc: Maahmaahdan niacnaheedu waa: in xilliga nolosha haweenkawaxa ugu daran uu yahay inay guur waayaan. Halkja ragguna u ku dhibtoodo haddii uu shaqo waayo. Labadan arrimood waxa ay nolosha kaga jiraan meel muhiimah.........•.. ...........

Telegram Somali Books @som_Books

703. Naag la furay fadhi uma yaal ninkii furayna falkiisii ku noqoy.

Duluc: Maahmaahdan niacnaheedu waa: in niarka uu qoysku burburo oo uu kala tag lammaanaha ku dhaco in lahadoodaba ay midba hawl cusub ku soo furmayso.

704. Naag la'aan waa naf la'aan.

Duluc: Maahmaahdan niacnaheedu waa: in dumarku yihiin feer laga jeexay raga oo ay xagga nolosha ku dhameystiraan la'aantoodna jiritaanka raga waxa uu gelayaa qiilqiil.

705. Naagi meher baa xira ragna qawl.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka marka uu ballon qaado aanu burin ama ka gilgilan fulinta ballantaa.sida durmarkuba aanay uga boodi Karin marka xarig lagu xjro.

706. Naago been baa lagu soo xero geliyaa, runa waa lagu dhaqaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in dumarka marka la doonayo in guur dhab ah lala wadaago si qalbigeed loo soojiito waxkasta loo faaniyo oo loo qurxiyo. Marka dambena dhabta ay ku dhaqanto.

707. Naago geel waa u wada caano ragna adhi waa u wada caano

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in mararka qaarkood wax qof u ciyaar ah ay qof kale u tahay dhibaato. Taas oo aanu qofkaahore aanu dareemeyn.

708. Naago markaad xariir u gogosho ayey xanan kuu goglaan

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in badanaa dumarka ay jecel yihiin abaal ka dhaca. Mararka qaarkood ayaa marka wanaag loo sameeyo ayaa waxa ay ku bedelaan xumaan.

709. Naago nimay yaqaaniin col ma moodaan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in dumarku aanay iska jirin ama khatar aanay u arkin ama aanay guur ahaan xil isaga saarin ninka ay isla koreen ama ay qaraabonimo ka dhaxeyso.

Telegram Somali Books @som_Books

## 710. Naago u samir ama ka samir.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in dad badan oo waayo arag ah ay ku taliyeen in dumarka lagu dhaqi karo in loo dulqaato gefafkooda ama la iskadaayo oo meel cidlo ah laga joogo-

## 711. Naago yar-yareysi ma leh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in dumarku ay xagga waxtarka ka soo horeeyaan raga. Gaar ahaan marka ay yar yaryihiitL

## 712. Naari meel qabow ma leh.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in mararka qaarkood qofku uu dhibaatooyin badan oo nolosha dhinac walba ka hareereeyey uu kala door doorto isla dhibaatooyinkii qaarka mid ah.

Telegram Somali Books @som_Books

## 713. Nabad baa caano macaan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: inxilliga nabaddaiyo degenaanshaha ay caanuhu ka macaan yihiin sida ay marka colaadda jirto u dhadhamaan.

## 714. Nabsi bil ha jiro boqolse ha jiro'e ishaa baalkeeda ka dhaw

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku marka uu dadka qaarkood ama qof dulmi ku sameeyo yaanu moodin in sidaa uu ku duugoobayo. Laakiin maalin maalmaha ka mid ah ayuu ka soo bixi doonaa.

715. Naf ilaahey leeyahay nabsi lagama galo

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofku isfca ilaaliyo in uu naf ilaahey abuurtay dad ama xayawaanka midka uu doono ha ahaatee in aanu dukmimn.

716. Naftu orad bay kugu aamintaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka inta uu nool yahay uu dadaalo uu oo shaqo iyohorumar mustaqabalka u diyaariyo.

717. Nimaad dhashay kuma dhalin

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay dhab tahay in mania xagga naxariista aanay iska mid ahayn waalidka iyo carruurta. Waayo carruurtu way ka aragti gaaban yihiin waalidkood.

Telegram Somali Books @som_Books

718. Nimaad taqaan yaad tahay lama yidhaahdo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in haddii qofaad garaneysay waxyaabo aad ku taqaanay oo u qarsoonaa uu la soo baxo. Taasi la yaabi maysid oo halka ay ka timid ayaad garaneysaa>

719. Ni maan dhul marin dhaayo ma 1 eh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay waxyaabaha waayo-aragnimada keena ka mid ah in qofku socdaa oo dhul badan maraa. Si meelo iyo dad kala duwan uuu soo arko.

720. Nimaan hadlin hooyadii qadisay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku ogaado in ay dantiisa iyo baahidiisuba uu ku heli karo in uu hadlo oo uu afkiisa la baxo. Laakiin haddii uu qofku xishood ama baqdin darteed uu la hadli waayo xaqiisa ma helayo.[A]

## 721. Nimaan kuu furi doonin yuusan kuu rarin

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku ogaado in talooyinka dadka qaarkii aanay meet Incan ku gaarsiin Karin. Waayo dadka waarkood ayaa laga yaabaa wax dhibaato dambe kuu keenaya inay kugula taljyaan.

## 722. Nimaan qooq dilin maroodi ma dilo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado inkibirka iyo xasilooni Ia'aantu ay qofka ku dhigaan dhibaato aanay ; kale ku dhigi lahayn. »

## 723. Nimaan talin jirin haduu taliyo nimaan tegi jirin ayaa taga

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in talada iyo hoggaamintu ay yihiin wax u baahan waayo aragnimo iyo taariikh. Sidaa awgeedna qofka ku cusub uu saluug badan la soo gudboonaado.

Telegram Somali Books @som_Books

## 724. Nimaan waxa soo socda garan, waxa joogo ma garto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in ay habboon tahay in indheergarad la noqdo oo arrimuhu inta aanay dhicin natiijadooda la sii qiyaaso. Haddii kale xalkooda ayaa adkaanaya,

## 725. Nin aduunyojoogoow maxaa aragti kuu laaban

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in adduunyada waxyaabo badan oo dadka ka yaabiya$_5$ ay markasta sooifbaxaan. Sidaa awgeed ayaa qofkasta oo aduunyada ku nool uu haystaa waayo-aragnimo ku filan.

## 726. Nin af leh ayaa abaar ka baxa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in waxyaabaha dhibaatada looga baxo ay ka mid yihiin maalkaaga oo lala baxo. Xoogaaga oo lala baxo iyo afkaaga oo lala baxo.

727. Nin aan hal kuu odhan, hal kuma siiyo

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu. waa: in qofku ogaado in mararka qaarkood ay habboon tahay in qofka hadal iyodan iyo difaac u ah loo yiraahdo. Waayo qofka hadal kaala bakheylay humgurina kaala bakheyh

728. Nin buka boqol u talisay

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofkuogaado in qofka xanuunsanaya kolba si lagu dayo. Si caafimaad deg deg ah u helana talooyin badan la siiyo. Taas oo kalewaxaa la mid ah qofka ay dhibaato ku dhacday isaguna talooyin jaho wareeriya ayaa la siiyaa,.

729. Nin carooday laga badi

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in caradu ay tahay waxyaabaha qofka fursado badan dhaafin kara. Sidaa awgeed ayaa habboon in carada la iska ilaaliyo, maadaama aad tartanka noloshaa ku jirto.

Telegram Somali Books @som_Books

730. Nin arrinkiisa rartay, waa nin orgi rartay

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in talo wadaaga iyo dadka oo lala tashado ay wanaagsan tahay, Maxaa yeelay haddii qofku keligii tashado wax weyn ma qabankaro,

731. Nin cayriin u yaal ayaa biseyl deeqaa

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in wax kaydsigu uu yahay wax aad u fiican. Waayo qofka marka uu wax madhaxsado ayey wixiisa kalena ku filnaan karaan.

732. Nin daad qaaday xumbo cuskay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in haddii ay dhibaato ku dhacdo uu waxkasta naf iyo badbaado ka doono. Waayo talada ayaa farihiisa ka baxday.

733. Nin dhalasho huwan dhar uma baahna
Duiuc: Maahrnaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in dadkaaga iyo dalkaaguba ay waxyaabo badan kuu yihiin. Waayo qofka dhulkiisa iyo dadkiisa dhex jooga dhar qurux badan oo uu magac ku yeesho uma baahna.

734. Nin dhego adag dhuuni ugu yeer
Duiuc: Maahrnaahdan macnaheedu waa; iti qofku ogaado in dadka qaarkii lagu wado hoo iyo waxsiin. Halka dadka qaarkilna isxilqaaniyoiskitwaxloogahelo.

735. Nin dhul ganay ma gefo.
Duiuc: Maahrnaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in waxyaabaha qaarkood ay ku fiican yihiin hubsiimo iyo turxaan bixin. Si qofkasharaftiisaaanu dhaawac u soo gaarin. Waayo waxaa la rabaa in xuj adaadu u ballaaran tahay sida dhulka..........................................................................................

736. Nin durbaan tumay ilaaq[138] dalbay
Duiuc; Maahrnaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in haddii arrin ku kaco uu u diyaar garoobo in dadku fal celts uga imaanayo. Markaana su'aalaha dadkajawaabahooda uu meelsiidhxgtaa.

737. Nin fadhigaaga arkaya looma sare joogsado.
Duiuc: Maahrnaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in. aanay fiicneyn qofka baahidadda garanaya inaad calaacal ugu darto. Si aad wax fiican uga hesho. Laakiin taasi sharaftaada ayey dhaawacdaa.

738. Nin gardaran ma guuleysto.
Duiuc: Maahrnaahdan macnaheedu waa: in qofku iska ilaaliyo adyadda iyo gardarada. Waayo waxaa la ogaaday qofka dulmiga iyo gardarada badan inay guuldaro iyo hoog u dambeyso.

Telegram Somali Books @som_Books

739. Nin geedo soo tiriyey oo garas ka soo tegay geedo ma soo tiring

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado inay waxyaabaha nolosha dadka ku tiirsan tahay ay kala qiimo badan yihiin. Sidaa oo kale dadkuna waa kala dadkuna waa kala waxtarsan yahay.

740. Nin habaaran ma harsado.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in habbaarka waalidka ama kuwa xaqa kugu leh uu yahay wax xun aan kaa harin. Rag iyo dumarba qofka habaarka qabo dadka waa ka tilmaanan yahay.

741. Nin habari dhashay hal ma seegi waayo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado aadimgu ma jiro qof aan qaldaniin. Ilaahcy uun baa xakiim ah. Marka waa inay qofka dib u dhac u kcenin mar haddii uu qaldamo ee uu cudur daartaa.

742. Nin Ilaah leh looma dardaar weriyo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado mar haddii uu qofku ilaahey leeyahay in aan loo dayrin oo aan la oran, waxba heli maysid ama weligaa sidan ayaad ahaan.

743. Nin ilko waaweyn hadduu dhimanayana inuu qoslayaa la modaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in ay jiri karaan dad badan oo dhawrsan oo xishoodiyo asturaad baahidooda ku qarinaya oo haddana aad u dhibaateysan. Sidaa oo kale dad aad u xanuunsan oo qarsada cudurkooda „• .oo aan calaacalim

744. Nin isfaanshay waa ri’ isnuugtay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in aanu faanku fncneyn. Waayo qofka is-ammaana waa sida ri' caanaheedii dib iyadau nuugtay oo wax qiimo ah oo ay leedahay ma jirto.

Telegram Somali Books @somali_Books

745. Nin iswaalaba waabiyaa hela.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado haddii uu dhib badati yahay oo laga harsan waayey in uu jifo qof isaga ka dhib badan oo lagu salladi karo.

746. Nin kuu digay kuma dilin

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in waxyaabaha qaarkood yihiin digniin aan raali lagaaga ahaym Marka -qofka. kuu muujiya in aanu dhaqamadaada qaarkood jcclayn waa in aad ka deysaa.

747. Nin labo jir ufuushan(139) yahay lama xanto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado dadkuu faa' iidadiisa waxa ay ka bilaabataa iyaga oo aad u yar. dhanka kale in aanay habbooneyu xanta iyo wax ka sheegga dadka........................................................................ ..................................

748. Nin madaxa ku socda iyo nin hinjo ku socda waa isku maandiimaan

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: inqolku ogaado in dadka aduunyada ku wada nool aanay isku caado iyo dhaqan ahayn. Waayo wax adiga kula quman ayaa dad kale la qaloocan. Sidaa awgeed waa in aanu dhaqankaagu yaab huwanaanin.

749. Nin qorax kugu dilay har kuguma jiido.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofku ogaado hi qofka noloshaada ku daryeeli waayey, aanu geeridaada qiimeynayn. Sidaa oo kale qofka xilli wanaagsan ku xumeeyey, xilli xun kuma wanaajinayo.

750. Nin qoyani biyo iskama dhawro.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in haddii ay dhibaato kugu dhacdo yool aad gaareysay dartii, aad dulqaad u yeelato dhibaatooyinka kale si aad hadalkaaga u gaarto.



Telegram Somali Books @som_Books

751. Nin shimbiro gaadaya waraf ma tuuro.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofku ogaadi in si aad dantaada u gaarto ay tahay in aad xasilooni iyo samirka ku dadaasho.

752. Nin soori kaa qaaday waa nin ay seefi kaa qaaday

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in qofka kaaga xishay xoolo adduun ama maal oo kugu bedeshay uu kaaga dhigan yahay qof .kaa dhintay oo kale

753. Nin tuur leh tab uu u seexdo isagaa yaqaan

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofku ogaado in dadku dhaleecooyinka iyo iimaha ay leeyihiin uu midkasta yaqaano sida uu ula noolaado, Taasoo nolosha caadiga ah socodsiisa.

Telegram Somali Books@som_Books

754. Nin waalan haddii uu qoslo nin miyir lehna waa qoslaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in ay dadka maskaxda wax uga dhiman yihiin aanay xikmadu afkooda ka inaqtayn. Sidaa awgeedna badanaa hadalkooda uu dadka caadiga ah ka qosliyo

755. Nin waalan jirey waali loogama sheekeeyo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado waxa uu dadku aqoontau leeyahay ee waayaha adduunyada ee soo maray ah in aanay uga sheekeyntoodu xiiso gaar ah u lahayn xusuus mooyee.

756. Nin aad la talisay ku tuhunsay, nin aad tuugtayna ku tanaadsay

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofku ogaado qofka aad talo wanaagsan siiso uu kugu fill karo inaad garasho ama waayo-aragnimo dheer tahay. Qofka aad wax siisana uu kugu tuhmo inaad dhaqaale leedaliay

757. Nin xumow halagu yidhaahdee nin laawow yaan lagu odhan

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu Waa: in qofku ogaado in dadkaaga inaan urursato aad haysato kan xun iyo kan wanaagsanba ay la fiican tahay in aad dadlaawe noqoto.waayo qofka xunii xitaa wheel wuu noqdaa,

758. Nin waliba intuu cunuu ciidamiyaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in qofku waxa cir ah ee uu cuno uu awoodeedu leeyahay. Waayo calool baahan waxbama qabankarto.

759. Nin wax ku siiyo waad heshaa laakiin nin wax kuu sheego ma heshid.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado marka aad u baahan tahay qof talo fiican ku siiyo ma helaysid. Laakiin marka aad u baahan tahay qof cunto ku siiyo waad helaysaa, uu u soo arko.

Telegram Somali Books @som_Books

760. Nin wayni wedkii waa yaqaan.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofku ogaado in dadka waaweyni ce adduunyo wax badan soo dliaqan ay qiyaasi karaan sida ay wax noqon doonaan, Sidaa awgeed ayaa Joo dheg raaricjyaa waxa ay ka cabanayaam

761. Nin hantidiisa ku bakhayl ah waa la arkay, laakiin nin hadalkiisa ku bakheyl ah lama arag.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado dhaqan ahaan dadka Soomaalida waxay faxal ku yihiin hadalka iyo waanada. Badanaana inuu oraah iyo hadal madal kaaga yiraahdo kuma ma suugaan,

762, Nin kaa dhashay oo aan dhaqankaaga aqoonin waxa kuu dhaama nimaan kaa dhalan laakiin dhaqankaaga yaqaan.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado xagga wada noolaanshaha iyo wax wada qabsiga in ay shisheeyuhu kaga wanaagsan yihiin sokeeyaha, Waayo xeer wanaag isdhaafsi ayaa idinka dhaxeynaya.

763. Nin weyn qawl ka dhacay waa qolof geed ka dhacday

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in aan la fududeysan waxalaballan qaado. Waayo qofka mas'uulka ah ama bulshadasharaf ku dhex leh waa in aanu hadalkiisa kanoqon. ,.................................... ■.........................................~

764. Nin weyn tag lama yiraahdee wuxuu ku tagaa la tusaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado mararka qaarkood ayaa ay ficilada xunxun amahadalo aan sariigta lahayn qofka u muujiyaan in aanay meeshaa waxba u oolim

765. Nin xasilan xafar[140] ma rido

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in fudeydka iyo degdegsiinyadu aanay wanaagsaneyn oo si yar wax kaaga xumaankaraan, JLaakiin degenaantu ay tahay

............. WaxffipaiOk ■/::.............\..... .................... .................... ..........

766. Nin yar intuu laan ka boodo ayuu talo ka boodaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado xilliga dha linyaronimadu inay tahay waqti adag oo ay qofka wax badan ka xumaadaan. Waayo fursado badan ayuu fudcyd isaga lumiyaa.

767. Nina maankiisa ma saluugo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in aanu j irin qof uu la xun yahay caqligiisa. Sidaa awgeedbaa loo baahan yahay in aragtiyada dadka oo dhan la qiimeeyo.

768. Nina tub uusan marin ma tilmaamo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in dadku ay ka warami karaan waayo-aragnimadooda. Taasina ay tahay waxyaabaha dadka taariikhdooda looga faa'iideysto.

769. Ninba ceesaantii ceel keen.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in dadku ay qqfwalibawaddodantiisa iyobaahid^sa. Whayo qofka marka uu dantiisa niaarecyo ayaa uu dadka. wax la qabtaa,

Telegram Somali Books @som_Books

770. Ninba gurigiisa gaado[141] ku leh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in dadku ay qiimo iyo a wood ku leeyihiin marka ay dalkooda hooyo joogaan, Laakiin dal shisheeye qofna sumcad kuma leh.

771. Ninba meesha buktaa isagay belbeshaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado dadkaa badan ee meelkasta yaacaya inayjirto baahi iyo dan ama tabasho qofkasta u gaar ah oo aanu kan kale ogeyn. Marka adigu ha caban ee samir oo adkeyso.

772. Ninba taagtii bay qodaxi ugu tagtaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado ganacsatadu haddii ay u timaado khasaaro laga siman yahay ay ku kala badnaaneyso sida ay u xoolo iyo maal badan yihiin.'

Telegram Somali Books @som_Books

773. Ninkaadorgi ka doonneyso awr baa la weydiistaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qolku ogaado aadamigu inay ku fiican yihiin marba haddii aad baahi wax la weydiisanevso inaad wax fiican waydiisato. Si aad wax -uun uga hesho.

774. Ninkaad sirtiisa garan waydo saaxiibkiisaa la eegaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qolku ogaado in dadka lagu qiimeeyo saaxiibada ay leeyihiin. Waayo saaxiibadu waxyaabo badan ayey dhaqan ahaan isagadhaw yihiin,

775. Ninkaad taako ka baqeyso tilaabuu kaa baqayaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in dadku aanu jirin qof aanay baqdin qalbigiisa ku jirin, Waayo qofkasta guushana wuu jecel yahay khatartana wuu ka baqaan, .• .

776. Ninkii buun xaddo meeshii uu ku yeerin lahaa ayaa la rabaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in ay j iraan waxyaabo badan oo haddii la qariyo ama l a: lunsado maalin nun la ogaan doono. Waana xaqa uu qof ama dad leeyahay*...... :............ . . . / , ........ .. ..

777. Ninkii gabadhaada ku weydiistay todobo awoow buu ku amaanay

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado dhaqan ahaan sootnaalidu waa dad ammaan iyoxarago jecel. Marka xagga guurka reerka laga tagsanayo waa: loo meel dayaa. Marka qofka gabadhaada guursada qofku ammaanay ayuu ka dhiganyahay. ....................................................................... , -

778. Ninkii hooyadii meel uga guuray habaryartii uguma negaado.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofku ogaado in naxariistu ay tahay wax iagu kala duwan yahay> Hooyada ayaa ugu mudan wax loo samofalo; Haddii hooyo ia dayacayqofkaawaxuudaryeelayomajirto-

779. Ninkii qayrkii loo xiidhayow soo qoyso adiguna

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado waxa fllkii ama jirikii xeer, xukun iyo dhibaato ku dhaca isaguna aanu ka siraad koreyn on ay ku dhacayaan; Markaana aytahay in ................ aanu keligii cabbaadin ama ...............................

780. Ninkii samra ayaa sedkii hela.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado haddii uu arriimaha adage e nolosha ee samir iyo dulqaad u yeesho q o uu joogtecyo in marka dambeuu faahidadooda heli doono.

Telegram Somali Books @som_Books

781. Ninkii seexda ayaa sacii dibi dhalaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa : in qofku ogaado haddii uu dantiisa dayaco ama mas'uuliyadiisa ka soo bixi waayo in natiijada ugu xunuu hclayo waxkasta.

782. Ninkii soo joog laga waayo soo jiifaa laga helaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado haddii xumaanta laga waaniyey uu ku joogsan waayo. Inta ay dhibaato ku dhacdo in uu la seexan doono xanuunkeeda.

783. Ninkii tiisa daryeelaa tu kalena ku dara.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in marka aad naftaada maareyso ayaad waalid, walaal iyo: ummadba wax tari kartaa. Laakiin qof cago cad oo shanta dhiganay qofna kabo ma siin kaTo.

799. Ninkii waa kuula beryo ayaa walaalkaa ah.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado inkasta oo dadku xigto iyo qaraabo kala leeyahay, haddanamuhiimadu ay tahay qofka dhibo iyo dheefba kuugu dhaw ayaa ku xiga.

Telegram Somali Books @som_Books

784. Ninna caadadiisa ma baajo bahalna ceyriin ma daayo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado si kasta oo looga waaniyo in qofka ay ku soo gadaal baxayso wixii uu dhaqan iyo caado u lahaa. Sida tuugonimada iyo balwadda. Sidaa oo kale dugaaguna hilibka cayriin wain jecel yahay.

785. Ninna korkiisa biyo kama hagrado.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in wax la'aan ama wahsi mooyee aanu qolha lagu waanineyn in uu baahidiisa maareeyo ama wax qabsado.

786. Ninyahow Hooyadaa iyo Aabahaa Iyamaa la cadaabaa? Afkaan ka kala hayaa.

Duluc:

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in mararka qaarkood ay qofka la soo gudboonaato labo waxyaabood no wada dhibaato ah ama wada muhihn ah oo markaa uu ka aamuso dhankii uu u 1eexan lahaa

787. Noole wuu joogi jirey mooyee, wuu joogi doonaa lama dhaho

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in dadku xilli iyo ajal ay leeyihiin oo dadkii beri bore j oogay aanay maanta joogin oo dhinteen. Sidaa awgeed qofna yaanu ku talo gelin in uu weligii joogo$_4$ j

Telegram Somali Books @som_Books

788. Oday arigiisa ma maalo mana mooga.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qoiku ogaado in qofka weyni siiba raggu aanay lisin adhiga ee ay lisaan g$$a iyo lo'da, Haddana waa ogyihiin adhiga neefka caanahabadan iyo kan kale, Sidaa oo kale Hooyada iyo Aaabaha hawlaha reerka iyada ob la kala leeyahay ayey haddana feka ............... warqabaan. « .......... . ...... .......................;.......................

789. Oodo dhacmeed sida ay u kala sareeyaan ayaa loo kala qaadaa.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qoiku ogaado in arrimaha sida ay u kala muhiimsan yihiin loo qabtaa. Si danaha iyo baahida ummada looga faaiideeyo.

790. Orad waayeel waa intaan la arkeyn.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado dadka waayo-araga ah iyo kuwa indheergaradka ah inay dhibaatada ka hortagaan inta aanay dhicin. Xilliga nabada iyo barwaaqada aycyna kayd dhigtaan,

791. Qaani ma qurunto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado xoolaha ama maalka ay dadku isku leeyihim in aanay xumaanin oo aanay lumin. Laakiin ay weligecd sugto qofkii lahaa. Sidaa awgecd la iska ilaaliyo in la lunsado.

792. Qabri qori saar mooyee qori ka qaad ma leh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku Ogaado in qofka nooli aanu xabaal ama qabri ahayn ee uu wax bixiyo dadkana waxtaro. Laakiin aanu noqon wax la siiyo oo aan isagu bixin.

793. Qaniinyaa qaniinyo kaa fujisa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: inqofku ogaado in sharciga iyo xisiga midna aanay diidaneyn qofka inta uu dhibaato kuu gaysto in lc'eg in aad ugu bedesho si aanu wado kaaga dhigan. Laakiin ku-s-ii xadgudubka lamaogola.

794. Qatanaan reer waa la gala qaawanaanse lama galo.

D uluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qoiku ogaado in anshaxa suuban uu ka mid yahay in dadka cawradaada laga qarsado. Laakiin baahidaada lala irkado oo lala raadsado.

Telegram Somali Books @som_Books

795. Qaybshe qad ama qaaday.

Duluc: Maahmaahdaii macnaheedu waa: in qofku ogaado in ay badanaa dhacdo qof mindida daabkeedahaya ama fandhaalka dabadiisa uu waxa uu hayo dadka wada siiyo ama uu isagu isu-roonaado. Waxaase habboon in sedbursiinyada la iska ogaado.

796. Qayl[142] dameeraad ishuu ka rar qaataa.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in qofka yari dhaqan ahaan ku daydo qoflka ka weyn ce uu arkayo. Sidaa awgeedna ay habboon tahay in waalidka iyo barayaashu ay barbaariyayaal fiican noqdaan.

Telegram Somali Books @som_Books

797. Qaylo waa cid keen.

Duluc: Maahmaahdaii macnaheedu waa: in qofku ogaado haddii ay dhibaato dhacdo in ay cabasho iyo gurmadba ay keenayso. Laakiin waxa xun in dhibaatada laqarsado.

798. Qof walba qumanihiisa ayaa qoorta ugu jira

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in aanay dadku isku aragti iyo garasho ahayrn Haddana qofkasta uu doonayo intiisu ay meel marnoqoto. Waxaa markaa dhibaatadaa looga gudbi karaa in qofkasta aragtidiis la tixgeliyo,

799. Qofba sida uu u jabo ayuu u dhutiyaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado hadba dadku sida ay tabartooda iyo dhaqaalahoodu yahay ayey u dhaqmaan oo ay u nool yihiin. Qofna iska dhigi karo wax aanu ahayn.

800. Qofka ay candhuuftaadu gaarto calaacashaada hala jirto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka ogaado in ay wanaagsan tahay in dadka wax kaa tabanaya la raali geliyo. Haddii ay dhacdo in candhuuf aad tuftay ay qof ku dhacdo, waa in aad gacantaada kaga tirtaa adiga oo ka xun.

801. Qofkii isha daba aadmigaa arka, qofkii uurka dabana Ilaahey baa arka.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; inqofku ogaado in uu khiyaanada iyo surdubaiska jixo. Waayo qofka si muuqata wax u khiyaana dadka ay arkaya. Haddii uu si hoose u kliiyaanana ilaahey ayaa ka abaalmarinaya.

Telegram Somali Books @som_Books

802. Qooq majabee ninkiisaajaba

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado kibirku in uu qofku meel xun ka rido. Sidaa awgecd ay habboon tahay in jslaweynimka iyo isqaadqaadka laga fogaado si aanu qofku labta iyo niyadda uga jebin.

803. Qoryo qaadistooda isku duwis baa horreysa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: inqofku ogaado in ay hawluhu kala horeeyaan. Waayo haddii aad carruur dooneyso waxa ka horeeya inaad guursato, Sida marka aad xaabo ama qoryo gurato ay tahay inaad isku toosiso si aad si fiidud ugu qaadi karto.................................. ...................... .................

804. Qori iyo qiiqiisa waa la isla tuuraa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in ay tahay in la iska fogeeyo qofka iyo dhibaatada uu wado labadaba. Sida dabka la shito qoriga qiiqa badan bannaanka loogu tuuro.

805. Qorina qiiqiisuu uraa qofiia qawlkisuu hadlaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in sida qori kasta geedka laga soo gooyey urtiisa uu u lccyahay. Dadkuna sida ay u kala asluub wanaagsan yihiixi ayey u kala hadal ffican yihiin.

806. Qosol badan qoonsimaad buu leeyahay.

Duiuc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofku ogaadoin qosolka badan iyo aaniuska badan labaduba ay keenaan in qofka laga shakiyo daacadnimadiisa. Sidaa awgeedna ay habboon tahay in uu kala gartdmarka ay habboontahay inla qoslo iyo in la aamuso.

Telegram Somali Books @som_Books

807. Qosolba hiilo waa gala

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in garabsiinka qof kale aanay macnaheedu ahayn in dagaal iyo dood aad la garab istaagto. Laakiin mararka qaarkood ayaa wax yar uu hiilo iyo qoonsimaad keeni karaa.

808. Qoysataye yaa kuu xiidhi

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofku ogaado in.had.dii aan ammaha qaarkood qofka lala wadin uusan lib ka gaari Karin. Sidaa awgeedna ay wranaagsan tahay in baahiyaha dadka ay quseyso lala kaashado.

809. Qufac iyo jaceyl midna ma qarsoomo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in aan la qarin Karin qofka xanuunsan ee qufacaya iyo qofka uu kalgacal hayo iyo weliba qofka oo doonayo. Waayo labadaba si fudud ayaa loo ogaan karaa.

810. Qufac iyo uur midna ma qarsoomo

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: inqofku ogaado in labadan waxyaabood ee la sheegay midna cudurla muuqdo midna ceeb la muuqdo. Qofka buka ee qaaxo qabo rifraxyo ayaa lagu ogaadaa. Gabadha ay ilmo caloosheedu galena haba qarisee waa la ogaan.

811. Qun yar socde qodaxi ma muddo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado qofka aan socodka iyo go'aankaba ku degdegin ee ka fiirsada in aanay dhibaato ku dhaceynama aanu shaleygiisabadnaaneyn.

812. Qur'aankii alif ka xumaado albaqro kama tooso

Telegram Somali Books @som_Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: inqofku ogaado waxkasta in ay habboon tahay in aasaaska iyo bilowga laga toosiyo oo adkeeyo. Waayo dhismaha, barbaarinta iyo barashaduba hadday seeska ka Xumaadaan weligood ma toosaan.

813. Quraanjo ururtay Mulac waa jiidaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: inqofku ogaado in iskaashigu uu faa'iidooyin badan leeyahay. Halka ay quraanjada yaryar haddii ay ururto ay amuur ku qaadi karto. Dadka oo isku tegay maxaad moodey.

814. Quud aan j irin u qoryo guro.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku aanu qofku sliinsan ama tirade ku darsan wax aanu faraha ku haynin. Waxa kuu xaasil ah waa waxa aad gacanta ku haysato.

815. Rabi, rag iyo geelba waa la tuugaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in ilaahey waaxidnimo lagubaryo, Raganasinnaan laguladhaqmo. Geelana xannaano iyo daryeel ayaa wax looga helaa.

816. Raad arooryo dib looma raaco.

Dultic: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in ay wanaagsan tahay cafiska iyo saamaxaada. lyada oo dhibaatooyinka dhaca indhaha laga laliyo oo aan dib loo baarin.

817. Rag aamusay iyo riyo aamusay labaduba reerkoodii gabe

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofkuogaado in ay wanaagsan tahay in qoysaska lagu dhaqo xog wareysi iyo sheeko. Riyuhuna ku bataan marka uu orgigoodu qooqan yahay markasta ee uu qqobaadayo.

Telegram Somali Books @som_Books

818. Rag ba' iis buu ka sheekeyaa dumarna badhaadhahooda.

Dulac: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado sida dhaqarika aoomaalidu yahay dabeecad ahaan marka ay taariikheynayaan ay qaadguna soo qaataan dhibaatooyinkii ay soo mareen. Si waayo aragnimo loogu qiro. Dumarkana soo qaataan maalmahoodii farxadda lahaa si aan dhibta loogu caayin.

819. Rag ciil cadaab buu ka doortay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in haddii dadka la ciilo oo xaqooda la qaato ay gaarayaan go'aan ah ............... inay aargutaan xitaa haddii ay dembi aakliirokugelayaan.

820. Rag dareen moog iyo riyo didmo moogba waa loo yaabaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in ay habboon tahay in dadku feejignaadaan oo ay diyaar u ahaadaan dhibaato hadday dhacdo, si aanay u argagixin oo aanay gurmad deg deg ah ugu sameyn waayin. Riyuhuna marka ay bahal arkaan waa inay cararaan.

## 821. Rag gogoshii waa godob la' aan

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado ill dadku waxa ay ku seexdaan ay ugu wanaagsantahay iyaga oo aan qofna waxdhibaato ah u gaysan oo dakane qabin. Waayo taasi qofka waxay ka dhigcysaa dembi la[5] aan.

## 822. Rag is galay kala galad la'

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in mar haddii ay dadku isqabtaan oo ay xumaani dhexmarto ay adag tahay in ay is-ammaanaan ama ay wanaagsan iska sheegaan. In yar oo wax saamaxda oo dab eecad wanaagsan mooyee> ................................................ >. ...

## 823. Raggu xeerka waa wada yaqaan laakiin xeel ayuu isku dhaafay

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in dadka oo dhami garanayaan waxa daw iyo share* ah isku meelna ay ka taagan yiliiin. laakiin meesha ay ku kala hormareen ay tahay qorshe iyo farsamo.

## 824. Rag muraad li'i meel waa u maraa muraadli'i se meel um fadhiyo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in waxyaabaha lagu hodmo ay ka mid tahay socodka iyo dadaalka. S idaa a wgeed iska so co dhib ma leh, laakiin i ska fadhi aan dank u jirin ayaa dhib leh. J

## 825. Rag qabri iyo qawl baa ka hara.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in dadka inta uu nool yahay laga reebo hadalka runta iyo danta ah ee ay ummaddu marar badanku badbaaday. Marka uu dhintana waxaa sii muuqda oo ka hara xabaashii lagu duugay.

Telegram Somali Books @som_Books

826. Rag talo kama dhamaato.

Duluc: Maahmaahdan. macnaheedu waa: in qofku ogaado inay taladu badantahay, dhinacyo badana leedahay. Markaana nolosha aan laga niyad jabin eekolba si lagu dayo.

827. Rag waa raggii hore hadalna waa intuu yidhi.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in dadkii hore ay ummadda uga tageen dhaxal iyo murti dhinacyada nolosha oo dhan ka hadleysa. Jyada oo ay taasi jirto haddana dadkan datnbe hadal iyo hawraartoodu way leeyihiin.

828. Rag wax yar tare mooyee wax ma tare ma leh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in dadku si kasta oo loo masuugo xooggiisa iyo waxtarkiisa, haddana uu meet uun ka soo baxo. Sidaa awgeedna ay muhirm tahay in dadka la unriyo.

829. Rag talaa u roon rahna roob iyo rays

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in taladu tahay waxa uu dadka u wanaagsan ee ku meel maro. Halka uu rahu ka dhiman waayo reyska iyo roobka.

830. Ragga ammaanta waa uga dartaa dumama xeradda ayey ka saartaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in ay ammaantu marka ay run tahayna wax dhiirigeliso, Marka ay been tahayna ay hoddo qo'fka. Halkan waxa la diidan yahay waa ammaanta iyo faanka beenta ah ee qofka dano looga ............ fiishanayp>..................■ ..........'.... •........• ........ ....•.... '.... i

Telegram Somali Books @som_Books

**83 1.** Ragow barasho geelow rarasho.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado indadku yahay waxa lagu qiimeeyo barashada. Geeluna yahay waxa lagu ogaago adkeysigiisa in la gaadildsado. Qofkana waxa aad miisaan saari kartaa ama faalo ka bixin kartaa marka aad barato

832. Raqba waa ku raggeed.

Duluc:: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in meesha aad joogto aad adigu xilligaa wixii ka dhaca aad mas'uul katahay. Taladeedana aad wax ku leedahay ee aadan la sugeyn qof maqan.

833. Reer ba'ow yaa ku leh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in oraahdan loo soo qaato in marka laga dardaarwerinayo dhibaato bulsho ama beel ku dhaeday la yiraahdo reerkanow qofna kuma leh oo dad ayaad u baahan tahay.

**834.** Reer rag leeyahay sidan roob ma u galaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in mararka qaarkood dayac dartii ay dadkuhawlo badanuga lumaan ama dhibaato ay ku dhacdo. Sida in xilliga roobka daadka guryaha laga moosi waayo,

835. Reerkaan doonayey roob ma igu eryay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku uumararka qaarkood sabab u fududeysa uu u heli karo arrin uu doonayey in uu sameeyo, Taas oo loo baahan yahay in uu ka faa'iideysto,

Telegram Somali Books @som_Books

836. Ridii malageeda galay madax shabeel bay leeftaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in marka ay dhibaato ku dhaceyso uu faraha lagalo arrimo ay khatar ka imaan karto. Sida ay ridaba ugu dhiirato inay shabeelkii dilk col moodi waydo.

837. Riyo haday dub[143] leeyihiin dabadooda ayey ku qarsan Iahaayeen

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaato in ay tahay in uit ceebihiisa iyo dhaliishiisa ku qariyo waxa uu hasto oo hanta iyo dabeecad xvanaagsan ah. Laakiin aanu noqon sida riyaha iyaga oo scyn leh, haddana dabadooda ay bannaan tahay.

**838.** Riyo lugtooda ayey shallow ku doontaan

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in mararka qaarkood ay dadku afkooda iyo addinkooda belaayo ku soo jiitaan. Sida ay riyuhudaaq iyo caws u raadinayaan meel buur ah uga dhacaan., .................... ..............

839. Run iyo been kala raad leh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in ay runtu leedahay raad iyo jid muuqda Oo la raaco. Halka aanay beentu lahayn raad iyo waxmuuqda oo la taaban karo.

**840.** Run iyo ilkaba waa la caddeeyaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu w'aa: in qofku ogaado in ilkaha lagu caddecyo cadday si looga tiro ligiska iyo huurada. Sidaa oo kale ayaa runtana shaaca looga qaadaa madmadowga hadalka ku jiro,

Telegram Somali Books @som_Books

841. Run iyo roobba lagama reysto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in sida roobka aan looga maarmi Karin, runtuna ay tahay wax sidaa loogu baalian yahay. Waayo si kasta oo uu qofku isu doqon diidsiiyo, waa kii marka dambe ku soo dhaca runta.

842. Runta ragga way ka waxse ma yeesho.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in runtu ay tahay daawo ama xal. Qofka runta loo sheegana ama lagu caddeeyana yaxyaxa here mooyee marka dambe ay xasiloone u keento, .

845. Runtu ma fantaa'[144]'

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qoiku ogaado in aanay runtu ahayn sida cudurka fantada la yiraahdo ee qofka jidhkiisa caddeeya oo googooya. Laaki'in ay tahay wax qofka ka nixiya oo aan waxba u dhimin.......................................

846.Ruqo ninkii lahaa senya kaga taagan yahay ma kacdo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku marka uu arrintiisa isaga dibindaabyeynayo aanay dadka kale waxba ka qaban Karimwaayo neefka caatada ah marka la doonayo in la taagccro oo la kiciyo haddii qofkii lahaa hagranayo kicinteeda looma taghclo.

S47. Ruux aan sal lahayn sedkii laalan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in saldhigu ama degaanku muihiim nolosha u yahay. Qofka marka meel loogu soo haggaago uu leeyahay bulshada qorshe ayuu ku leeyahay. Dadkuna martina waa leeyahay manfacana waa leeyahay.

Telegram Somali Books @som_Books

848. Saantii dooraa sari[145] ka hartaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado waxa weyn ama badan ayaa haddii ay wax ka khasaaraan. Wax ka soo haraan. Waayo saantu waa maqaarka la gogladu, marka ay weyn tahay ayaa siyaabo kale oo badan looga faa'iidcysan karaan.

849. Saaxiibkaa kuu sabab ahaa ama kuu sahan ahaa.

Dul uc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka saaxiibkaa ah wanaag kuu horseedi karo, kuuna hoggaamin karo, ,mmararka qaarkood xumaaniyo mahlako kugu ridi karo. Marka saaxiibku waa seef labo afleh

Telegram Somali Books @som_Books

850. Sadaqadireermabi'iso.

Duluc: Maahmaahdan niacnaheedu waa: in qofku ogaado in wax bixintu ay xoolaha ku batаan ama bedelkeeda Uaahey qofka siiyo. Weliba waxa la ogaaday in inta uu qofku bixiyo toban laabkeed uu holo.

851. S adaqo so or ma yarey so.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in wax bixintu ay tahay samofal nooca ugu wanaagsan ee uu ilaaheyna xoolaha ku badiyo. Dadkuna qalbigooda lagu soo dunto.

852. S adar muuqda su' aal ka dhan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku aanuiskuhawlin in waxiska muuqda oo dadka oo dhami wada fahmayaan uu sii qodqodo si uu wax dheeraad ah uga ogaado. Haddii aanay shaqadiisa ahayn.

853. Safar waa si wada yeel.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in ay maslaxada ummadu ku jirto in ay isku dan iyo af ahaadaan.sida safarkuba ay ugu wanaagsan tahay in qof keliya u hadlo ama ay isku af unoqdaan si aan looga shakin.

854. Safarow saantaada horey sahaydaada dib.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay habboon tahay in qofka uu markasta waxa uu haysto nu dhaqaaleysto. Shaqada iyo dadaalkana uu badiyo.

855. Safarow waxna gado waxna garo.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku uu wanaajiyo xiriirkiisa nolosha bulshada kala dhaxeeya oo isagana uu faa'iido dadka kalena uu ribixa wax uga ogolaado,

856. Sagaaradii badda ku kaadisay naceeday warisay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku aanu isku dayin in uu ceebeeyo ama iin u yeelo wax dad badan ka dhaxeeya oo aanu hadana saameyn weyn aanukulahayn.

857. Sagaaro iyo tuuryo inyar baa la isla helaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofku aanu mama dadaalkiisa hakiftinkasta oo mararka qaarkood ay fursado badan oo uu fishay ay ka lumaan ama turanturooyin uu la kulmo.

Telegram Somali Books @som_Books

858. Sagaaro labo tun oo la kala qalo maleh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay dhaqaale ahaan ama qorshe ahaan habboon tahay in cuudka ama calafka yar aan la kala biiqbiiqin ee meet keliya waxa looga qabto,

859. Sagaaro saalo la arkayo ayey aastaa,

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in mararka qaarkood ay dhacdo in qof uu isku dayo in uu qariyo wax iska muuqda ee la arki karo ama la fahmi karo.

860. Sac baa dab dhalay, haddii uu leefana wuu ku gubanayaa, haddii uu ka tegi lahaana waa ilmihiisii

Telegram Somali Books @som Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in ay jiraan waxyaabo badan oo aanu qofku huri Karin si kasta oo ay ugu xumaadaan. Qas-abna ay ku tahay in siday tahay u ula dhaqmo.

861. Sal laguma fadhiyee sed baa lagu fadhiyaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu w'aa: in qofku ogaado-in waxa lagu negi yahay ay tahay raashin iyo hanta la tabcaday oo aan la'aantood suurto gal ahayn in ay xasilooni nayadeed ay jirto.

862. Salaad nin qaleeyey sidaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado mar haddii uu qofku hawlaha qaarkood ama mas'uuliyaddaha uu sagsaago waxa iska cad in uu dayacay oo ay baylah tahay. Sida Salaaduba qofka isku dara uu uga taga.

863. Salaad sida ay kuu qabato ayaa loo tukadaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado fa kolba fata ay tabartaada iyo taagtaada dhan, tahay ayaa la maamusbaa oo la -socdaa. Waayo dantu waa lagama boodaan.

864. Sal iyo dhul isma huraan

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: fa qofku ogaado in ay jiraan waxyaabo badan no lagamamaarmaan ah sida qofka iyo dantiisa, qofka iyo dhulkiisa iyo qofka iyo dadkiisa. Si kasta oo uu qofkaa isu doqon diidsliyo marka dambe iyagaa ayaa lama huraan ah,

865. Saluuge sedkiisa waa la cunaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: .in qofku dhaqan ka dhigto in aanu damac badnaanin ee waxa yar ee uu helo uu fcu qaneo ee aanu isdhaafin w'axa yar ee uu qayb ahaan u hefa

866. Saxaro qori dheer baa la isaga tiraa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in waxa xun ay habboon tahay in laga fogaado ama la isaga fogeeyo wax al 1 e wixii kaa fogeyn kara..

867. Saxaro waxaa fogeeya qof og in waa baryayo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: fa uu qofku ka fogaado waxyaabaha ay marka dambe kaga imaan karto ceeb iyo dheg xumo wax u dhinta sharaftiisa.

868. Shaki yaqiin baa looga baxaa.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: fa qofku ogaado in ay habboon tahay waxyaabaha aad kashakiso fata aad welwel ugujiri lahayd aad uga baxdo. waxa aad hubto ee aanu ,,madmadow kaaga jirim

Telegram Somali Books @som_Books

869. Shalaad dhalataye waa la shubi jirey.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in qofka kasta wcyniu ama waayo aragnimo istaawiya oo jiro qof kale oo ka cimri dheer oo waayo soo jireen all.

870. Shan habeen sheekh laguma noqdo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in cilmigu u baahan yahay waqti dheer iyo dadaat si qofku si dhab ah ugu barto cilmiga laamihiisa kala duwan,.

871. Shaqeystaa waa dhergaa, shaxaadaa waa qadaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu \yaa: in qofku ka fogaado baryda jyo shaxaadka ee uu xoogiisa isku haleeyo kuna noolaado.

872. Sharku yaryareysi ma leh.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in qoflcu noqdo mid feej igan oo waxyaabaha yar yar ee xumaanta ah aan saldan ee markiiba wax ka qabta.

873. Shimbir duul duul badan madax shabeel bay ku degtaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka fudud eekolba meel arrimaha kula dhaca, Kaas oo marka dambe meel xun ku dambeeya.

874. Shimbir maalin bay dab qaaday maalintiina buulkii hoyadeed bay gubtay

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku aanu noqon sida shimbirtaa oo kale inta uu maalin wax amaamudo uusan dadkiisa iyo dalkiisakuwaxycelayn.

Telegram Somali Books @som_Books

875. Shisheeye shiilo dux ma leh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in dadka shishceyaha ah aanay lahayn waxtar qofka u lahayn dadka muta ee nieelo kale uga yimid.

876. Si xun wax u sheeg sixir waa ka daran yahay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka hadalka sheegidiisa xumeeya ee si jareexo leh ubcdela waxa uu la mid yahay qof sixir wax ku bedela.

877. Sidaad doonto hadaad waydo sidaad ka badin waydo ayaa la yeelaa.

Telegram Somali Books @som_Books

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado inay dantu tahay wax adag oo aan la dhaafi Karin. Sidaa awgeedna sida aad jeceshahay haddii la waayo halka ay dantu kula dhaafi wayday ayaa la iimaasadaa.

878. Sarar adhi ninkii xumaanteeda raba hoosta ayuu ka eegaa, ninka wanaageeda rabana dusha.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay habboon tahay in qofku arrimaha uu ka eego dhinaca wanaagsan ee aanu baarbaarin xumaanta iyo meelaha ay iinta ku lecdahay.

r

879. Sidee xeego ku xagantaa ilkana ku nabad galaan.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in mararka qaarkood waxyaabo badan la xeeriyo oo iyada oo hawlaha la furlinayo haddana dadka loo turo..

880. Sinji[146] waa ma guraan koluu suulka kaa galo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofka aanu weligii halka uu ka soo jeedo dhalasho ahaan ka hareyn. Si kasta oo uu iskudayoindhalashadiisauuuqariyo.

881. Sir ma qabe allaa u sahan ah.

Duluc: Maahmaahdan macnahcedu waa: in qofka xalaasha ah ee , daacadda ah ilaahcy ayaa arrimihiisa hagaaj iya.

882. Sir ma qabe saab[,47] baa biyo u cesha

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in qofka daacadda ah ee aan sir iyo khiyaanada lahayn aanay waxba ka xumaan. Xitaa haddii uu meel uukursjo xunyahay waxgeliyo.

883. Sir Naageed lama sal gaaro.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; indumarka ayxeelada ahaan ka farsamo badan yihiin raga. Qofka isku daya in uu xogfa dumara ogaadana gunteeda ma gaaro.

884. Sirow ma hodmo saqaawana ma deego [148]‘

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in aanu mama liibaaneyn qofka surdubada badan. Qofka deeqsiga ahna weligii ma faqriyo oo Ilaahcy baa u barakecya.

885. Sisin daadatay sideedii laguma helo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in haddii ay dhibaato dad ama meel ku dhacdo ee ay dib u soo kabtaan inay mama sideedii bore noqoneyn, .

Telegram Somali Books @som_Books

886. Soddoggaa hal geela waa looga tagaa hal geedse loogama tago.

Duluc: Maahmaahdan macnahcedu waa: in qoflca aad xilka i sku leedihiin sida dadka aad xididka tihlin xoolo haday idin dhex maraan looga tago. Laakiin Iiadday gar idin dhex marto inaad codkaaga la baxdo.

887. Soohdinjir-jirka ayaa laga dayaa.

Duluc: Maahmaahdan macnahcedu waa: in marka la doonayo in labo qof oo becrny ah muran xagga soohdinta ah waxa laga raadiyaa mecsha ay beertu ku dhammaato.:

888. Soomaali was waa sheegtaa beense ma maahmaahdo.

Dukic: Maahmaahdan macnahcedu waa: in dadka soomaahyeed dhaqan ahaan ay marka ay murti abuurayaan aanay been shecgin ee ay run iyo biyo kama dhibcaan ku saleeeyaan.

889. Soor quureed waa la qaataa hadal quureedse lama qaato.

Duluc: Maahmaahdan macnahcedu waa; in qofku isaga oo eegaya sharaftiisa lyo sumcadiisa ay habboon tahay in waxyaabaha qaarkood oo iska ilaaliyo. Sida in uu ka raali noqdo hadal liita oo yasmo ah ama sharaf dil ah.............

890. Soori cun iyo cun bay ku macaan tahay.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in waxkasta oo la wadaagayo ay ku wanaagsan yihiin in la isu-quuro oo qofba kan kale uu u hibceyo. Sidaa ayey barako iyo jaceyl ku leedahay. ,'..........................................................................,

Telegram Somali Books @som_Books

891. Subag weel ku daatay sina uma xumaado.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in arrimaha qaarkood ama dhaqaalaha qaarkii haddii qoflaga qaado oo qof kale oo isla qoyskii ah loo dliiibo ay noqoneyso in ay. dadku isku mid y ihiin oo aanay waxba xumaaneyn.

892. Suul faro kuma tirsana.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay mararka qaarkood dhacdo in beelo meel degen meel kale ay jecs deg ay tahayama qoys wada nool uu qof ka mid ah ka qorshe duwan yahay.

893. Tagto dhaaf oo timaado qabo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: inqofkuwaqtigiisaka faa'iideysto, hadba saacadda taagan. Isla markaanaaanu tagto u shalaayin ee waqtiga soo socda uu qorshe u sameysto.

894. Talo adaa ku noole iyadu kuguma noola.

**Duluc:** Maahmaahdan macnaheedu waa: inqoikuogaado in talada wanaagsan ee lain wadaago dadka caqliga lch ay tahay midda nolosha flican horsecda.

895. Talo isumakaa sheegto.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay mararka qaarkood haddii aanu qolku caqli fiiqan lahayn ay talada ka dhuumato. sidaa awgeed uu ka feejignaado talo wareer.

Telegram Somali Books @som_Books

896. Talo keen ahow ama talo raac ahow

DiiIuc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku dadka iyo bulshada uu la nool yahay aanu ku noqon macangeg ee uu taladii fiican ee la keeno qaataa ama isagu uu talo wanaagsan kcenaa.

897. Talo mar kuu toostay ilmaha tagoogtay anfaedaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qolku ka baraan dego arrimaha waxtarka ah. Ka dib si degdeg ah ugu dhaqaaqo folintooda. Waayo arrin hal mar kuu hagaagtay ayaa mustaqbal fiican horseeda.

898. Talo nina kuma filna labana ku heshiin weyday

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: inqoyska ama bulshada meel ku wada nool ay talo ay isku raacsan yihiin oo wanaagsan meel isla dhigtaan qof keligiina ma keen! karo labana way kala jiitaan

Telegram Somali Books @som_Books

899. Talo waa kugu bariday iyo kugu soo booday.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in ay talada iyo fikradaha noloshu ay yihiin qaar aad habeenkii la seexatay iyo qaar si kedis ah kuugu dhashay. Marka qofku waa inuu isbedel diyaar u ahaadaa.

900. Talo walaal diide turunturo ma waayo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka talada ay siiyaan dadka jecel sida walaalahii iyo qaraabadiisa ku gacan sayra ee tiisa ka wata uu la kulmo dhibaatooyin badan.

901. Talo xumo tol ma badiyo

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: to qotka talada xun uu beesha uu ka dhashay talo xumadiisa ku kala eryo< Ama uu

902. Timir laf baa ku iirta.

**Duluc** : Maahmaabdan macnaheedu waazin mararka qaarkood aan arrimahaJagudegdegto. Waayo waxa jira arrimo sida ay laansi aan; oo ka fiirsi bad'an u baahan.

903. Todobada Cadaabood iyo Talo Qoorcase[149] ayaa la simay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in a y talada loo taliyo ama ay taliyaan dadka dhalinyarada ah sida ay ku hirgashaa ama fuitote.edu ay adag tahay. Sida ay cadaabuhu u kala damn yiluin oo kale,

904.

905. Togba taagtii buu rogmadaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: indadkuaanayiskuawood ahayn xagga dhaqaalaha. Marks ay wax bixin timaado ayuu qoikasta waxa uu bixiyaa karaankiisa.

906. Tol la’aani waa tows.

Duluc; Maahmsahdan macnaheedu waa; qofekeligii ah ee aan walaalo iyo qaraabo dhawmidnalahaynay tahay arrto sida ................cudurkaoQkaIabeerkaugadhegan<

907. Tuhun waa sed.

Duluc; Maahmaahdati macnaheedu waa:toqofka weyni mee$ha uu isyiraahda wax baadka soo heli ama muraadkaaga ayaa kaaga qumi Kara, waxa ay u badan tahay in ay taasi laabta u ........qaboojiso,.......................................... .

Telegram Somali Books @som_Books

908. Tukulish tiniir gaari waayey kharaaraa buu yiraahdaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in haddii qofku arrin qof kale helay uu calafka it si in waayo uu xaasidnimo darteed uu dhaleeceeyo wixii qofka kale uu helay

909. Tuug la qabtay taag ma leh.

Du lucs Maahmaahdan macnaheedu waa: inmarka qofka caado ka dliigtay in uu wax xado maalin uunlagu qabto isagaoo ku dhex jira tuugnimadii uu miskiin ceebeysan yahay.

910. Tuugmo aadane tuur bay kuu yeeshaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku xoogsado oo uu ka fogaado in uudadka baryo. Waayo taasi waxa ay u sameyn kartaa tilmaan fool xun oo ah inuu weji ka waayo bulshada dhexdeeda..

Telegram Somali Books@som_Books

911. Tuugo kul a taal tabtaa ma weydo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qolka kula noolama deriska kula ah ee xaalkaaga hoos ahaan uoguusi fudud kuu wax yeclavn karo,

912. U1 dameer ku dhacday aakhiray ku sugtaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka uu iska ilaaliyo dulmigaiyo dembiyada aakhiro iyo adduunba la soconaya __________eeaankahareynlaonacjqaabayo,

913. U1 jiiftaa majabo.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waaun qofka marka uu feejigan yahay ama uu haysto gabaad iyo taageere difaac aanay dhibaatada six un wax u yeeli Katin,

914. U1 waa qabowdaa erey xumise ma qaboobo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ereyga xunuuwaqti badan qofka niyadiisa iyo dhegahiisa ka soo guuxo. Laakiin usha qofka lagu dhuftaa ay maalmo kaga qaboobj karto*

915. Uur doqoneed habeenkii buu mirtaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka aan caqliga badan lahayn uu maalintii oo dhan waxa uu ka gaabiyo ama uu xumeeyo qoomamadooda uu habeenkii oo dhan ka fekcro oo ku dhafro.

916. Umuliso iyo odayba sida ay wax u ogyihiin uma sheegaan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay labadan qof ee bulshada meelo waxqabad oo dhab ah ugu jira ay markasta qariyaan siraha iyo dhaliilaha ay dadka kala kulmaan.

917. Ushaada nimaad ka qaadan karto ayaa loo dhiibtaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku ogaado in aaminaadda dadka ay kala duwan tahay iyo daacadnimadooda. Sidaa awgeed qofka aad xoolahaaga ku aamineyso waa in aad u fiirsataa.

918. Uur jiif habartii ku gawracan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay jiraan dad badan oo isku dan ah« Kuwaas oo aan kala qaadidoodu ay dhibaato uga iman karto. Sidaa oo kalena isku xukun iyo qorshe ah.

Telegram Somali Books @som_Books

919. Waad baahan tahay baqti looma cuno.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waar jn qoflcu ogaado in waxyaabaha qaarkood laga adkeysto oo aanan loogu dhicin dank u haysa iyo baahi. Waayo sharafta ayaa wax walba ka weyn .

920. Waad duunyo yar tahayna deeq loogama haro.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay habboon tahay in qofka uu had iyo j eer ka qayb qaato waxyabaaha samofalka ah ee ay bulshadu wadaagto. Si kasta haddii uu u xoolo yar yahay,

921. Wada hadlaaba heshiiye.

Telegram Somali Books @som_Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa:in ay dhab tahay siyaabaha lagu xaliyo khilaafka in ay ugu muhiimsan tahayinla wada hadlo. Markala wada hadlo waxa ay u badan tahay in la heshiiyo..

922. Waan baahanahay baqti looma cuno

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa* inqofkumarkastailaaliyo sharaftiisa iyo magaciisa ee aatiu u xaaraan cunin dan iyo duruuf ayaa I haysa.

923. Waano abuuris baa ka horeysay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: In qofka si kasta oo loo waaniyo ama looga digo dhibaatooyin uu faraha kula jiro ay ka weyn tahay dhaqankii iyo baxaaligii llaahey u abuutay.

924. Waarimeyside war hakaa haro.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku inta uu nooi yahay ku dadaalo in uu ummadda magac iyo maamuus kaga tago iyo wax dadka ka dambeeya ay u aayaam..................................

925. Waayeel afkaaga fur ilkahaaga aan tiriye lama yidhaahdo.

Duluc: Maahmaahdanmacnaheedu waadn qofka wopi aan animihiisa la six raacraacin ee inta uu ka Ogol yahay in laga ogaado ladu daayo.

926. Waayeel hadalka waa loo saraa ee looma saafo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka waayo aragga ah aanu u baahneyn in hadal badan waxa la doonayo loogu sharxo. Laakiin uu u baahan yahay oo keliya in sidaay wax yihiin loo taabto.

927. Waayeel tag lama yidhaahdee wuxuu ku tagaa la tusaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka caaqilka ah aan lagu eryin erey iyo qaylo.Iaakiin uu ku tegi karo falal aan u qalmin oo lagu sameeyo,

928. Waayeel talo waayey wuxuu leeyahay Barbaar tabar waayey.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waaiin qofka waayeelka ah oo talo fiican laga. waayey ama talada dhaxalgalka ah hirgelin waayey ay mustaqabalka keento dhalinyaro waxqaban

.......■.... wayday>.................•........... ............ ...........…. ........ ......j

Telegram Somali Books @som Books

929. Waayeel waa annagoon is yeelyeelin.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa:in qofkasta ay noloshu hagaajinteeda xil ka saran yahay, Waayeelnitnaduna ay tahay dadka oo si akliyaarnimo kh waxkasta u daryeela> ,

930. Waayeel xanuunsaday xil magarto.

Duluc? Maahmaahdan macnaheedu waa: in qoika wayni marka uu caroodo laga yaabec may ka yimaadaan wax aan laga fileyn oohadalxunahamanabarah. ....................................................

931. Wadiiqada yari wadiiqada weyni ayey kugu ridaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka uu balwada iyo dhaqan xumada si tartiib ah uuku bilaabo> marka dambena uu si ballaaran u dhexgalo<.......................................................

932. Wan weyn jeer la gawraco indhihiisu cirka ma arkaan

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu wamin dadka qaarkood ilaa run la tusoaanay si fiican xaqa iyo baadilka u kala saari Karin.mararka qaarkoodna waxa caalamka ka dhacaya aanay ogaan Karin .

933. Waney adhi ninkii weydiinteeda kugu dhiba wadisteedaa lagu dhibaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka arrin baryadeed kugu dhiba, marka dambe waxa lagu canaantaa isla arrmtii oo uu ka meel keen! waayey..;

934. Waqti kaa tegay looma taag helo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waaiin qoiku ka faahideysto waqtiga uu haysto inta uu cusub yahay. Si aanu hadhow uga shalaayin marka uu dhaafo.

Telegram Somali Books @som_Books

935. War la helaaba talo la hel

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in marka waagu beryo ee ay dadku afarta jiho iska wareystaan ayey ka tashan karaan wixii dhibaatooyin ama arrimo ah ee jira.

936. War la qabaa xiiso ma leh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa:in warku xiisihiisa ay ku xiran tahay ogaansha la'aantii, ee aanay kellya ahayn sida uu war cuius u yahay.

937. War la' aan baa col hoday.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: intabadan xeeladaha dagaalka waxaa ka mid ah in la qariyo xogta duulaanka iyo sirta ciidarika. Markaa ayuu ku dagmaa ciidanka kale.

938. War sal baa looga dhergaa biyana sacab.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka doonaya in si degen loogu warramo ay tahay in uu la fariisto warka. biyaha dhulka ku jira cabidoodana gacmahaaga ayaadkaga oon bixi kartaa.

939. War xun dugsi ma fadhiyo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in warka dhiilada leh ama ceebta ah uu ka socod badan yahay kan kale. Sababta oo ah dadka jecel fidinta wararka noocaas ah ayuu dhul badan ku garaa.

940. Waraabaha aamusan iyo kan ciyo yaa daran

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka cabashada iyo hadalka badan ee waxkasta sheega uu ka wanaagsan yahay qofka aamusan ee cuqdadlowga ah.waayo kan hore waad ka digtooni qabtaa waxa uu kuu qabodaakiin kan dambe maya.

Telegram Somali Books @som_Books

941. Waraabe dhankii loo eryaaba waa u cid.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in uu jiro dadka qaar oo dhinaca ay doonaan u dabaasha oo aan xumaan iyo xaaraan midna shaqo ku lahayn.

942. Waraabe la tegis bartay ka dhigis waa ku ceeb.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka markasta u bartay in aanu waxba hambeyn ee wax kasta uu keligii isku jaangooyo. Marka dambe co la isku dayo in la xakameeyo wuu ka gilgishaa. ,

943. Waraabe Leg hay ama lug hay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka damaeaiyo hunguri weyn marka wax la wadaagayo mania ma qado ee dheeraad ayuu raadiyaa,

944. Waran kugu soo noqon doona lama rido(,50)

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku aanu ganin hadal iyo nabar marka dambe cabashadooda ay ku soo noqon doonto. Kaas oo lagayaabo in kiisii uu kaweynaado.

945. Wareer cawo waa loo waabariistaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa:in xalkeedu uu sahlanaanayo haddii dareen ama dhibaato la soo sheego goor habeen ah oo ilcawo ah in maalinta loo dhigto. Si dad badan oo ka qayb gala loo help,

946. Wax badso wax beel bay leedahay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qoika hunguriga iyo damaca badan ee waxkasta keligii isla doonaya in marka dambe ay hungo u dambeyso.

Telegram Somali Books @som_Books

947. Wax indho arkaan baa ilko gooyaan.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in waxa muuqda ee la arM karo ay y ihiin waxa ammahooda la gorfeyn karo 00 wax laga qaban kanu

948. Wax isweydiini ma xumee wax iswaydaarsi baa aran

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; in dhaqanka wanaagsanos dadkanabadda jecel uu yahay in waxa jira 00 dhibaato ah wax la iska weydiiyo. Laakiin aan xumaan la is dhaafsan.

949. Waxkastaba waa tagaan runta uunbaa soo hadha

Telegram SomaliBooks @som_Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in xaqa iyo runta ay labaduba yiliiin waxa ugu dambeeya ee goobta u hara. Marka ay beenta la dhoodhoobay tagto.

950. Wax la eryo been baa ugu orad gaaban.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in beenta ay tahay wax aan gundheereyn 00 haddii dib looraadraaco wax aan jirin noqonaya.

951. Wax la isfaray fariid laguma noqdo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu. waa: in ay wanaagsan tahay in qofka waxa loo sheegana uu qaato wixii dheeraad ah ee soo baxana uu isagu caqligiisa kaashado,

952. Wax nin xil moodo ayaa nin kale xarago moodaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dadku isku dhaqaniyo caado maaha. Dalalka aduunkuna waa sidaa. Waxaa dhaeda wax uu qof ka xishoodo in ay qof kale wax aan dhib lahayn aylatahayoouulskasamceyo,

941. Waraabe dhankii loo eryaaba waa u cid.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa:in mi jiro dadka qaar oo dhinaca ay doonaan u dabaasha oo aan xumaan iyo xaaraan midna shaqo ku lahayn,

942. Waraabe la tegis bartay ka dhigis waa ku ceeb.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofka markasta u bartay in aanu waxba liambeyn ee wax kasta uu keligii isku jaangooyo. Marka dambe ee la isku dayo in la xakameeyo wuu ka gilgishaa,,

943. Waraabe Leg hay ama lug hay.

Telegram Somali Books @som_Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka damacaiyo hunguri weyn marka wax la wadaagayo mama ma qado ee dheeraad ayuu raadiyaa.

944. Waran kugu soo noqon doona lama rido[(150)]

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku aanu ganin hadal iyo nabar marka dambe cabashadooda ay ku soo noqon doonto. Kaas oo laga yaabo in kiisli uu ka weynaado.

945. Wareer cawo waa loo waabariistaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa:in xalkeedu uu sahlanaanayo haddii dareen ama dhibaato la soo sheego goor habeen ah oo ilcawo ah in maalinta loo dhigto. Si dad badan oo ka qayb gala loo help,

946. Wax badso wax beel bay leedahay.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka hunguriga iyo damaca badan ee waxkasta keligii isla doonaya in marka dambe ay hungo u dambeyso.

947. Wax indho arkaan baa ilko gooyaan.

Duluc; Maahmaahdan macnaheeduwaa: in waxamuuqda ee la arid karo ay y ihii n waxa arrimahooda la gor feyn karo oo wax lagaqabankaro.......................................................................................... :

948. Wax isweydiini ma xumee wax iswaydaarsi baa aran

Du luc: Maahmaahdan macnaheedu waa:: in dhaqanka wanaagsan ee ; dadka nabadda j ecel uu yahay in waxa j ira oo dhibaato ah
4 wax la iska weydiiyo. Laakiin aan xumaan la is dhaafsan,

949. Waxkastaba waa tagaan runta uunbaa soo hadha

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in xaqa iyo runta ay labaduba yihiin waxa ugu dambeeya ee goobta u hara, M arka ay beenta la dhoodhoobay tagto.

Telegram Somali Books @som_Books

950. Wax la eryo been baa ugu orad gaaban.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in beenta ay tahay wax aan gundhegreyn oo haddii dib loo raadraaco wax aan jinn noqonaya.

951. Wax la isfaray fariid laguma noqdo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay wanaagsan tahay in qofka waxa loo sheegana uu qaato wixii dheeraad ah co soo baxana uu isagu caqligitsa kaashado.„

952. Wax nin xil moodo ayaa nin kale xarago moodaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dadku isku dhaqan iyo caado maaha. Dalalka aduunkuna waa sidaa. Waxaa dhacda wax uu qofka xishoodo in ay qof kale wax aan dhib lahayn ay la tahay oo uu feka sameeyo,

953. Wax rag kaa galay rako kaa gale.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: danta iyo xoolaha aadami gacantiisa kaa galay, sida aad si jfiidud ugu heshaa way a dag ............tahay<Waayoda<jku waadamacbadanyahay,...........................

954. Wax walaal loo diiday wed baa leh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka mudan oo u baahan hantida ama xoolaha laga afqabto ee loo dildo, qoikii ku bakhcylay kuma waaro ee wuu ka dhintaa xoolihii oo jooga.

955. Wax toosan markii la waayo wax tuur leh ayaa taliya

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: marka qofkii wanaagsanaa meesha ka baxo, qofkii xumaa ayaa ay dantu dadka bidaa oo meeshiisii ku fariista.

956. Waxaa jira dhego laab u dalool iyo kuwo laydh u daloola

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dadka waxaa ku jira qaar marka wanaag loo sheego qaata iyo qaar marka wanaag loo sheego meesha kagataga.

957. Waxaad barataa waad u boholyowdaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofkuhaddli uutusaale ahaan balwad barto ama waxyaabo kale oo dhaqan xumo ah. Haddii uu iska daayo muddo ka dib nafta ayaa u baahata oo wuu ku noqdaa,

958. Waxaad qarsato waa ku qarsadaan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dadka qaarkood ayaa dhacda in wax iyaga markaa la wanaagsan ay isku koobaan. waxaas oo marka dambe laga yaabo inay dhibaato u keenaan.

Telegram Somali Books @som_Books

959. Waxaadan faleyn iyo falaari waa kaa nixiyaan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: hadalka iyo nabarka iyo warka aan aanu qofku sugeyn si aad ah ayuu uga naxaa.

960. Waxaadan faleyn lama faaleeyo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: waxa habboon in qofku waxa uu dooneyn in uu sameeyo in aanu shecg sheegin oo unsan hadal hayn sidii isaga oo ay muhiim u tahay oo kale.

961. Waxaadan helayn waxaadan u baahneynbaa laga soo qaadaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: ma wanaagsana in qofku waxa aanu helayn oo ay tabar u diido in uu ka hawo gaabsado oo uu uga samro sidii isaga oo aan rabin.

962. Waxaadan hurayn[151] horaa loo yeelaa

Telegram Somali Books @som_Books

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: wixii dan ah ee in aad qabato ay waaj'ib tahay, weligeed dib looma dhigto ee markaa ayaa lagu dhaqaaaqaa.:

963. Waxaan daacad ahayni dabaday ka xumaadaan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: hawlkasta ama arrinkasta oo la qabanayo haddii aanay daacadnimo la socon, dhammaadkooda ayaa xumaata.

964. Waxaan hed[152] ahayn looma dhinto, waxaan calaf ahayna lama cuno.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka waxa dila waa wed iyo markii uu xilligiisa dhammaado. Waxa kale oo uu qofku wanaagsan inuu ogaado wax uusan calaf ku lahayn in aanu cuncyn.

965. Waxan maxay u dhaceen doqon baa leh sidee looga baxaana caaqil.

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa: marka la doonayo in arrin dhacday la daaweeyo wixii dhacay dib looguma noqdo, Waxa laga ambaqaadaa sidee ayaa hadda wax loo xalin karaa.

966. Waysha gawrac dibiga ha ku quusqaatee.

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa: dibiga iyowayshu reer miyigu waxa ayj.ecel yihiin.waysha, Waayo way u tanni. Haddii wayshii la qalo dibigu waxba uma yaalaan, Sidaa oo kale qof haddii uu walaalkii gar ka xukumo. aid kale isku haleyn mayso, *

Telegram Somali Books @som_Books

967. Wiilkaaga habeenka aad hooyadii doonayso ayuu hiilo kaaga baahan yahay

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa: si aad carruurtaada abtiyaal fiican ugu sameyso waxa wanaagsan in aad u mee 1 daydo marka aad guursaneyso. Waayo ilmaha reer wanaagsan abtiyaal looga dhigaa waxa uu noqonayaa ilmo labo toll eh.

968. Wiilkaaga iyo mid islaameed garta waa simaa.

Dulue: Maahmaahdan macnaheedu waa: si cadaaladda ilaahey loo oogo waxa wanaagsan in qofku u xaq sooro qofka uu garanayo iyo qofka aanu garaneyn.

969. Wixii aan gacantaada ku jinn iyo afkaaga way kala raagaan.

Dulue: iMaahmaahdan macnaheedu waa: qofka uma fududa in uu helo wax aan gacantiisa ku jirin oo aanu lahayn. Waayo waxa dhabta ah ee la isku haleyn karo waa waxa uu qofku ................ haysto.

t

## 970. Wixii rag ku kaco rabina aqbalo waa rumoobaan.

Duluc: Maahniaahdan macnaheedu waa: way u badan tahay waxa uu qofku isku dayo in uu saniecyo oo niyad ka ah in ilaahey la qabto oouukuguuleysto. .........................................................

## 971. Wixii uurkaaga ku jira afkaa kaa xada.

Duluc: Maahniaahdan macnaheedu waa: way adag tahay in qofku ealooshiisa oo ay xumaan ka buuxdo in uu afka wanaag ka shccgo. haddii uu taas isku dayana marar ayey dhacdaa in afku ka soo xado wax uusan ku talo gelin inuu yiraahdo.

## 972. Wixii waayeel ku hadlo carruurtaa ku hadaaqa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waai markasta qofka weyn waa tusaale oo kudaydo qofka yar hadal iyo ficilba, Markaa waxa habboon in qofka weyni turxaan blxlyo waxa uu ku hadlayo iyo waxa uu sameynayaba.

## 973. Wixii xunba xaawaa leh

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qof wax saarka leh oo. badanaa waxa reerka ama beesha dhexdeeda ka dhaca isaga loo saaro ama lugta loo geliyo ayaa jira. Dhaqankaas oo aan ahayn mid wanaagsam.

## 974. Xaajadaada waa ku sugtaa xoolahaagase kuma sugaan.

Duluc: Maahniaahdan macnaheedu waa: xagga kala hormarinta baahiyaha nolosha xoolaha soofaya ayaa laga homiarinayaa

## 975. Xaajo aan la rogrogin rag baan helin.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa; waxa wanaagsan marka ay cabasho arrin la isku haysto guurtida iyo geedka la keeno in laga baaraan dego oo kolba si lagu dayo, si marka dabme furaheeda loo helo.

Telegram Somali Books @som_Books

976. Xaajo dhan waa ka xusul dhanna waa ka taako.

Duluc: Maahmaahdan macnaheeduwaa: iyada oo la eegayo aragti dheerida dadka ayaa ay arrinmurugsan qofna wax aan la xalin Karin ugn muuqan kartaa, qof kalcna wax fudud oo la xalinkaro.

977. Xaajo geed lihi yey geed walba kugu dilin

+

Duluc: Maahmaahdan macnaheeduwaa: garta iyo tabashadumeel kasta kuma go'do, Waayo waxa wanaagsan in aad cabashadaada la doonato halka ay ka dliaw dahay ee ay joogaan dadka wax ka qaban kara.

978. Xaajo nin la toosan ayaa nin la tuur leh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: dadku isku aragti maaha, arrin qof la wanaagsan ayaa mid kale la xumaan karta. Taasina waxa ay ku xiran tahay qofkasta garashadii,

Telegram Somali Books @som_Books

979. Xabaal iyo ninkeed lays tus loona kala tag.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka iyo dantiisa ama shaqadiisa waa la siqaabilsiiyaa. Ka dibna labadooda ayaa la isaga tagaa. Waayo ma jiroqof u qabanaya dailihiisa qof ............... kale,.......................................................................................

980. Xabaal waalid baa xoolo lagala baxaa

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: ducada waalidku inta ay nool yihiin iyo hadday dhintaanlabadabaubadka way tiirisaa. Haddii waalidka marka ay dhintaan ilmahooda ay ka duceystaan, iyaguna way kubulaalaan,,

## 981. Xagalo geel wax guntigala galsho ka weyn.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku isku dayey in uu qariyo airin weyn oo ay adag tahay in la qariyo. Markaa ayaa la yiraahdaa arrintan wax qarsoomi kara way ka weyn tahay.

## 982. Xaglo laaban xoolo kuma yimaadaan.

Duluc: Maahniaahdan macnaheedu waa: fadhigu waau aabbe faqriga iyo wax la'aanta. Sidaa awgeed qofku waxa wanaagsan in uu xaglaha fidiyo oo socdo oo shaqeysto.

## 983. Xalaal iftiin baa la qashaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: waxa wanaagsan ama nadiifka ah waxa la diyaariyaa xi Hi maalin ah oo ay wax kas muuqdaan. Sidoo kale wixii xalaal ah ama sharci ah dadka oo arkaya ayaa la sameeyaa. -

## 984. Xamar xisaab xarar dheere xoog.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waat berigii hore noloshuwaxa ay ahayd qofka Xamar imaanaya waa in uu lacag haystaa. Lacag la'aan Xamar lagumanoolaan Karin. Laakiin qofka Xarar dheeere tegayaa haddii uu xoog leeyahay oo uu caafimaad qabo wuu iskaxoogsan jirey.

## . 985. Xantaada waad maqashaa xuuradaadase ma maqashid.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofku siuuku maqalaba waxa ay u badan tahay waxa ceebta iyo caayda laga sheegay in uu suuqa ka maqlo, laakiin lagama yaabo in uu khuuradiisa maqlo.

Telegram Somali Books @som_Books

986. Xantaada xiinkeedaa kuu baxa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku laga yaabo in aanu si toos ah dhaliishiisa qofna afkiisa uga maqlin, Laakiin uu guuxeeda suuqa iyo nieelaha bulshada isugu timaado uu ka maqlo.

987. Xaqa haddii afka la qabto feeruhuu ka dilaacaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in haddii la isku dayo in xuquuq qof ama dad leeyiluin la qariyo ay dhab lahay in meet aan laga fileyn- iyo si aan loo maleyneyn uu u soo baxo.

988. Xarago dumar xanuun ma 1 eh.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in ay badanaa dumarku waxba ku noqon si kasta oo ay waxtaga ku adag xarago ahaan u sameystaan. Waayo dhaawaca iyo xanuunka waxa uga muhiimsan quruxda.

989. Xadhig habeen ninkii xidha ayaa fura.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qolka arrin ama xaajo si gaar ah xogteeda u og isaga ayaa liabboon in uu galo oo furdaamiyo.

990. Xadhig keliya geel ma wada xidho.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: sida aanu hal xarig oo keliya geel badan loogu wada xiri Karin, ayaa baahiyo badan oo jira hal wax amah al mar la wada dabooli Karin.

991. Xikmadu qofka waalan Kama maqna.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: hadalka xubinta ku fadhiya ama murtida dadka maankoodu kala dhiman yahay xitaa waa ka soo yceri kattaa. Marka waxa wanaagsan qofkasta waa laga qaataa xitaa dadka waalan.

Telegram Somali Books @som_Books

992. Xil dhalaan gartay weynaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: xilka iyo xurmaduwaxa badanaa garta waayeelkaiyo waxgaradka. Mar haddii ay carruurtu garato waa xil la dayacay ama dad waayey.

993. Xiniinyo dherer ma doonaan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofkaasi xiniinyo ayuu leeyahay macnaheedu waa qofkaasi waa geest Geesinimaduna waa wadne iyo adkeysi,

994. Xisaab laawe xoolihiisa lagama dhugo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka aan wixiisa dhaqaaleysan intii uu noolaa ep isaga ciyaaray, Marka uu dhinto waxa dhacda in wax lagu gunaanado la waayo.

995. Xisaab nimaan dhafoorka uga dhididin, Xamaali ayuu dhabarka uga dhididaa.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku kudadaalo cillmiga, waayo cilmiguwaxa uu fududeeyaa shaqada qofkuna waxa uu u yeelaa sharaf iyo haybad.

996. Xoolahaaga xero ha kuugu jireen ama xeer ha kuugu maqnaadeen.

Duluc; Maahmaahdan macnaheedu waa: in qofku hantida iyo maalka uu leeyahay ay uu meal ammaan ah isagu gashado ama dhigto ama ha ku bixiyo si gharci ah.

Telegram SomaliBooks @som_Books

997. Xujo ma falantee xaajaa falanta

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: mafka ay arrlntu xeeriyo .garsoor tahay waxa wanaagsan in qofku si daacad xuquuqdiisa u raadsado, oo aanu adkeyn dacwadiisa.

998. Xunbo iyo xiisaba waa dhacaan.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka xiisaha badan ee kolba wax gaar ahkubooda ee xiiseeya, marka dambe wuu ka wuu nacaa wixii mi ku dirnaa. Xumbadu waa sidaa do dabeysha ayaa rida.

999. Xusuus baa geela lagu xero geeyaa.

Duhic: Maahmaahdan macnaheedu waa: lecjeclo iyo kalgaceyl loo qabo iyo dhibaatooyin hore oo looga soo baxay ayaa geela lagu xanaaneeyna. Dadka qaarkiina waxa lagu xirihiyaa a wanaagga ay lahaaveen dadka ay ka soojeedaam

1000. Yaxaas Hadduu afka kula waayo Saynta kulama waayo.

Duhm: Maahmaahdan macnaheedu waa: dadka-qof baa jira makrigiisa iyo khiyaanadiisa haddii uu si muuqata. wax kuu yeeli waayo, si qarsoon ayuu kuu laqdabeynayaa.■

1001. Yaryareyste wiilkiisa ayaa la tuugaa

Duiuc: Maahmaahdan macnaheedu waa: qofka wax tashiisha ee xoolaha ilaahey siiyo aan ku ciyaarin, waxa uu carrumtiisa

uga tagaa dhaxal wanaagsan. Markaa ayey baryaan dadka la filka ah ee aanay waalidkood waxba uga tegin.

1002. Yeele waa ilaawaa laakiin la yeele ma ilaawo.

Duluc: Maahmaahdan macnaheedu waa:badanaa qofka gef ku sameeya qof kale, marka waayo laga soo wareego wuu iloobaa wixii uu sameeyey. Laakiin qofkii lagu sameeyey xumaantaas ma hilmaamo.waayo dhibtu waxa ay ku dhacday isaga.

Telegram Somali Books @som_Books

# EREY-FURKA MAAHMAAHYADA

- Faruuryo
- Godob ama dakano[2]
- Qosol[3]
- La barwaaqeysan[4]
- Dhibaato ama dan[5]
- Biyo doonid[6]
- Kaxeysaa^
- Cudurdaar[8]
- Towba[9]
- Ma liico[10]
- Buur[11]
- Sabada guriga[12]
- Canaan[13]
- Ku raacid[14]
- Calaacaf[15]
- Wasakh[16]
- Sagaarada lab[17]
- Nasiib badan[18]
- Dhibaato ama koronkoro[19]
- Geed ama caws[20]
- Xamasho ama druid[21]
- Oohinta[22]
- Barwaaqo[23]
- Reero[24]
- Ku noqnoqosho[25]
- Ifafaalo[26]
- Aayar-aayar[27]
- Dhibaato[28]
- Cudur[29]
- Awrka la rarto[30]

Telegram Somali Books @som_Books

*S* Tartiib(31)
*J* Daruur'32)
Wehel(33)
*S* Samirsiiyey(34)
*J* Qaloocat/35)
Qalbi(36)
*S* Daan(37-
*S* Kelishubay(38)
*S* Waraabsana<39)
*S* Biyo xun(40)
*S* Badeeco(41)
*J* Caqli(42)
*S* Cad-quudheed(43)
*S* Liqaan(44)
*S* Cudur maqaarka ku dhaca<45)
*S* Shimbiralaaye^46)
*S* Seynta taag^47)
*J* Caqli(48)
*J* Hoostaada(49)
*S* Lumaa(50)
*S* Kaalay(51)
*J* Haraati^52)
*J* Yeedhid(53)
*J* Dabar<54)
*S* Dheelmadaa(55)
*J* Jiin ama qar(56)
*S* Haadaan(57)
*S* Dhiig qabe(58)
*J* Mid(59)
Fiin(60)
*S* Bahai dhulka qoda^61^
*J* Carruur(62)

Telegram Somali Books @som_Books

•/ Ficil[63]
•/ Qarsoona[64]
Maro yar[65]
■/ Kaftamayo[66]
•/ Legdin[67]
•/ Cad hilib ah[68]
J Geed mirihii[69]
Hawl[70]
•/ Hadal sireysi[71]
Faanfaanaan[72]
■/ Dilaac[73]
•/ Kelyo[74]
•/ Deyn[75]
■/ Iska-tuurid[76]
V Roobka[77]
7 Nabarka[78]
J Sheekh[79]
J Guul[80]
•/ Haasaawisa/sheekeysata[81]
Odayaal[8Z]
•/ Is-tus[83]
Meel cidhiidhi ah[84]
V Gole ciyaareed[85]
J Haro ama war biyood[86]
Hadhuudh ama Mesego[87]
Dhisto ama hoosiisto[88]
Xoolo raac[89]
Alle-baryaa[90]
Hadhuub gaal[91]
■/ Rejo[92]
Kaadi[93]
Hab[94]

Telegram Somali Books @som_Books

■f Faras dhedig(95^
Z Cudur(96)
■J Ceebeeyo ama dayaco(97)
•/ Dhab(98)
J Midab(99)
Z Fir(I00)
■J Meel Gendi ama qaniin leh(101)
J Qof la yaqaan(I02)
J Barakow(103)
J Qayb(104)
J Qof dhintay(105)
J Halyey(106)
■S Iridda guriga(107)
J Awrka qoodha ah(108)
J Baruur(109)
•S Caday(110)
Tororog ama dan ahayn(111)
J Hawadaadu(112)
S Qariyo ama dedo(113)
J Xaaraan(114)
Z Geedka(115)
J Godka(116)
Z Caato(117)
J Indho-biririqsi(118)
Faa'iido(119)
J Fagaare(120)
■f Dhibaato(121)
J Guumeys(122)
. Z Codka walax cireed(I23)
Z Hunguri(I24)
Z Koley ama sibraar(125)
Z Jiidhka(126)

Telegram Somali Books @som_Books

*S* Kashkaashka(127)

Z God(128)

*S* Tusaale(129)

*J* Mindi aan af-lahayn(130)

*S* Birta kalluunka lagu dabo(131)

*J* Khiyaane(132)

*S* Sahan biyood(133)

*J* Haamc/134)

v Roob(135)

*J* Maal(136)

*J* Gurigeeda(137)

*S* Hees ama jiib(138)

*S* Loo xambaarsan yahay(139)

*J* Dabeyl(140)

*S* Awood(141)

*J* Dameer yar(142)

*S* Seyn(143)

*S* Cudur xun(144)

*S* Xarig yeel ah(145)

Asal<146)

*J* Galka haanta(147)

*J* Faqriyo(I48)

*J* Dhalinyaro(149)

Z Gano<150)

*J* Lagamaarmeyn(151)

*S* Wed ama geeri<152)

Telegram Somali Books @som_Books

E-Mail: abd uIkadcom
Taariikhda dib loo akhriyey
Jan 2016